



Wasaaradda Deegaanka iyo
Isbedelka Cimilada
Jamhuuriyada Somaliland

Siyaasada

Qaran ee Isbedelka Cimilada Somaliland

Waxa Ansixiyey Gollaha Wasiiradda
Jamhuuriyadda Somaliland

Tusmadda

Erayga Wasiirka	4
Mahadnaq	5
Eraybixin	6
Wareegto Madaxweyne	8
SOOKOOBID	9
1. XOGTA GUNDHIGA AH EE DEEGAANKA IYO BULSHADA	10
1.1 Hordhac Guud	11
1.2 Cimilada	11
1.3 Aagagga Cimilo	12
1.4 Heerkulka	14
1.5 Xaddiga Uumibaxa (potential evapotranspiration)	14
1.6 Khayraadka biyaha	14
1.7 Dhirta	15
1.8 Xayawaanka	16
1.9 Tayabeelka Deegaanka	16
1.10 Qaybaha Dhulka (Geomorphology)	17
1.11 Isticmaalka Dhulka	17
1.12 Deegaanka Dhaqan-dhaqaale	18
2. SABABTA, HIGSIGA, UJEEDDADA, IYO MABAADI'DA HAGAYSA	20
2.1 Sababta ka danbaya Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada	21
2.2 Higsiga Siyaasaddan	22
2.3 Ujeeddada Guud Ee Siyaasaddan	22
Ujeedooyinka Gaar ka ah ee Siyaasaddan	22
2.4 Baaxadda Siyaasaddan	23
2.5 Qaab-dhismeedka Siyaasaddan	23
2.6 Mabaadi'ida Hagaysa	24
2.7 Adeeqsiga 25	
2.8 Arrimaha ay Awooda saarayso Siyaasadda Isbeddelka Cimiladu	25
2.9 Laqabsiga	26
2.10 Latacaalid	27
3. MACNAHA GUUD EE ISBEDDELKA CIMILADA	28
3.1 Sharraxaad	29
3.2 Sansaanka cimilo ee Caalamka	29
3.3 Sansaanka cimilo Ee Gobolka	32
3.4 Sansaanka Cimilo ee Dalka	33
4. LAFAGURKA XAALADEED EE ISBEDDELKA CIMILADA SOMALILAND	35
4.1 Caddayamaha Isbeddelka Cimilada ee Somaliland	36
4.1.1 Heerkulka	36
4.1.2 Hoormaadka/Da'aa (precipitation)	36
4.1.3 Abaaraaha	38
4.1.4 Daadadka iyo Carraguurka	39
4.1.5 Korodhka Heerka Badda - Heerkulka Oogada Badda	39
4.1.6 Lumitaanka Noolaha Kala Duwan iyo Burburka Deegaanka	40
4.2 Raadadka Isbeddelka Cimiladu ku leeyihiiin Qaybaha kala duwan ee Somaliland	40
5. SHRUUCDA IYO XEERARKA HEER QARAN IYO KUWA CAALAMIGA AH EE HORE U JIRAY	44
5.1 Shuruucda Heer Qaran iyo Siyaasadaha Guud ee Somaliland ee Arintan La Xidhiidha	45
5.1.1 Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland	45
5.1.2 Higsiga Somaliland ee 2030	45
5.1.3 Xeerka Maaratinta Deegaanka (X.L. 2018/79)	46
5.1.4 Shuruucda Kale ee Qaranka ee Siyaasaddan la Xidhiidha	48
5.2 Shuruucda iyo Siyaasadaha Caalamiga ah iyo kuwa Gobolka	49
5.2.1 Seddexdii Heshiis ee Rio (The Three Rio Conventions):	49
5.2.2 Heshiiska Baariis (Paris Agreement)	52
5.2.3 Habmaamuuska Kyoto (The Kyoto Protocol)	53



5.2.4	Guddiga Dawladdaha ka Dhexeeyaa ee Isbeddelka Cimilada (Intergovernmental Panel on Climate Change)	54
5.2.5	Xarunta Caalamiga ah ee Deegaanka (Global Environment Facility (GEF))	54
5.2.6	Istaraatijiyadda IGAD ee Isbeddelka Cimilada Gobolka (IGAD Regional Climate Change Strategy)	54
5.3	Hagaha IGAD-ICPAC ee Qabanqaabada Ka-wadashaqaynta Adeegyada Cimilada	55
5.4	Dedaallada kale ee Caalamiga ah	55
6	XEELADAHA LAQABSIGA IYO U-ADKAYSIGA AAFOOYINKA CIMILADA	57
6.1	Qaybaha Mudnaanta leh	58
6.1.1	Qaybta Beeraha	58
6.1.2	Qaybta Xoolaha Nool	60
6.1.3	Qaybta Biyaha	61
6.1.4	Qaybta Kalluumaysiga	62
6.1.5	Deegaanka Dabiiciga ah (Dhirta iyo Xayawaanka)	63
6.1.6	Qaybta Kaabyaasha Gaadiidka iyo Waddooyinka	64
6.1.7	Qaybta Tamarta iyo Macdanta	65
6.1.8	Qaybta Isgaadhsiinta Tignoolajiyadda	66
6.1.9	Qaybta Magaaloooyinla/Deegaanka Dhisan	67
6.1.10	Qaybta Waxbarashada	68
	Ujeeddada	68
6.1.11	Qaybta Caafimaadka	69
6.1.12	Taabagalinta Arimaha Qoyska	70
7	ISKU DUBBARIDKA ARRIMAHAA LAQABSIGA ISBEDDELKA CIMILADA	71
7.1	Awood- kobcinta (Capacity Building)	72
7.2	Cilmibaadhista iyo Tignoolajiyadda	72
7.3	Iskaashiga Goboleed iyo ka Caalamiga ah	72
7.4	Xogta iyo War-is-gaadhsiinta	72
7.5	Waxbarashada iyo Wacyigelinta Dadweynaha	73
7.6	Warbaahinta	73
8	TALLAABOOYINKA LAGULA TACAALAYO ISBEDDELKA CIMILADA	74
8.1	Tamarta	75
8.2	Beeraha, Xoolaha Nool iyo Kalluumaysiga	75
8.3	Qaybta Kaymaha iyo Iisticmaalka Dhulka	76
8.4	Wershadaha	77
8.5	Qashinka	77
8.6	Caafimaadka	78
9	QAABABKA MAALGELINTA SIYAASADDA QARAN EE ISBEDDELKA CIMILADA	80
9.1	Qaybta Dawladda	82
9.2	Qaybaha aan Dawliga ahayn	82
9.3	Hal-abuurka Qaadhaan-ururineed oo Gudaha ah	82
9.4	Fursadaha Maalgelinta Cimilada ee Caalamiga, kuwa Dhinacyada Badan, iyo kuwa Laba-Geesoodka ah	82
9.5	Maalgelinta Cimilada ee aan Dawliga ahayn (Haayadaha Khayriga ah)	83
9.6	Qorshayaasha Iskaa-wax-u-qabsada ah ee Isu-dheellitirka Kaarboonka	83
10	FULINTA SIYAASADDA ISBEDDELKA CIMILADA	84
10.1	Haayadaha Dawladda	85
10.1.1	Doorka Wasaaradaha ee fullinta Siyaasadda Isbeddelka Cimilada.	85
10.2	Unugga Heer Quran ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada (Coordination Unit)	89
10.3	Qaab-dhismeedyada Shuruucda (Legal Frameworks)	90
10.4	Ku-darida Isbeddelka Cimilada Qorshaha Qaranka	90
10.5	Heshiisadya Isxilqaanka ah	91
10.6	Cilmibaadhista, Tignoolajiyadda iyo Horumarka	91
10.7	Taabbagelinta Arrimaha Lamaanaha	91
10.8	Fursadaha Isbeddelka Cimilada	92
11	CAQABADHA SIYAASADDA QARANKA EE ISBEDDELKA CIMILADA	93
11.1	Caqabadaha Wadashaqaynta	94
11.2	Caqabadaha Farsamada, Shaqaalahi, iyo Awooddha Dhaqaalahi	94
11.3	Awood-yaraanta Fulinta ee Hababka Xakamaynta	94
11.4	Helitaanka Kaalmada Caalamiga ah	94
12	DABA-GALKA IYO QIIMAYNTA SIYAASADDA	95
	TIIXRAAC	97

ERAYGA WASIIRKA



Waxa aan jeclahay in aan fursadan uga faa'iideysto in aan u mahadnaqo Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland oo muhiimad iyo tixgalin gaar ah siiyey sidii wax looga qaban lahaa saameynta isbeddelka cimiladu ku yeelatay guud ahaan dalka iyo bulshada Somaliland, una xilsaarey in Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu sii laban laabto dedaalada lagula tacaalayo arimaha wax ka qabashada saameynta isbeddelka cimilada. Sidoo kale wuxuu aan u mahadnaqyaasid kasta oo gacan ka gaysatey curinta iyo dhameystirka siyaasadan.

Dadweynaha Somaliland waxay soo fahmayaan raadka uu isbeddelka cimiladu ku yeelanayo noloshooda bulsheed iyo tan dhaqaalaba. Somaliland waxa ka go'an in ay dhaqangeliso dhammaan dokumentiyada sharchiyed ee caalamiga ah ee loogu talagalay ilaalinta deegaanka. Xukuumadda Somaliland iyadoo tixraacaysa Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland oo jideeyay in loo hogaansamo waajibaadka caalamiga ah, waxay u hogaansan tahay in ay hirgeliso saddexda heshiis ee Qarammada Midoobay (QM) ee Rio kuwaasi oo ku saabsan isbeddelka cimilada, kala-duwanaanshaha noolayaasha iyo la-dagaallanka nabaadguurka, ee kala ah:

1. Heshiiska Qarammada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada (Heshiiska UN-FCCC).
2. Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaasha.
3. Heshiiska Qarammada Midoobay ee la-dagaallanka Nabaadguurka.

Siyaasadda Qaranka ee Isbeddelka Cimiladu, waxay diyaargarow u tahay la-jaanqadidda heshiiskii Paris oo ah is-afgarad taariikhii ah oo meelmariy heshiis guud oo waaraya oo isbeddelladana la jaan qaadi kara, dhinacyada oo dhana ka doonaya in ay tallaabo cimilada khusaysa qaadaan. Waxay sidoo kale waafaqsan tahay Habmaamuuska Kyoto (Kyoto Protocol) oo ah heshiiska Qarammada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada ee sanadkii 2007-dii. Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waxay Somaliland ku waajibinaysaa in ay diyaariso dhamaan xeerarka iyo siyaasaha loo baahan yahay oo ay fuliso barnamijyo fududaynaya laqabsiga iyo yaraynta saameynta isbeddelka cimilada.

Xukuumadda Somaliland, si ay u dhaqangeliso siyaasaddan, waxay taageero farsamo iyo mid dhaqaale uga baahan tahay hay'adaha Qaramada midoobay, kuwa caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ee ka shaqeeya mashaariicda isbeddelka cimilada wax lagaga qabanayo, si loo xoojiyo laqabsiga iyo adkaysiga bulshada ee la xidhiidha afooyinka ay keento isbeddelka cimiladu.

Sida siyaasaddani dhigayso, isbeddelka cimilada ee guud ahaan Somaliland, mandiqadda geeska Afrika iyo caalamkaba ku yahay, waa dhibaato taagan oo tabanaysa arrimaha dhaqan-dhaqaale, sababtoo ah waxa raadadka ka dhashaa ay saameeyaan habdhiska deegaannada dabiiiciga ah, kala-duwanaanshaha noolaha, dadweynaha iyo sidoo kale dhammaan hab-nololeedyada kale.

Saamaynta waqtii xaadirkan waxa la qiyaasayaa in ay ka sii darto, marka loo eego kor u kaca heerkulka sii kordhacya, kaas oo keenaya abaro soo noqnoqda, duufaanno, daedad, iyo roobab oo aan la saadaalin karin. Sidaa darteed, isbeddelka cimilada waa in loo aqoonsado arimaha muhiim ka u ah barnamijyo horumarinta qaranka. Siyaasaddani waxay dardargelin u tahay dhammaan daneeyayaasha Somaliland iyo saaxiibbada caalamiga ah si ay ula dagaallamaan saamaynta isbeddelka cimilada, waxayna ka gacan siinaysaa halbeegyada laqabsi ee ugu habboon iyo istaraatajiyadaha ilaalinta deegaanka, iyadoo isla markaana isbeddelka cimilada qayb ka siinaysa mashaariicda horumarinta.

Marwo Shukri X. Ismaaciil Maxamuud (Baandare)

Wasiirka Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

Jamhuuriyadda Somaliland



Mahadnaq



S iyaasadda Qaranka ee Isbeddelka Cimilada ee Somaliland waxa diyaarinteeda qayb ka ahaa daneeyayaal badan oo Somaliland ah, iyo Hay'adaha Somaliland.

Waxa ka mid ah: hawladeennada iyo maamulka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, lataliyayaasha iyo hawladeennadda haayadda UNDP, iyo xubno ka socda bulshada rayidka ah, iyo haayadaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba. Waxa aan si weyn ugu mahadnaqayaa Wasiir Shukri X. Ismaaciil Baandare, doorkii hoggaamineed ee ay ka qaadatay dejinta siyaasaddan. Waxa aan sidoo kale u mahadnaqayaa hawladeenka Wasaaradda ee qaybta ka ahaa geeddigii diyaarinta siyaasaddan iyo dib-u-eegisteedaba, oo ay kamid yihii Agaasime waaxeedyada llaalinta Deegaanka, Mudane Aadan Axmed Xasan, Agaasimaha Waaxda Fayo-dhowrka iyo Horumarinta Deegaanka Magaalooinka, Mudane Maxamed Yaasiin Cabdiraxmaan, Agaasimaha Waaxda Dhirta iyo Daaqa, Mudane Axmed Ibraahim Warsame, Aadan Nuur Cabdillaahi oo kamid ah Waaxda Deegaanka, Amuun Cali Haybe oo ahayd Agaasimaha Waaxda Horumarinta Reer Miyiga, La-taliyayaasha waasaarada ee ay ugu horeeyaan Cabdikariim Aadan Cumar, iyo Cumar Cabdilahi Cali, oo si aan kala go' lahayn wax ugu darsaday dib-u-eegisna ugu sameeyay siyaasaddan.

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu waxay qadarin wayn u haysaa lataliye Maxamed Faarax oo gacan ka geystay horumarinta iyo ansixinta siyaasaddan, iyo lataliyaha farsamo ee Xasan Xuseen Cabdi oo tusaale iyo kaalmo farsamo ka geystay hannaankii dib-u-eegista siyaasadda isbeddelka cimilada. Waxa aanu sidoo kale abaal u haynnaa lataliye Cali Cabdi iyo Maxamed Yuusuf Maxamed [Guruuje] oo bar-bilowgii siyaasadan qoraalkeeda qayb wayn ka qaataay, iyo Axmed Ibraahim Cawaale oo akhris hubin ah ku sameeyay qabyo-qoraalkii u horeeyey ee siyaasadda.

Mar kasta waxa aanan illaawayn taageerada joogtada ah ee hawladeennada haayadda UNDP, gaar ahaan taageeradooda farsamo iyo midda maaliyadeedba, iyo sida weyn ee ay uga go'an tahay in ay gacan ka geystaan maamul-wanaagga qaybta deegaanka iyo in heerka adeeg-bixinta ee Wasaaraddu uu horumaro.

Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa mudane Nabiil Yuusuf Cabdi iyo Cabdi Yuusuf Abokor oo dedaal ku bixiyay in ay Wasaaradda ka saacidaan qaabaynta Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimilada. Waxaaan ku rejo waynahay in Siyaasadani horseed u noqoto dedaalada qaran ee wax lagaga qabanayo saamaynta Isbeddelka Cimilada, isla markaana lagu dhisayo bulsho adkeysi u leh khataraha ka dhasha isbeddelka cimilada.

Mahad aan dugoobin ayaanu u haynaa kaqaybgalkii iyo taageeradii ay ururrada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahiba ku biiriyeen dejinta siyaasaddan.

Ugu danbayn, waxa abaal guud aannu u haynaa doorkii wanaagsanaa ee ay ka qaateen Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimilada una hureen qaybaha kala duwan ee hawladeennada Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka cimiladu, iyo xubnaha ka socdey haayadda dawladda iyo kuwa gaarka ahba.

Maxamed Cabdilaahi Ducaale
Agaasime Guud ee
Wasaaradda Deegaanka iyo
Isbeddelka Cimilada
Jamhuuriyadda Somaliland

ERAYBIXIN

Cimilo

Waa celceliska xaaladda kulayl iyo qabow, huur, cadaadis, roob, iyo dabayleed ee muddo dheer ka jirta deegaan.

Isbeddelka cimilada

Waa isbedel muddo dheer ku yimaadda cimilada, heer gobol, qaaradeed iyo adduunba.

Neefaha guriga cagaaran

Waa neefaha gibilka inagu xeeran ee masuulka ka ah sababidda kululaanshaha caalamka iyo isbeddelka cimilada. Hawoojinka noocaas ah ee ugu waaweyni waa carbon dioxide (CO_2), methane (CH_4) iyo nitrous oxide (N_2O). Neefaha guriga cagaaran ee kale ee aan aadka u shaacsanayn-laakiin awoodda badan-waxa ka mid ah hydrofluorocarbons (HFCs), perfluorocarbons (PFCs) and Sulphur hexafluoride (SF_6).

Guddiga Dawladaha ka Dhxeeyaa ee Isbeddelka Cimilada (Guddiga IPCC)

Guddigan waxa la asaasay sannadkii 1988. Wuxuuna sahamiyaa qoraallada cilmiga iyo farsamadaba la xidhiidha ee caalamka, wuxuuna faafiyaa warbixino qiimayn ah oo loo aqoonsan yahay in ay xanbaarsan yihiin macluumaadka runta ugu dhow ee ku saabsan isbeddelka cimilada.

Latacaalida

Waa tallaabo kasta oo loo qaado sidii loo yarayn lahaa ilaha neefaha guriga cagaaran iyo waxyeelladooda.

Horumar joogtaysan

Waa horumarka waaraya oo waafaqsan baahiyaha taagan isaga oo aan wax u dhimayn awoodda ay jiilasha danbe u yeelan lahaayeen in iyaguna ay baahiyahooda ka jawaabaan.

Heshiiska Qarammada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada

Waa heshiis caalami ah oo ay 195 waddan saxeexeen, dhaqangalna noqday sannadkii 1994. Hadafka Heshiiskani waa "in neefaha guriga cagaaran ee gibilka inagu gedaaman ku biiraya lagu koobo oo lagu xadeeyo heer ka hortegi kara tallaabooyinka faragelinta bini'aadanka ka dhasha ee halista ku ah nidaamyada cimilada.



ERAYBIXIN

Nuglaansho

Waa heerka uu nidaam kastaa u nugul yahay, ama aanu la tacaali karin, raadadka ba'an ee isbeddelka cimilada, sida gedgeddoonka iyo qallafsananta cimilada. Nuglaanshuu wuxuu la xidhiidhaa sifada, xajmiga iyo xaddiga uu gedgeddoonka cimiladu ku habsado nidaamkaas, sida uu uga jawaabo iyo kartida uu u yeesho in uu qabatimo.

Habmaamuuska Kyoto

Waa heshiis caalami ah oo iskii u taagan, oo dawladaha uga baahan meelmarin u gaar ah, haddana ku xidhan heshiiska UNFCCC. Habmaamuuska Kyoto, in kastoo qodobbo kalana ay ku hoos jiraan, wuxuu dalalka wershadaha leh u dejinaya bartirmaameedyo lagu higsanayo yaraynta heerka sii-daynta neefaha guriga cagaaran.

Laqabsi

Waa in lala qabsado nidaamyada dad-sameega ah iyo kuwa dabiiciga ah iyadoo laga falcelinayo saamaynta daran cimiladu keento oo dhab ah ama mid la filanayo, ama raadadkeeda, taas oo lagu beegsanayo in waxyeellada lagu yareeyo ama fursadaha waxtarka leh laga faa'idaysto.

Kartida Laqabsiga

Waa awooddha ama kartida uu nidaam kastaa u leeyahay in uu si guul leh uga falceliyo gedgeddoonka iyo isbeddelkacimilada,sidala-qabsashadadhinacyadahabdhaqanka,khayraadkaiyotignoolajiyadda.

U-adkaysiga Cimilada

In adkaysi loo yeesho cimiladu, oo si dhow ula xidhiidha Laqabsiga, waxa ka mid ah yaraynta u nuglaanshaha isbeddelka cimilada, iyadoo la xaqiijinayo in raadadka cimilada laga baaqsado ama la dhimo, dadweynahana awood loo siinayo in ay halisaha cimilada ka falceliyaan.

Wareegto Madaxweyne

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1110/112023

Taar: 07/11/2023

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimillada

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilladu u Leedahay Dhismaha Qaranka iyo Wax-ka-qabashada Saamaynta Isbeddelka Cimillada;

Markaan Arkay: Go'aanka Fadhiga Golaha Wasiirada ee Fadhi Lr. 114aad, kuna taariikhaysan 20/07/2023 ee ay ku anxiyeen Dhaqan-galka Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimillada Jamhuuriyadda Somaliland;

Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimillada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



SOOKOOBID

I sbeddelka cimilada waxa loo aqoonsaday in uu ka mid yahay caqabadaha ugu waaweyn ee dadka soo wajahay qarnigan 21aad. In kasta oo heerka neefaha guriga cagaaran (green house gasess) ee ay Somaliland sii dayso ee lala xidhiidhin karo kululaanshaha caalamka iyo isbeddelka cimiladu aanu wax-ka-soo-qaad lahayn marka la barbardhigo waddamada kale, sida kuwa mandaqadda, haddana Xukuumadda Somaliland waxay qirsan tahay in saamaynta taban ee dadka ee Deegaanka ay kaalin laxaad leh ka ciyaraan ka-sii-daridda raadadka uu isbeddelka cimiladu ku yeelanayo dalka. Sidoo kale Xukuumadda Somaliland waxay aqoonsan tahay in raadadka isbeddelka cimiladu ay cawaaqib xumo daran ku keenayaan dalka maaddaama in ka badan boqlkiiba toddobaatan dadweynaha Somaliland ay si weyn ugu tiirsan yihiin dhaqaalaha khayraadka dabiiciga ah ee xaddidan (xooladhaqashada, dhul-daaqsimeedka iyo beeraha roobka laga waraabiyo), iyo adeegyada kale ee ka soo jeeda habdhiska deegaanka dabiiciga ah ee aadka u nugul. Sidoo kale xukuumaddu waxay aqoonsan tahay, iyadoo ka duulaysa heerka Laqabsiga ee waddanka oo hooseeya, in Somaliland ay aad ugu nughashay raadadka isbeddelka cimilada – nuglaanshahaas oo ay uga sii daraan qodobbo kale, sida awood yaraanta haayadaha waddanka u diyaar garoobi karaan uga falcelin karaan masiibooyinka, iyo khilaafaadka degaamaysan ee soo noqnoqda.

Siyaasaddani waxay ku timi hannaan nidaamsan oo qaabaysan oo ku salaysan hab wadatashi ah oo cid kastaa qayb ka tahay, iyadoo fikradaha laga keenay haayadaha ay khusayso. Waxy loo qorsheeyay in hannaanka dejintu uu sida ugu ballaadhan ee ugu macquulsan u noqdo mid loo dhan yahay oo daahfuran, si loo xaqijiyo in cid kastaa lahaansho ku dareento awoodna u yeelato in ay adeegsan karto.

Waxa la abaabulay kulanno ballaadhan oo haayadaha daneeyayaasha ahi ay isku arkaan oo isugu jira falanqayno koox-koox u qaabaysan, aqoon-isweydaarsi iyo kulanno gaargaar ah, waxa kale oo la abaabulay kulanno intern-eedka ah oo maclummaad la isku weydaarsanayo iyo wixii qoraallo horey looga qoray mawduucan oo dib loo wada eegay. Sidoo kale waxa la qabtay kulanno fool-ka-fool ah oo lala yeelanayo wakiillada haayadaha daneeyayaasha ah oo si qoto dheer la isugu waraysanayo. Wadatashiga heerarkiisa ugu sarreeyana waxa ka mid ahaa in dhawr goor la qabtay Aqoon-isweyraadsyo Heer Qaran ah oo ku saabsan Hannaanka Dejinta Siyaadda. Sidaa darteed Siyaas-addan Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waa agab siyaasadeed oo muhiim u ah la tacaalidda raadadka suuragalka ah ee isbeddelka cimiladu ku yeelan karto dalka. Siyaasaddani sidoo kale waa hagaha loo adeegsanayo marka la isu geynayo waxqaqashada kala duwan ee isbeddelka cimilada ay ka bixinayaan dhammaan qaybaha dhaqaale, deegaan iyo bulsheed, si qaab habboon loogu maareeyo caqabadaha mustaqbalka iyo masiibooyinka isbeddelka cimiladu keento. Siyaasaddani waxay ka marag kacaysaa sida ay Xukuumadda uga go'an tahay in isbeddelka cimilada wax lagaqabto iyadoo la horumarinayo tallaabooyinka u adkaysiga kor u qaadaya ee qaybaha dhaqaale, deegaan iyo bulsheed ee muhiimka ah, si loola tacaalo caqabadaha isbeddelka cimilada, iyadoo dhanka kale laga garaabayoo fursadda uu isbeddelka cimiladu dalka u siinayo in dhidibbada loo taago horumar waara oo bulsheed.

Hadafka Siyaadda Qaranka ee Isbeddelka Cimiladu waa in la abuuro jewi awoodsiineed (dhan siyaasadeed iyo dhan sharchiyeedba) oo isku xidha islana jaanqaadsiya falcelinaha iyo tallaabooyinka wax lagaga qabanayo isbed-delka cimilada ee qaybaha horumarka ee muhiimka ah. Iyadoo dhaqangelinta Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada ay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu korjoogtayn doonto, haddana iskuxidhnaanta iyo hawlaha maalinlaha ah waxa maamuli doona Unugga Iskuxidhka ee Isbeddelka Cimilada [Climate Change Coordination Unit (CCCU)], oo ah unug ay Wasaaraddu magacaabi doonto oo masuul ka noqon doona arrimaha isbed-delka cimilada ee Somaliland. Dhaqangelinta wax-ku-oolka ah ee siyaasadda isbeddelka cimiladu waxay u baahan doontaa in ay qayb ka noqdaan dhammaan daneeyayaashu, sida haayadaha xukuumadda, hayadaha caalamiga ah, ururrada aan dawliga ahayn, bulshada rayidka ah, shirkadaha ganacsiga, iyo jaamacada



[XOGTA GUNDHIGA AH EE
DEEGAANKA IYO BULSHADA]


1.1 Hordhac Guud

Somaliland waxay dhacdaa Geeska Afrika, bedka dhulkeeduna waa 177 000 km², waxayna leedahay deegaan nolol-duleed (biophysical) oo ka kooban khayraad biyood, kala-duwanaansho nololeed oo xaddidan iyo habdhiska deegaanno dabiici ah oo kala gedgeddisan. Joogga dhulku wuxuu isugu jiraa meel 2,633 mitir heerka badda u jirta oo figta ugu fiiqan ah, iyo meel heerka badda la siman. Qaybo badan oo waddanka ahi waa taagag iyo buuro, laakiin ma laha webiyo iyo harooyin.

Tan iyo intay Somaliland dib ula la soo noqotay madaxbannaanideeda sannadkii 1991, Somaliland waxay ahayd welina tahay dal nabdoon marka loo eego dalalka gobolka, oo raacay jid ka duwan ka ay martay Soomaaliland. Qaranku, isagoo ka faa'idsanaya xasilloonidaa uu helay, ayuu u dhaqaaqay higsi dawlad-dhis ah oo yoolkiisa ay shidaalinayeen yididdiilada muwaaddiniintu u hayaan nidaam dimuqraaddiyadeed oo isugu jira horumar dhinaca siyaasada, dhaqaale iyo bulsheedba ah. Iyadoo yididdiiladaa laga duulayo, ayaa waxa asaasmay haayado dawladeed iyo kuwo aan dawli ahayn, saxaafad madaxbannaan, xisbiyo siyaasadeed, iyo nidaam caddaaladeed, oo shacabka u qabsoomaya, isla markaana isla jaanqaadsiinaya horumarka dhaqaale iyo baahida ilaalinta deegaanka.

1.2 Cimilada

Somaliland waxa loo kala saaraa saddex aag cimilo oo gobolladeeda ku kala filiqsan. Waxayna kala yihii: (a) aag lamadeegaan ah (desert zone) oo raacsan jiidda xeebeed, (b) aag aad u roob yar (very arid zone) oo dhaca badhtamaha iyo galbeedka, iyo (c) aag saxare- xigeen ah (semi-arid zone) oo dhaca qaybaha hoose ee Awdal iyo gobolka Maroodijeex. Labada qaybood ee danbe ayaa hela roobka ugu fiican oo gaadha 500 ilaa 600 mm sannadkii. Gobollada Togdheer, Sool, iyo Sanaag ayaa ku soo xiga oo hela roob u dhixeyya 100 ilaa 400 mm sannadkii. Jiidda xeebeed iyo in yar oo ka mid ah dhulka koonfureed ee gobolka Sool waxa lagu yaqaan roob yar oo xaddigiisu yahay 100 mm sannadkii. Somaliland waxay gashaa afar xilli oo mid kastaa sida caadiga ah saddex bilood yahay. Jiilaalka oo ah xilli qalallan oo bilaha December ilaa badhtanka March ah. Guga oo xilli-roobaadka ugu dheer ahina wuxuu socdaa dhammaadka March ilaa badhtamaha June. Xagaaga oo xilliga saddexaad ah oo soo gala dhammaadka June ilaa badhtanka September. Iyo dayrta oo xilli-roobaad kale ah laakiin guga ka biyo yar meelo badan oo dalka ah, gaar ahaan galbeedka oo halkeedii ay gasho Karantu [Somaliland Country Profile, 2021].



Sawirka I:

Roobka celceliska Somaliland ka da'a.

1.3 Aagagga Cimilo

Kolkii si qoto dheer loo lafaguray xogta cimila-gooreedda Somaliland, waxa soo baxay saddex aag cimilo oo gobolladeeda ku kala filiqsan. Waxayna kala yihiin: (a) aag lamadeegaan ah oo raacsan jiidda xeebeed, (b) aag aad u qalallan oo dhaca badhtamaha iyo galbeedka, iyo (c) aag qallayl-xigeen ah oo dhaca qaybaha hoose ee Awdal iyo Maroodijeex. Saddexda aag hoos baa lagu faahfaahiyay:


- Aag lama deegaan:** Aaggani wuxuu helaa roob ka yar 100 mm, xilli-roobaadkiisuna bil keliya ayuu socdaa. Jiidda xeebeed ee Somaliland iyo qayb yar oo ka mid ah dhanka koonfureed ee gobolka Sool ayaa aaggan cimilo soo hoos gala. Magaalooyinka waaweyn ee aaggan ku gudajira waxa ka mid ah Saylac, Lughaya, Berbera, Laasqoray, iyo Laascaanood. Roobka aaggani ma aha mid la isku halleeyo, halka heerkulka maalinle ahi uu ka sarreeyo 30. Aagga lamadeegaanka ahi ku ma habboona beerashada dalagyada, xooladhaqashada ayaana caan ka ah.
- Aag qalallan:** Aaggani wuxuu helaa roob ka yar 400 mm sannadkii, xilli-roobaadkiisuna wuxuu socdaa ugu badnaan saddex bilood. Roobkiisu inta badan waa dhibco xooggan,



badankiisuna daadka ayuu raacaa oo laga ma faa'idaysto. In kasta oo beerashada dalagyadu suuragal ka tahay, haddana waraabka ayaa taabbagalkeeda muhiim u ah. Heerkul sarreeya ayaa sannadka oo dhan lagu yaqaan. Aaggan waxa hoos yimaadda badhtamaha iyo bariga Somaliland, sida magaalooyinka Ceerigaabo, Ceel-Afweyn, Burco iyo Xuddun.

- **Aagga saxare xigeen ah:** Aaggani wuxuu helaa roob sannadkii dhan 400 ilaa 600 mm, oo muddadiisuna ay saddexda bilood wax yari u dheer yihiin. Beeraha roobka ku tiirsani waa ka suuragal, hasayeeshee waraabka ayaa joogtayn kara oo keeni kara dalag la isku hallayn karo oo hagaagsan. Dalagyo abaarta adkaysi u leh sida garawga iyo masaggada ayaa waraab la'aan maxsuul fiican laga heli karaa, laakiin weli waxa jira khatar ka iman karta roobka oo aan la isku hallayn karin iyo dalagga oo markaa xumaada. Aaggan waxa ka mid ah qaybo ka mid ah gobollada Awdal iyo Maroodijeex ee galbeedka Somaliland oo qayb laxaad ka qaata soosaaridda dalagyada cuntada ah ee ugu badan ee Somaliland guud ahaan.

Sawirka 2: Aagagga cimilo ee Somaliland



Lafagurkan waxa ka cad in Somaliland badankeedu tahay dhul qalallan oo gobolladeeda 75% ka mid ahi ay yihiin lamadeegaan ama qallayl. Qayb yar oo koonfur-galbeed ah ayaa saxare-xigeen ah. Sidaa darteed, Somaliland waxay u nugushahay duruufaha cimila-gooreed ee qallafsan oo caqabab weyn ku noqonaya horumarinta khayraadka dhulka.

1.4 Heerkulka

Heerkulka hawadu inta badan wuu sarreeyaa, wuxuuna u dhixeyaa 25 ilaa 35 marka la eego deegaannada xeebaha ee waqooyi (sida Berbera) halka uu sii qaboobo marka la gaadho deegaannada buuralaydda (sida Sheekh) oo uu u dhixeyyo 15 ilaa 23. Dhulka gudaha ku jira sida dooxada Nugaal (Nugaal Basin), wuxuu heerkulku u dhixeyaa 22 ilaa 33. Heerkulka celceliska ahi wuxuu deegaannada ku fadhiya biyo shubka Gacanka Cadmeed (Gulf of Aden basin areas) ugu sarreeyaa bilaha June ilaa August, halka dhulka gudaha ku jirana uu ugu sareeyo gaadho bilaha May ilaa September.

1.5 Xaddiga Uumibaxa (potential evapotranspiration)

Xaddiga Uumibaxa sannadlaha ahi wuxuu u dhixeyaa 1000 mm 3000 mm.

Taas macnaheedu waxay tahay celceliska ee mandaqadda wuxuu ka badanyahay 2000mm sanadkii halka.

Xaddiga Uumibaxa wuxuu guud ahaan mandaqadda ka badan yahay xaddiga roobka, wuxuuna ugu sarreeyaa xilliyada qalallan oo uu u dhixeyyo 280 mm/bishii oo dhulka gudaha ah iyo 440 mm/bishii oo dhul xeebeedka ah. Dhulka ugu qalallan, sida Berbera, saamiga biya-saarid ee sannadlaha ahi wuxuu ka badan yahay 3000 mm (SWALIM, 2016).

Celceliska sanadlaha ah Umi-baxa Somaliland (PFT) waxay u dhaxeyaan 1000 ilaa 3000 mm/sanadkii halka celceliska sanadlaha ah ee gobolka uu ka badan yahay 2000 mm. Uumi-baxa ayaa ka badan roobabka ka da'a gobolka oo dhan waana kan ugu sarreya xilliyada jiilaal ka iyadoo uu u dhixeyyo 280 mm yo 440 mm dhulka xeebaha. Meelaha ugu qallalan, sida; Berbera, Umi-baxa sannadlaha ahi waxay kor u dhaafeen 3000mm/sanadkii (SWALIM 2016).


1.6 Khayraadka biyaha

Khayraadka biyuhu inta badan way ku yar yihiin Somaliland, mana laha webiyo sannadka intiisa badan qulqula. Biyaha dhulka hoostiisu waa isha ugu weyn ee dadweynaha badankiisu ka daboolo baahiyahooda biyood. Ceelasha, barkadaha iyo durdurrada ayaa ah meelaha ugu muhiimsan ee dadka ugu badan ee dalku ay biyaha ka helaan. Biyaha dhulka hoostiisu waxay dadweynaha miyiga iyo magaaladaba ugu jiraan kaalin ay ku kafeeyaan baahiyahooda biyood ee dad iyo duunyaba, iyo sidoo kale waraabka



beeraha yaryar. Wasaaradda Horumarinta Biyaha ee Somaliland oo kaashanaysa haayado ay ka mid yihiin FAO SWALIN, UNICEF iyo kuwo kale ayaa sannadkii 2019 baadhitaan ku samaysay ilaha biyaha ee Somaliland. Qiimaytaas waxa lagu sugay 914 illood oo biyo laga helo oo ay ka mid yihiin barkadaha, ceelasha gacmaha lagu qoto, biyo xidheennada, ilaha dabiiciga ah iyo kuwo kale, sida khariirraddan hoose ku muujisan.

Ilaha Biyaha ee Somaliland, 2019



1.7 Dhirta

Deegaanka Somaliland badankiisu waa dhul engagan iyo kayn ay u badan yihiin dhirta qodxaha lihi. Dhirta ay ka midka yihiin geed-quwaaxa, dacarta, iyo dhirta bahda ciinka ahi waxay ka baxaan deegaannada saxare-xigeenka ah, waxayna xigaan dhanka dhul-cawseedka lamadeegaan-xigeenka ah iyo dhulka ay ku badan yihiin geed-gaabka caleemaha daadiya ee Itoobbiyada deriska la ah. Wuxuu sidoo kale deegaanka dhalad u ah dhirta bixisa xabkaha iyo faleenka. Dhir xeebeedda takhayga ayaa iyaduna ka baxda qaybta galbeed ee Somaliland sida Saylac ilaa Lawyacaddo, oo ku dhereran xeebta Badda Cas,

yo bariga Berbera. Babbaygu wuxuu ka baxaa togagga. Timir-bacaadda, geed-qoriga, dayibka, tiinka, iyo geedaha ubaxyada bixiya sida geed-quruxeedka, iyaguna waa muhiim waxayna ku baahsan yihiin deegaannada dadku ku badan yahay.

1.8 Xayawaanka

Marka laga yimaaddo xoolaha nool, Somaliland waxay leedahay duurjoogta ugu kala-duwanaanshaha iyo xaddiga badan Afrika. Xayawaannada waxa ka mid ah maroodiga, libaaxa, bisad sabaad, gunburiga, waraabaha, geriga iyo naasley kale, in kasta oo badankoodu ay dabargo' ku dhow yihiin ama ay dabargo'eenba sida maroodiga, dameer-farawga iyo kuwa la midka ah. Shinbiro badan ayaa ku dhaqan deegaannada kala duwan, waxana ka mid ah noocyadaaadka looga helo Deegaanka Soomaalida, sida qoolleyda (*Columba oliviae*), deyn-hilatada (*Turdus ludoviciae*), iyo shinbir Warsangelida (*Carduelis johannis*). Somaliland guud ahaan, waxa laga diiwaangeliyay 171 nooc oo naasley ah, 655 nooc oo shinbiro ah, iyo in ka badan 3 000 oo nooc oo dhir ah.

1.9 Tayabeelka Deegaanka

Nabaad-guurka deegaanku waa geeddi-socod si tartiib-tartiib ah oo taban ay u kordhin karaan ficiilada bani-aadamka sameeyaan.

Dhirta iyo xawaanyaanka Somaliland waxa saamayn ku leh tayabeelka deegaanka ee ay keenaan qodobbo door ahi, sida (i) xaalufinta baadka (ii) dhuxulaysiga sharcidarrada iyo ka ganacsigeeda (iii) kalluumaysiga xad-dhaafka ah iyo kalluumaysiga sharcidarrada ah ee ay shirkadaha shisheeye ka sameeyaan biyaha xeebta; (iv) ugaadhsiga iyo toogashada aan loo aabayeelin ee duurjoogta; (v) daaqidda xad-dhaafka ah ee xoolaha ee aan la xakamayn; (vi) carraguur iyo nabaadguur iyo (vii) Habka Beerashada aan joogtaysnayn, in badan oo ka mida ah tayada deegaanka Somaliland hoos buu u dhacay soddonkii sano ee u danbeeyay.

Sida laga dheehan karo qiimayntii tayabeelka dhulka [2007] ee ay samaysay haayadda FAO SWALIM oo kaashanaysa wasaaradaha ay wadashaqaynta leeyihiin, waxa la caddeeyay in heerka tayabeelka dhulku uu meeldhexaad ilaa darnaan ku yahay Somaliland. Qiyaastii 37% dhulka Somaliland hoos buu u dhacay oo wuu xaalufma, qaababka tayabeelkaas ugu badanina waa carraguurka ay dabaysha iyo biyuhu keenaan, nafaqadii carrada oo ka suusha dhulalka beeraha waxsoosaarka leh (oo u badan qaypta galbeed ee Somaliland), daaqii iyo kayntii dhulka daboolaysay oo meesha ka baxa (oo u badan qaypta bari, in ka mid ah waqooyi-galbeed iyo koonfur-bari), iyo dhir qalaad oo galbeedka Somaliland ku badatay.

Baabbi'inta khayraadka dabiiciga ah maaddaama ay ku soo badanayso, gaar ahaan dhuxulaysigu,



Somaliland waxay u nuglaanaysaa halisaha isbeddelka cimilada; ka-faa'idsiga aan lexjeclada lahayn ee deegaanka iyo khayraadka dabiiiciga ahi waxay khatar gelinayaan dhaqaalaha Somaliland maaddaama ay guud ahaan dadwaynaha Somaliland ku tiirsanyihii xoolaha, beeraha iyo dhul-daaqsimedka oo cimilada u nugul.


1.10 Qaybaha Dhulka (Geomorphology)

Somaliland waxa loo qaybin karaa saddex muuqaal-dhuleed oo waaweyn: (i) dhulka xeebaha (ii) buuralayda iyo dooxooyinka, (iii) bannaannada. Dhulalka sida hirarka isu daba yaalyaal ee Hawd iyo Sool, iyo dooxooyinka Nugaal iyo Darroor. Figta ugu sarraynsa waxay ku taallaa Buuraleyda Golis oo u dhow Gacanka Cadmeed. Jiidda xeebta iyo dhulalku banaan sida hirarka ay isu daba yaal.

1.11 Isticmaalka Dhulka

Isticmaalka ugu badan ee dhulka Somaliland waa dhul-qaaqsimeed, boqolkiiba sadex dhulka waxaa hadda loo isticmaalaa wax soosaarka dalaga beeraha, halka boqolkiiba 7 ay ku haboon tahay wax soosaarka. Qiyaastii 60% dhulka waxaa loo isticmaalaa daaqsinta xoolaha, qiyaastii 40% na waxay ku haboon tahay waxsoosaarka beeraha ku baxa roobka.

Sawirka I: Khariiradda Isticmaalka Dhulka ee Somaliland



1.12 Deegaanka Dhaqan-dhaqaale

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxay dadweynaha Somaliland sannadkii 2021 ku qiyaasay 5 milyan oo ruux (Somaliland in Figures, 2011). Kudhawaad 55% dadkaa ka mid ahi waa reer guuraa xooladhaqato ah, 45% ka mid ahina waxay u dhxeeyaan miyi iyo magaalo. Somaliland guud ahaan waa bulsho xooladhaqato reer guuraaya ah, soojireenkeeduna wuxuu ku suntan yahay in ay xoolaha nool ku tiirsan tahay, kaas oo ay dheef iyo dakhliba ka helaan 70% dadweynuhu oo ku nool miyi iyo magaalaba. Waxsoosaarka beeraha ayaa kaalinta labaad ku jira.

Waxa jira saddex ilood oo dakhli-soosaar oo maanta Somaliland ka jira: xoolaha nool, beeraha, iyo xawaaladaha qurbaha. Xoolaha nooli waa lafdhabarta dhaqaalah Somaliland. Adhiga, geela iyo lo'daba waa laga dhoofiyaa dekadda Berbera waxana loo raraa dalalka Carbeed, gaar ahaan Sucuudiga. Waxa la qiyaasaa in wax ka yar 10% uu dhulku ku habboon yahay beerasho joogtaysan. Waxana uu u badan yahay gobollada galbeed, halkas oo roobka ay helaan badan yahay carraduna ay dihin tahay. Waraabka beeraha ee ku tiirsan gacannada dooxyada laga soo jebiyo ayaa sidoo kale laga adeegsadaa qaybo gobolka Togdheer ka mid ah, sida Xaaxi, Beer, iyo Gatiitaley. Dalagga ugu badanina waa gallayda iyo hadhuudhka.

Waxa sidoo kale dhulka caan ka ah jaridda dhirta dhuxul ahaan. Dhuxulaysiga waxa loo sameeyaa in guryaha lagu isticmaalo iyo in dakhli laga dhaliyo oo suuqyada gudaha lagu iibiyo. In kasta oo dhoofinta dhuxushu ay sharcidarro ka tahay Somaliland, waxa haddana si dhuumaalaysi ah loogu gudbiyaa xuduudda bari ee Puntland iyo tan Jabbuuti.

Kaabayaasha dhaqaale oo liita, gaar ahaan waddooyinka, ayaa caqabad ku ah horumar laga sameeyo dhanka dhaqan-dhaqaale. Heerka dadka reer Somaliland ay adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada helaanna guud ahaan wuu xaddidan yahay. Xukuumadda Somaliland waxa ka go'an xoojinta nidaamka caafimaadka in kasta oo ay wajahayso caqabado badan oo kaga gudban dedaallada ay ugu jirto gaadhsinta, heerka helitaanka, iyo hawl Wadeennada iyo adeeg-bixinta caafimaadka.

Waxbarashaduna way xaddidan tahay. Labadii hablood ee guri joogaba midkood iyo 43% ragga ayaa helay waxbarasho asaasiya ah. Dhanka kale, 30% ka mid ah carruurta dugsiyada hoose aadda ayaa ah da'dii ku habboonayd heerkaa waxbarasho, dugsiyada sarana 11% keli ah ayay ka yihiin inta da'dii saxda ahayd ku gashaa (The Somaliland Health and Demographic Survey, 2020).

Somaliland waxaa badanaya dadka magaaloo yinka degaaya, soo guuristaas oo abuuraya dad kale oo nugul. Waxa ka mid ah dad ka xooluhu ka baxeen, dadka dhaqaale dartii u soo hayaamay. Ganacsiga gaarka loo leeyahayna wuu iska xaddidan yahay, markaa fursadaha shaqo ee uu abuuri karaana way kooban yihiin.



Qiyaastii 70% ka mid ah dadweynaha Somaliland ee shanta milyan ahi waxay wajahayaan shaqa-la'aan, iyadoo shaqa-la'aanta dhallinyaraduna ay gaadhayso 65%. Shaqa-la'aantu inta badan waxay sababtaa falal halis gelinaya qofka sida isticmaalka maandooriyaha iyo tahriibka khatarta ah.

Barakacayaasha gudaha iyo kuwa soo laabtayba wax ay soo Galeen magaaloooyinka waaweyn. Waxa lagu qiyaasaa in ilaa 100,000 oo barakacayaal ahi ay ku dhibaataysan yihiin xeryaha barakacaayasha ee magaaloooyinka waaweyn ee Somaliland oo ay ku haysato biyo wasakhaysan iyo kaabayaashii fayadhawrka oo ka maqan, oo aan helin adeegyada bulsheed ee asaasiga ah, oo ay u bandhigan yihiin cudurrada faafa .

Hasayeeshee waxa socda iskaashi barakacayaasha khuseeya oo u dhexeeya haayadaha QM, ururrada aan dawliga ahayn iyo kuwo maxalliga ah, oo Dawladda Somaliland ka gacan siinaya sidii kaalmo bini'aadannimo lagu gaadhsiin lahaa barakacayaasha, iyo sidoo kale sidii loo hirgelin lahaa qorshaha mustaqbalka fog ee lagu rabo in barakacayaasha dibudejin loogu sameeyo.



**SABABTA, HIGSIGA,
UJEEDDADA, IYO
MABAADI'DA HAGAYSA**

2.1 Sababta ka danbaysa Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada

Qodobka 18aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland iyo xeerarka kale ee barlamaanku ansixiyeen ee la xidhiidhaa waxay hagayaan maaraynta iyo ilaalinta deegaanka. Intaa waxa dheer, si loo xaqijiyo masuuliyadaha dawladda ka saaran horumarinta bulsheed, deegaan iyo dhaqaale, siyaasadaha Higsiga Qaranka ee 2030 iyo Qorshaha Horumarka Qaranku (NDP III 2023-2027) waxay ka mid yihiin siyaasadaha ugu muhiimsan ee laga dheehan karo sida Xukuumadda Somaliland ay uga go'an tahay Ilalinta Deegaanka, Horumarinta Dhaqaalahi iyo Bulshadaba.

Somaliland ka ma tirsana dalalka saxeexay heshiiska UNFCCC ama "Heshiiska Paris," sidaa awgeed ma jiraan waajibaad uu qaran ahaan saarayo heshiiska UNFCCC. Sidaas oo ay tahay, Xukuumadda Somaliland way ka garaabaysaa in raadadka isbeddelka cimiladu ay heer caalami yihiin xajmi aan hore loo aragna ay leeyihiin. Waxay sidoo kale aqoonsan tahay, maaddaama uu dalku aad ugu tiirsan yahay dhaqaalahi ku salaysan khayraadka dabiiciga ah, in waddanku baylah u yahay raadadka isbeddelka cimilada iyo in isbeddellada suuragalqa ahi ay cawaaqib xun ku yeelan karaan heerka sugnaanshaha cuntada ee mustaqbalqa, biyaha iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah, caafimaadka iyo kala-duwanaanshaha noolayaasha iyo khayraadka kale ee muhiimka ah. Intaa waxa dheer, Xukuumadda Somaliland waxay qiraysaa, marka lagu xisaabtamo dhibaatada isbeddelka cimilada ee taagan, in heerkii korriinka dhaqaale ee soo jireenka ahaa aan sidiisii loo sii joogtayn karin, sidaa darteedna waddada inoo furan ee la isku hallayn karaa ay tahay "korriin cagaaran" ama in la raaco jid dhaqaale oo khayraadka dabiiciga ah uga faa'idaysanaya si joogtaysan, oo ay tahay in nidaamkaa lagu daro qorshaha horumarka dhaqaale.

Sidaa awgeed, iyadoo taageeraysa "Heshiiska Rio" oo intii karaankeeda ah wax ku darsanaysa tallaabooyinka ay dalalka kale qaadayaan sida uu dhigayo "Heshiiska Paris," Somaliland markaas uun bay xaqijjin kartaa ka dhabaynta hadafyada ku qeexan Qorshaha Horumarka Qaranka ee Sadexaad (NDP III 2023-2027) iyo Higsiga Qaranka ee 2030, iyo kuwa ku qeexan Yoolalka Horumarka waara, oo gundhiggoodu yahay sidii loo xaqijjin lahaa mustaqbal wanaagsan oo bedqaba oo muwaaddiniintu ku naalooto.

Xukuumadda Somaliland, iyadoo ka duulaysa waayaha kor lagu xusay, xisaabtana ku darsanaysa karaankeeda, waxay hindistay dokumentigan "Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada (SQIC)" si ay miisaan culus u siiso raadadka uu isbeddelka cimiladu deegaannadeeda ku leeyahay.

2.2 Higsiga Siyaasaddan

Higsiga guud ee Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waa xaqijinta in muwaaddiniinta Somaliland ay adkaysi xooggan u yeeshaan isbeddelka cimilada iskana caabbiyaan raadadka isbeddelka cimiladu uu ku leeyahay xaaladdooda bulsheed iyo dhaqaale.

Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimilada waxa looga gol leeyahay in lagu kordhiyo heerka awooda Laqabsiga iyo yaraynta raadadka uu isbeddelka cimiladu sida daran ugu leeyahay deegaannada kala duduwan ee Somaliland. Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waxay xaqijinaysaa in tallaabooyinka wax lagu hagaajinayo iyo mashruucyadaba lagu jiheeyo xaqiqada isbeddelka cimilada.

2.3 Ujeeddada Guud Ee Siyaasaddan

Ujeeddada guud ee Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waa kobcinta heerka u adkaysiga ee dalka guud ahaan iyo kor-u-qaadista awooda Laqabsiga, gaar ahaan qaybaha bulshada ee nugul iyo habdhiska deegaan ee dabiiciga ah ee ay ku tiirsan yihiin, si looga hortago raadadka isbeddelka cimilada, iyadoo isla markaa la raadinayo jid dhaqaale oo khayraadka dabiiciga ah looga faa'idsanayo hab waara.

Ujeedooyinka Gaar ka ah ee Siyaasaddan

Hadafyada ugu muhiimsan ee siyaasaddani waa:

1. In la yareeyo u nuglaanshaha isbeddelka cimilada iyo xoojinta hababka soo-doogista ee qaybaha bulshada ee nugul iyo habdhiska deegaanka dabiiciga ah iyo kor-u-qaadista heerka u diyaargarawga masiiboooyinka iyo maarayntoodaba.
2. In la soo jeediyo "Tallaabooyin Laqabsi" oo macquul ah oo lagula tacaalayo raadadka isbeddelka cimilada, iyadoo kor loo qaadayo heerka u adkaysiga, hoos loo dhigayo nuglaanshaha, Lana xoojinayo kartida ay qaybaha bulsheed, deegaan iyo dhaqaale ee nuguli u leeyihiin in ay degdeg uga soo doogaan.
3. In la kobciyo hawlqabadyada haayadaha dawladeed, Lana mideeyo falceliska isbeddelka cimilada ee ka imanaya dhammaan dhinacyada muhiimka ah ee dhaqaalaha, deegaanka iyo bulshada, si looga tabaabushaysto caqabadaha mustaqbalka iyo halista ku lammaan isbeddelka cimilada.
4. In soo koobid ama hagid loo diyaariyo khayraadka maaliyadeed iyo farsamo ee loogu



baahan yahay xaqijinta hadafyada Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada iyadoo la diyaarinayo hannaan laga wada qaybgelayo oo lagu wajahayo raadadka ugu daran ee isbeddelka cimilada iyo khataraha kale ee cimilada la xidhiidhaa ku leeyihii dalka.

5. In qorshe weyn loo diyaariyo aqoon-kordhinta si loo wajaho baahiyaha, duruufaha iyo kala-mudnaysiinta la xidhiidha falcelisyada laga bixinayo isbeddelka cimilada ee haayadaha heer qaran iyo heer deegaanba (dawlad iyo kuwo aan dawli ahaynba) si loo xoojiyo xirfadaha iyo aqoonta dhinacyada qaypta ka ah, fursad ay waaya'aragnimada ku wadaagaanna loo siiyo dhinacyada qaypta ka ah.
6. In kor loo qaado ka qaybgalka dadweynaha iyo Wacyigelinta ee ku aadan raadadka isbeddelka cimilada oo muwaaddiniinta lagu wargeliyo "tallaabooyinka falcelis" ee suuragalka ah ee lagaga jawaabi karo isbeddelka cimilada ama casharrada laga bartay dedaalladii lagaga hortegay raadadka, iyadoo isla markaa kor loo qaadayo kartida soodoogista ee qaybaha bulshada ee nugul sida dumarka iyo dhallaanka.
7. In la kordhiyo adeegsiga cilmibaadhista, sayiska iyo farsamada casriga ah kolka la dejinayo go'aannada siyaasadaha.

2. 4 Baaxadda Siyaasaddan

Siyaasaddan waxa loogu talagalay in ay hagto siyaasadaha iyo hawlagallada horumarka ee ay samaynayaan cid kasta oo ay khusayso oo Somaliland ah, sida haayadaha dawladeed, iyo ururrada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba, iyadoo ujeedadu tahay in kor loo qaado hababka soo-kabashada iyo soo-doogista ee muwaaddiniinta reer Somaliland ku wajahayaan khataraha isbeddelka cimilada.

2. 5 Qaab-dhismeedka Siyaasaddan

Guud ahaan, siyaasadda isbeddelka cimiladu waa in ay abbaarto labo arrimood oo muhiim ah: (i) yaraynta (mitigation), oo ah dedaallada lagu yarayanayo ama lagaga hortegayo sii-daynta Neefaha guriga cagaaran (green house gas). Nidaamyada yarayntu way qarash badan yihiin waxayna u baahan yihiin in si weyn looga gudbo siyaasadii horumarka dhaqaale ee la yaqaannay, wadamada horumaray ee siidaaya neefaha guriga caraagan ee ugu badan waxay ka caga jiidayaan inay toos wax uga qabtaan yaraynta wasakhowga hawada iyo (ii) Laqabsiga oo taabanaya raadadka isbeddelka cimilada. Laqabsiku

ka ma dhigna in uu meesha ka wada saarayo raadadka xunxun ee isbeddelka cimilada, laakiin wuxuu xaddidayaa ama yaraynayaan dhibaatooyinka ka dhalan kara.

Duruufaha Saamaynta isbeddelka cimilada waa xidhiidh la leh guquraafiga Deegaan walba, mana jiro xal guud oo dal walba si isku mid ah wax lagaga qaban karo. Sidaa awgeed, siyaasadaha isbeddelka cimilada waxa lagu dejiyaa milicsiga iyo ka fekerka duruufaha qarameed, hadafyada horumarineed, iyo sifooyinka qayb kasta iyo falgalka qaybaha ka dhex dhacaaba leeyihiiin.

Somaliland waxay ka mid tahay dalalka horumarkoodu gaabiska yahay, ee heerka wasakhaynta hawadu uu yar yahay, dhaqaalahooda khayraadka dabiiciga ah uu yahay mid u nugul saamaynta Isbeddelka cimilada.

Sidaa darteed, Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimilada waxa lagu saleeyay feker iyo faaqidaad ka dhashay waxyaalaha kor lagu xusay, iyadoo mabaadi'da hagaysaa tahay masuuliyado Guud laakiin la kala Leeyahay iyo cid walba Karaankeed. Sidaa awgeedna waxay raacaysaa nidaamyada iyo tallaabooyinka dhib-yarayneed ee xammilka ku salaysan oo ah mooqifka siyaasaddan, ee ku ma dhisna hannaanka latacaalid keliya.

2.6 Mabaadi'iда Hagaysa

Siyaasadaha iyo shuruucda maxalliga ah iyo kuwa caalami ahba ee taabanaya arrimaha la xidhiidha Isbeddelka cimilada ee hoos ku qoran ayaa taageeraya siyaasaddan:

- 1) Dastuurka Somaliland: Qodobka 12 iyo Qodobka 18 ee Dastuurka Somaliland ayaa qeexaya in dawladdu masuul buuxa ka tahay ilaalinta khayraadka dabiiciga ah ee dalka iyo uga faa'idaynta muwaaddiniinta.
- 2) Shuruucda qaranka ee la xidhiidha maaraynta iyo ilaalinta khayraadka dabiiciga ah iyo noolayaasha kala duduwan.
- 3) Higsiga Qaranka ee 2030. Siyaasaddani waxay ku salaysan tahay hiigsi ku taamaya in muwaaddiniinta Somaliland ku noolaadaan dal xasilloon, dimuqraaddi ah oo ladan, kuna naaloodaan nolol tayo leh oo saboolnimada la dhimay.
- 4) Qorshaha Horumarka Qaranka [NDP III 2023 - 2027]. Qorshaha Horumarka Qaranku wuxuu qirayaa in arrimaha deegaanku yihii hanti qaran, wuxuuna tilmaamayaa:
 - A. "Somaliland waa in ay yeelato deegaan bedqaba oo si habboon u maaraysan oo waxsoosaar leh joogto ah,"



- B. "Xammilka dalka iyo dadkuba ay ku wajahaan raadadka isbeddelka cimilada waa in la xoojiyo iyadoo loo marayo maaraynta deegaanka, maaraynta istaraatajiyadeed ee biyaha, sugnaanshiyaha cuntada, iyo in qaybaha dhaqaalaha la furfuro."
- 5) "Masuuliyado Guud laakiin la kala leeyahay iyo Cid Walba Karaankeed" ayaa ah mabda'a Heshiiska UNFCCC ee garwaaqsan sida awooda dalalku u kala duwan yahay sidoo kalana masuuliyadda mid kasta ka saaran yaraynta dhibta isbeddelka cimilada.
- 6) Xaqa loo leeyahay Horumar waara. Bayaanka Rio iyo Mabaadi'idiisuba waxay ka garaabaan in bini'aadanku uu xuddun u yahay muhiimadda horumarka waara, sidaa darteed muwaaddiniinta Somaliland waxay xaq u leeyihii nolol bedqabta oo midhadhal ah oo la jaanqaadsan dabeecadda si loo xaqiijiyo horumar waara, ilaalinta deegaanka ee ah xuquuqda bini'aadankana waxa la dhex gelinaya geeddisocodka horumarka.
- 7) Iskaashiga iyo la shaqaynta daneeyayaasha haayadaha dawladeed iyo kuwa aan dawliga ahayn, bulshada rayidka ah iyo shirkadaha ganacsiga, iyo sidoo kale qaybaha bulshada ee nugul sida dumarka iyo da'yarta, waxay muhiimad asaasi ah u leeyihii kolka la rabo in si wax-ku-ool ah loo dhaqangeliyo siyaasaddan.

2.7 Adeegsiga

Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waxay agab muhiim ah u noqonaysaa dokumentiyada qaybta deegaanka ee heer qaran. Waxay hagitaan u tahay haayadaha dawladeed, kuwo aan dawliga ahayn, shirkadaha ganacsiga, sharci dejinta, bulshada rayidka ah, iyo haayadaha caalamiga ah ee qaybta ka ah ama danaynaya in ay berri-ka-maalin qayb ka noqdaan, la-tacaalidda arrimaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee raadadka, kuwo togan iyo kuwo tabanba, ku leh xaaladda dhaqan-dhaqaale, cimilo iyo deegaan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

2.8 Arrimaha ay Awooda saarayso Siyaasadda Isbeddelka Cimiladu

Somaliland doorka wasakhaynta ay ku leedahay sababaha keena isbeddelka cimiladu aad bay u yartahay, haddana aad bay ugu nugushahay raadadka ka dhasha isbeddelka cimilada ee heer caalami. Sidaa awgeed, xilligan Somaliland arrinta ay diiradda saarayso si ay cimilada uga falcelisaa waa in ay yeelato awood dhaqaale iyo farsamo oo muddada fog ku habboon si wax looga qabto raadadka

isbeddelka cimilada. Dhanka latacaalid, Somaliland waxay si laxaad leh diiradda u saaraysaa yaraynta xaddiga kaarboonka iyo adeegsiga ilo tamareed oo joogta ah maaddaama uu iska yar tahay xaddiga neefaha guriga cagaaran ee ay Somaliland ku sii dayso gibilka.

Somaliland waa in ay sahamiso sidii ay u heli lahayd ugana faa'idsan lahayd farsamooyinka latacaalid ee caalamka ka jira si loogu daneeyo macaashka dhaqaale ee dalka sida macaashka wax-ku-oolnimada tamarta iyadoo la adeegsanayo Hababka Horumarka Nadiifta ah ee ku jira Heshiiska UNFCCC. Waxa habkan lagu gaadhi karaa iyadoo la isticmaalo farsamooyin casri ah oo tamareed oo aad u nadiif ah, iyo in lala qabsado farsamooyinka tamarta la cusboonaysiin karo ee hadda jira oo dhaqaale ahaan la awoodo.

Sidaa awgeed, Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada ee Somaliland waxay si gaar ah diiradda u saaraysaa halbeegyada Laqabsiga Isbeddelka Cimilada iyadoo muhiimad la siinayo hannaanka latacaalid.

Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada waxay jihayn istaraatajiyadeed iyo hagitaan u tahay arrimaha muhiimka ah ee taabanaya isbeddelka cimilada ee Somaliland. Waxay xoogga saaraysaa labo arrimood:

1. Laqabsiga (Adaptation)
2. Latacaalid (Mitigation)

2.9 Laqabsiga

Laqabsiga isbeddelka cimiladu waa u muhiim bulshaweynta Somaliland si loo yareeyo u nuglaanshaha raadadka isbeddelka cimilada.

Siyaasaddani waxay qeexaysaa baahiyaha ugu waaweyn ee loo qabo Laqabsiga, waxayna sugaysaa muhiimada hawlqabadyada Laqabsiga ee ka horjeeda nuglaanshaha waax kastaa leedahay.

Waaxkasta oo siyaasada la xidhiidha waxa loo sameeyey qodobo la qabsi oo muhiim ah.

Qaybaha soo socda ayaa loo aqoonsaday in la xuso:

- 1) Beeraha
- 2) Xoolaha
- 3) Biyaha
- 4) Kalluumaysiga
- 5) Habdhiska deegaanka dabiiiciga ah (dhir iyo xawayaanba)
- 6) Gaadiidka iyo waddooyinka



- 7) Tamarta iyo Macdanta
- 8) Isgaadhsiinta
- 9) Magaalooyinka
- 10) Waxbarashada
- 11) Caafimaadka
- 12) Taabbagelinta arrimaha Lamaanaha iyo Dhallinyarada

2.10 Latacaalid

- Siyaasaddani waxay Somaliland gacan siinaysaa in ay ka fekerto abuuridda horumar dhaqaale ee tamarta nadiif ah, heerka wasakhawgu ku yar yahay, xaddiga kaarboonka ee ku jiraana uu yar yahay.
- Somaliland waa in ay si togan uga falceliso waajibaadka shuruucda caalamiga ah ee ku aaddan tallaabooyinka Latacaalida, sida yaratnta heerka kaarboonka. Somaliland waxay higsanaysaa in ay noqoto dal aan cimilada wasakhayn oo heerka korriinkiisa dhaqaale ee kaarboonka ku tiirsani uu yar yahay, iyadoo adeegsanaysa farsamada casriga ah ee cagaaran.
- Somaliland waxay culayska saaraysaa laqabsiga isbeddelka cimilada. Hasayeeshee, arrintaasi ka ma dhigna in tallaabooyinka latacaalida meesha laga saarayo. Kolka la isku daro heerka ay Somaliland ku darsadaan siidaynta neefaha guriga cagaaran way kooban tahay marka loo eego heerka caalami ahaan uu marayo, wax-ka-sooqaad ma leh, wuxuuna sannadkii 2015 wadarta caalamiga ah ka ahaa wax ka yar 0.12 boqolkiiba, halka tamartu ay 3 boqolkiiba ka ahayd wasakhaduna ay 1 boqolkiiba (1%) ka ahayd, halka heerka ka dhasha adeegsiga wershadaha iyo soosaarkoodana aanu wax-ka-sooqaad lahayn (INC, 2018).



**MACNAHA GUUD EE
ISBEDDELKA CIMILADA**

3.1 Sharraxaad

Sida uu dhigayo habraaca IPCC, isbeddelka cimiladu waa "kalatagsanaan weyn oo dhanka tirakoobka ah oo ku timaadda xaaladdii caadiga ahayd ee cimilada ama gedgeddoonkeedii, oo muddo dheer oo tobaneeyo sannadood ama ka badanba socotay, oo uu sababay gedgeddoon dabiici ah ama dad-samee ah (IPCC, 2014)." Sidoo kale, heshiiska UNFCCC wuxuu isbeddelka cimilada ku qeexayaa "doorsoon ku yimaadda cimilada oo si toos ah ama dadban loogu aanayn karo ficiillada dadka ee wax ka beddela sidii uu ahaa gibilka caalamku oo kolka lagu daro gedgeddoonkii dabiiciga ahaa ee cimilada qaata waqtii badan (UNFCCC, 1992)." Sidaa darteed, "isbeddel cimilo" waxa loo tixgelinayaa natijjo ka dhalatay ficiillada dadka ee wax ka beddela samayskii gibilka ee neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasess sida, Carbon Dioxide, Methane, Nitrous Oxide and Chlorofluorocarbons) iyo isticmaalka dhulka, halka "gedgeddoonka cimilada" lala xidhiidhinayo sababaha dabiiciga ah.

3.2 Sansaanka cimilo ee Caalamka

Tan iyo kacaankii wershadaha, xoogganaanta neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasess) ee gibilku si weyn bay u korodhay. Sidaa awgeed, heerkulka celceliska ah ee adduunku iminka wuxuu heerkii wershadaha ka horreeyay ka sarreeyaa 1°C (Lockwood, 2009) (Fiiri sawirka 1), marka la eego heerkii sii-daynta neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasess) ee hadda socda iyo sida ay gibilka ugu xooggan yihiinna, saynisyahannadu waxay saadaalinayaan in dhammaadka qarnigan uu heerkulka celceliska ah ee caalamku kii sannadkii 1900 ka badan doono 1.5°C (IPCC, 2018) (Fiiri sawirka 2).

Korodhkan ku yimi heerkulkii celceliska ahaa ee adduunku wuxuu keenayaa dhibaatooyin isdaba socda, sida masiiboooyin cimilada la xidhiidha (hoorrimalad xad-ka-bax ah, cimilo qalallan oo dabadheeraata, dab kaymaha ka kaca, danabka, guulaamo isa soo xidha, duufaanno toornaado ah, mawjado biyo ah oo sida mijaroorka circa isku dhereriya, iyo gufaaco), iyo isbeddel ku dhaca xilliyadii roobka, baaxada roobka iyo inta jeer uu di'i jirayba, iyo qdobbo kale oo caalamka oo dhan raad ku yeesha. Isbeddelladaas oo dhami waa xoogag wax burburinaya oo si weyn u wiqa nidaamkii deegaanka dabiiciga ahi isugu dheellitirnaa, si weynna u khalkhaliya helitaankii cuntada, tayadii cuntada, yareeya waxsoosaarka beeraha, oo xaddida isla markaana yareeya helitaankii biyaha, iyo raadad kale oo ba'anna leh. Si loo fahmo, cimilada sii kululaanaysa, intii u dhexaysay sannadiihii 1981 ilaa 2002, dalagyadii muhiimka ahaa sida gallayda iyo qammadiga waxa ku yimi hoos-u-dhac gaadhsiisan 40 megaton sannadkii marka heer caalami la eego (IPCC, 2014).




Figure I.

Global average land-sea temperature anomaly relative to the 1961-1990 average temperature in degrees Celsius (°C).

Isha Xogta: <https://www.climate.gov/news-features/understanding-climate/climate-change-global-sea-level>


Dhanka kale, heerkulka caalamka ee kordhayaa wuxuu sababayaa in barafku dhalaalo taas oo iyaduna kor u qaadaya heerkii badda ee caalamka. Sida uu tilmaamayo IPCC (2013), celcelis ahaan, heerka badda ee caalamku wuxuu kor u kacayay 1.7 milimitir sannadkiiba intii u dhexaysay 1901 ilaa 2010 [fiiri sawirka 2]. Deraasadaha xilliganina waxay tilmaamayaan in 2018 oo keli ah la diiwaangeliy korukac ku yimi heerkii badda caalamka oo 3.2 inch (81 mm) in ka badan intii uu celcelis ahaan ahaa sannadkii 1993 – kaas oo ah korukicii ugu badnaa celcelis ahaan caalamka ee abid la diiwaangeliyo (Lindsey, 2019). Xogtii u danbaysay waxay tilmaamaysaa in dhammaadka qarnigan la saadaalinayo in heerka baddu uu gaadho inta u dhexaysa 0.95 fuudh (0.29 m) ilaa 3.61 fuudh (1.1 m) (H. Porrntern, et al, 2019).

Deegaannada magaaloooyinka ah ee dadku ku badan yahay ee teedsan gobollada xeebaha ee dunida, badaha heerkoodu kacayaa wuxuu halis ku yahay deegaannadii dabiiiga ahaa wuxuuna burbur laxaad leh ku sababi doonaa kaabayaashii dhaqaalaha sida jidadkii, biriishyadii, jidadka dhulka hoostiisa mara, dhuumihiibiyaha, kaabayaashii isgaadhsiinta, kaabayaashii saliidda iyo gaasta, wershadihiilaydhka, wershadihiisancada, iyo kuwo kale –raedadkaas oo aan soo afgo'i doonin–taas oo dhabbaha u sii xaadhi doonta khalkhal aan hore loo arag oo ku habsada deegaanka, dhaqaalaha iyo bulshada, waxaa




dhacaya barakac ballaadhan oo suuragal ah ama in malaayiin nafood lagu waayo meelo badan oo dunida ah.

Sawirka 3: Tirasinka heerkulka heerka badda ee caalamiga ah kolka la barbardhigo celceliskii 1900-1905. Tixraac: IPPC




Sidoo kale, isbeddelka cimilada waxa la saadaalinayaa in uu uga sii daro oo sii xoojiyo rakaadkoodana kordhiyo arrimaha cimila-gooreedda qallafsan lagu yaqaan sida roobab aan la saadaalin karin (sawirka 3), dabaylo, duufaanno baraf iyo dhagaxyo wata, danab, duufaannada toornaadada, dabaylo siigo wata iyo cimilo qalallan oo dabadheeraata, dab kaymaha ka kaca – oo ah masiibooyin iminkaba tobanaankii sannadood ee u danbeeyay caalamka meelo badan oo ka mid ah si joogta ah looga arkayay (**IFRC, 2016**).

Kolka lagu xisaabtamo sida uu caalamka u sii kululaanayo wixii kacaankii wershadaha ka danbeeyay, raadadka isbeddelka cimiladu uu ku leeyahay deegaanka dabiiciga ah iyo nidaamka dadkaba, ha noqdaan aafiooyin qunyarqunyar u socda (sida dikhawga, nabaadguurka, abaarahaa ama carraguurka xeebaha) ama masiibooyin keddiska ah (sida duufaannada kulaalayaasha, fatahaadaha iyo daadadka, iyo abaarahaa soo noqnoqda) waxa la saadaalinayaa in ay muddo dheer jiitamaan oo qarniyo dhan sii socdaan xataa haddii la dhimo wasakhowga hawada lagu sii daynayo ee caalamka sii kululaynaysa ama



3.3 Sansaanka cimilo Ee Gobolka

Guddiga IPCC wuxuu qirsan yahay in dalalka Afrika ee Sakaaraha ka hooseeyaa oo aan wasakhow badan hawada ku siidayn hadana uu si wayn u saameeyo dikhawga sababaya caalamka sii kululaanaya. Saadaasha laga bixinayo heerka Bariga Afrikana waxay tibaaxaysaa in qaabka kulaylku sii socon doono, marka sannadka 2080 la gaadhana heerkulka Bariga Afrika waxa la saadaalinayaa in uu kordho 5.4 ilaa 7.2 oo heerka Fahrenheit ah - korodhkaas oo 1.5 jeer ka badan heerka caalamka oo dhan loo saadaalinayo (NASA, 2018).



Sawirka 4: Isbeddelladii ku dhacayay heerka Hoorrimaadka ee Caalamiga ah (1979 – 2013)

Isha Xogta: NASA, GISS MAPS

In kasta oo raadadka isbeddelka cimiladu ku keeno Bariga Afrika ay badan yihii, haddana imika waxaa jira Bariga Afrika xilligii roobka oo isbed-bedela taas oo keenta meerto abaaro ah oo soo noqnoqata iyo aakkirka dhulka oo engega, nabaadguur, biyaha oo yaraada, iyo tacabka beeraha oo hoos u dhaca. Sida Qarammada Midooabay qabtana, nidaamyada beeraha roobka ku tiirsan iyo xoolaha nool ee nolosha badi dadyawga Bariga Afriki ku tiirsan tahay waxay si gaar ah ugu nugul yihii isbeddelka cimilada, abaarihi u danbeeyayna qiyaastii 13 malyuun oo qof oo mandiqadda deggan ayay cunta-yaraani la soo gudboonaatay. Habnololeedka beerashada iyo xooladhaqashada cadaadis baa soo foodsaari doona, dadka magaalooyinka u hayaamayaana way badan doonaan, taas oo dhaqaale ahaan, deegaan ahaan iyo bulsho ahaanba sii carqaladayn doonta heerka magaala-galka mandiqadda ee awelba sarreeyay (Heidelberg, 2016).



Sidoo kale, rubuc qarnigii u danbeeyay deegaannada xeebaha Afrikada waqooyi-bari waxa heerka baddoodu kor u kacay ilaa 12 cm, saadaashuna waxay sheegaysaa in dhammaadka qarnigan uu heerka badda ee deegaankaasi kor u kici doono ilaa hal mitir (Brown, 2018). Iyadoo korodhka heerka badda ee xajmigan le'egi uu dal kasta oo Afrikaan ah oo xeeb leh saamayn doono, misana deegaannada xeebaha ee jooggoodu hooseeyo ayaa khasaaraha u badan wajahi doona. Khubaradu waxay saadaalinaysaa in marka 2030 la gaadho, inta u dhexaysa 109 ilaa 118 malyuun oo qof oo ku nool gobollada xeebaha ee Afrika ay baylah u noqon karaan korukaca heerka badda (Brown, 2018). Tani waxay khatar weyn ku tahay tirada dadka ee kordhaysa ee dhulalka xeebaha, oo ay ka mid yihiiin xadi badan oo bulshooyinka saboolka ee u nugul raadadka isbeddelka cimilada oo heerkooda Laqabsiga iyo soo kabashadoodu ay hooseeyaan. Raadadka macquulka ah ee isbeddelka cimiladu ku yeelan karo deegaannadan waxa ka mid ah in uu burburiyo kaabayaasha dhaqaalaha iyo dhismayaasha hantida ah, carraguur, biyaha dhulka hoostiisa oo milixooba, dhaqdhqaqaqii dhaqaalaha oo istaaga, dad ku dhintaan, iyo raadad kale oo la saadaalinayo in ay ka sii darnaadaan marka la barbardhigo haddii aanu isbeddel cimilo jireen (S Brown, 2011).

Raadka isbeddelka cimilada ee Bariga Afrika waxa uga sii daraya horumarka dhaqaale oo hooseeya, kaas oo dabar ku noqonaya awoodda qaybaha bulshada ee nuguli u leeyihii in ay laqsadaan raadadka isbeddelka cimilada ama ay ka soo doogaan khasaarihiisa xooggan - xaaladdahaas oo wiiqaya horumarkii guyashii u danbeeyay laga sameeyay ilaalinta deegaanka, amniga iyo xasilloonida iyo bedqabka dhaqandhaqaale ee dadyawga Bariga Afrika (Pasquini, 2019).

3.4 Sansaanka Cimilo ee Dalka

Aqlabiyyadda dadweynaha Somaliland waxay si weyn ugu tiirsan yihii habnololeed uu khayraadka dabiiciga ahi lafdhabar u yahay - khayraadkaas oo aad ugu nugul saamaynta isbeddelka cimilada. Tayabeelka khayraadkii dabiiciga ahaa ee dalka ee ka dhashay tobaneeyo sannadood oo si aan lexajeclo lahayn oo joogto ah looga faa'idaysanayay, sida dhuxulaysiga iyo daajinta xad-ka-baxa ah, ayaa cirka ku sii shareeray heerkii ay dadweynaha Somaliland u nuglaayeen saamaynta isbeddelka cimilada (UNDP, 2018).

Nuglaanshanan waxa sii labalaabaya abaaraha soo noqnoqda, sida tii dhawayd ee saddex sannadood oo isku xigxigay dalka haysatay [2015 to 2017]. Roob-la'aan ayaa sababay hoos u dhac weyn oo ku yimi biyihii beeraha iyo xoolahaba lagu waraabin lahaa, kudhawaad 70% xoolihiina way le'deen, taas oo horseedday sugnaansha-la'aan cunto iyo gaajo iyo nafaqadarro baahsan, oo ku laxaadsaday waayihii

nololeed ee bulsho markeedii horaba ahayd xooladhaqato nugul, iyo sidoo kale beeraleyda quudkooda la soo bixi jirtay ee aan lahayn xammilkii ay ku qabatimi lahaayeen ama kaga soo doogi lahaayeen burburka lamafilaanka ah ee habnololeedka ku habsaday ee sida laxaadka weyn. Dabadeed, qiyaastii 6.5 malyuu oo qof oo dhulka Soomaalida ee ballaadhan ku baahsan ayaa soo istaagay xaalad ay u baahan yihiin gurmad bini'aadannimo, tobanaan kun oo qoys ayaana ku qasbanaaday in ay magaalooyinka u hayaamaan, magaalooyinkaas oo adeegyadii bulsheed ee asaasiga ahaa ay marka horaba iska kooban yihiin ama ay yaryihiin (Wilson, 2018).





**LAFAGURKA XAALADEED
EE ISBEDDELKA CIMILADA
SOMALILAND**

4.1 Caddaymaha Isbedelka Cimilada ee Somaliland

4.1.1 Heerkulka

Waxa la wada garawsan yahay in raadadka isbeddelka cimiladu ay aad u weynaan doonaan oo dalalka dunida ugu saboolsan laga dareemi doono, meesha ay taasi sida ugu cad uga muuqataana waa Somaliland. Tobaneeyadii sannadood ee u danbeeyay, mandiqadda Geeska Afrika ee Weyn, ee Somaliland ka mid tahay, waxa lagu suntay korukac dhanka heerkulka ah iyo tirada xilliyada qalallan, iyo roobabka oo aan ku filnayn labaatankii sannadood ee u danbeeyay [Goldsmith, 2019]. Iyagoo arrintaa u marag furaya ayuu Guddiga IPCC qiimaytiisii afraad (IPCC, 2007) ka soo saaray warbixin tilmaamaysa in heerarka heerkulka ee mandiqadda Geeska Afriki kordhay, iyadoo ay ugu wacan tahay raadka uu ka tegay isbeddelka cimiladu, ay si laxaad leh u kordhayeen kontankii sannadood ee u danbeeyay (IPCC, 2007). Deraasad dhawaan ay Xarunta Santa Barbara ee Khataraaha Cimilada ee Jaamacadda California u samaysay Sanduuqa Thomson Reuters Foundation, waxa lagu ogaaday in celcelis ahaan soddonkii sannadood ee u danbeeyay uu heerka heerkulka ee ugu sarreeya ee Geeska Afrika uu kor uga soo kacay 33 oo uu gaadhay 34 (Chen, 2017) (fiiri shaxda 1).

Jaantusyada hoose waxay soo koobayaan heerkulka Somaliland

Sawirka 6: Lafagurka Heerkulka Somaliland



4.1.2 Hoormaadka/Da'aa (precipitation)

Cimilada Somaliland waa mid qalalan ama saxare-xigeen ah oo labo xilli oo engagan wadata (xagaa iyo jiilaal) oo aad u kulkulul, iyo labo xilli oo roobban (gu' iyo dayr) oo heerkulkoodu




dhexdhexaad yahay. Marka lagu xisaabtamo gedgeddoonka cimilo ee deegaannada qalallan iyo kuwa saxare-xigeenka ah, hoormaadku deegaannada wuu ku kala duwan yahay, sannadahana wuu ku kala duwan yahay, kolkuu u hooseeyo waa dhanka xeebaha oo waa 50 mm (dhul qalallan), dhulka fidsan ayaa ku soo xiga oo 600 mm ah, buuraleydana wuxuu gaadhaa ilaa 900 mm (qallayl-xigeen). Qiyaastii 50-60% roobka sannadkii wuxuu da'aa guga, halka dayrtu ay roobka sannadkii ka tahay 20-30% (Abdulkadir, 2017). Meertada roobka ee Somaliland waxa saameeya ama keena dhaqdhaqaqa waqooyi iyo koonfur ee Aagga Isku-ururka Dhulbadhaha (Inter-Tropical Convergence Zone (ITCZ)), hasayeeshee nidaamyada cimilo-gooreed ee kale ee ay ka mid yihii Gedgeddoonka Dabaylaho Dhulbadhaha ka Kaca (Quasibiennial Oscillation (QBO)), Gedgeddoonka Dabayleed ee El-Niño/Jihada Koonfureed (El-Nino/Southern Oscillation (ENSO)), Gedgeddoonka Laba-cidhiflaha ah ee Badweynta Hindiya (Indian Ocean Dipole (IOD)), iyo hirarka dabaylaho maansuunka ee xillii laha ah iyo maayadaha badweynta, dabaylaho galbeed, hirarka bariyeed, iyo gufaacooyinka kulaalayaashuba way saameeyaan heerka hoormaadka ee Somaliland (UNDP, 2013).

Sidaa awgeed, maaddaama isbeddelka cimiladu uu raadadkaas ku leeyahay nidaamyada cimila-gooreed ee kor ku xusan, waxa si weyn la isugu waafaqsanyahay in xaddiga hoormaadka ee Geeska Afrikada Weyn iyo heerka ay saadaashiis ku rumoobaysaaba ay hoos u dhici doonaan muddooyinka durugsan.

Tusaale ahaan, sannadkii 2017 roobkii gugu wuu habsaamay heerkiiisi celceliska ahaana wuxuu ka hooseeyay 20-30%. Hoosudhaca heerka hoormaadka waxa la saadaalinaya in uu sii badin doono oo xoojin doono abaaraha. Sidoo kale, iyadoo ay ugu wacan tahay isbeddelka ku yimi nidaamyadaa cimila-gooreed ee loo aanayn karo isbeddelka cimilada, aafooyinka cimila-gooreedda la xidhiidha sida daadadka iyo gufaacooyinka ayaa la filayaa in ay kordhaan (UNDP, 2013).

Laga soo xigtay DINA, 2018.

Sawirka 7: Isbeddelka Tobaneeyada Sano ee ku dhacay roobka mandiqadda Geeska Afrika ee Weyni ay hesho



Sawirka 8: Lafagurka Roobka Somaliland: Sawirka hoose wuxuu soo koobayaa lafagurka roobka ay Somaliland hesho:




Figure 3.3-1 Rainfall anomaly in March to June (1981–2010), Somaliland




Figure 3.3-2 Rainfall anomaly in Sept to Dec (1981–2010), Somaliland

4.1.3 Abaaraha

Taariikh ahaan, Geeska Afrika waxa ku habsaday abaar kala daran. Hasayeeshee inta jeer ee ay soo noqnoqanayaan iyo xoogganaantooda ayaa kordhay tobaneeyadii sannadood ee u danbeeyay, iyadoo meertadii kasta ee abaar ahiba ay dhawr sannadood jiitamayso. Tusaale ahaan, iyadoo loo aanaynayo isbeddelka cimilo ee nidaamka cimila-gooreed ee El Niño (in dhulalkii qallalnaa sii qalallayaan, kuwii qoyanaana sii qoyayaan), intii u dhexaysay 2015 ilaa 2017, Somaliland iyo guud ahaan mandiqadda Geeska Afrika (Greater Horn of Africa) waxa ku dhufatay abaar saamayn laxaad leh ku yeelatay helitaankii biyaha iyo baadka, oo laysay kudhawaad 70% xoolihii noolaa. Xooladhaqatadii iyo dadyawgii beeraha roobka ku tiirsan manaafacaadsan jiray ayay si gaar ah u saamaysay, oo tobannaan kun oo qoys baa biya-yaraan iyo cunta-yaraan baahsanii soo foodsaartay. Warbixinuhu waxay sheegayaan in inta u dhexaysa 4.3 ilaa 6.7 malyuun oo qof oo Geeska Afrika (Greater Horn of Africa) ku dhaqani ay xilliga abarta u baahdeen gargaar cunto. (Wilson, T, 2018).

Warbixintii u danbaysay ee ku saabsanayd raadka abarta iyo qiimaynta baahida ee Somaliland (2018) waxay tibaaxaysaa in khasaaraha ay abarta u geysatay Somaliland ay ka badan tahay \$874 milyan. Qaybta waxsoosaarka, xoolaha nool, beeraha roobka ku tiirsan iyo kalluumaysiga ayaa sida ugu daran u waxyeelloobay, halka qaybaha biyaha iyo fayadhawrka, deegaanka iyo gaadiidka; arrimaha bulshada, sida caafimaadka nafaqada iyo waxbarashada; iyo qaybihii dhextaalka ahay sidoo kale si xun u saamaysay (UNDP, 2018).



4.1.4 Daadadka iyo Carraguurka


Nidaamyada cimilada cabbiraa waxay muujinayaan in xoogganaanta ay neefaha guriga cagaarani (greenhouse gasess) ku xooggan yihiin gibilku ay hoormaadka u weeciyaa labo hab. In ay heerka hoormaadka ee waqtii xadirka ka dhigaan mid ka xooggan sidii caadiga ahayd dabadeed ay taasi deegaannada qoyan ku sii kordhiso qoyanaanta, iyo in ay jihada dabaylahaa beddelaan oo ka fogeyaan dhulbadhaha una jiheeyaan cidhifyada taas oo deegaannadii qallalnaa ku sii haysa qallaylkii. Sannadihii u danbeeyay, labada arrinba way ku dhaceen Somaliland, waxayna sababeen aafiooyin lid isku ah oo cimilada la xidhiidha oo heerkooda darnaantu kala duwan yahay laakiin cidhib-xumadoodu ba'an tahay.

Kolka laga yimaaddo abaaraha soo noqnoqda, sannadkii 2018, duufaankii kulaalaha (ee Sagar) oo loo aaneeyay isbeddelka cimilada raadadkiisa ayaa arlada ku fatihisay roobkii sannadka dhan di'i lahaa, taas oo sababtay daadad baahsan iyo dhimashada dad ka badan konton qof, baabbi'isayna kumannaan neef iyo hanti badan oo aagagga xeebaha ee dalka ah (Wilson, 2018). Derasaaduhu waxay sheegayaan in, kolka lagu xisaabtamo xaaladdan caalamka oo dhan lagu arki karo ee ah roobabka xoogaysanaya, ee isbeddelka cimiladu uu keenay, heerka soo noqnoqashada iyo darnaanta ee daadadka iyo masiibooyinka kale ee cimilada la xidhiidhaa ay mustaqbalka ku kordhi doonaan guud ahaan mandiqadda Geeska Afrika iyadoo kala derajo ah dhanka ba'naanta (Oxfam, 2017).

4.1.5 Korodhka Heerka Badda – Heerkulka Oogada Badda

Ayaandarro, la ma hayo ama way iska kooban yihiin xogta ku saabsan inta uu heerka badda ee Geeska Afrika kordhay si loogu xaqijiyo xaddiga korodhka heerka badda. Hasayeeshee kayd 15 sannadood ah (1995-2010) oo ka dhashay indha'indhayn si bille ah loogu wadey deegaannada xeebaha ee Kiiniya ee u dhow xeebta Geeska Afrika, oo qayb ka ahayd Nidaamka Indha'indhaynta Heerka Badda ee Caalamka, ayaa tibaaxaya korodh qiyaastii ah 1.3 mm sannadkii, oo ay is tegayaan heerka caalamka. Guddiga IPCC wuxuu tilmaamayaa in dhammaadka qarnigan la saadaalinayo korodh celcelis ahaan ah 50 cm oo ku yimaadda Xeebaha Badweynta Hindiya (IPCC, 2007).

Sawirka 9: Heerkulka Oogada Badda ee Geeska Afrikada Weyn



4. 1. 6 Lumitaanka Noolaha Kala Duwan iyo Burburka Deegaanka

Somaliland waxa ay leedahay noocyo kala duwan oo dhir iyo xayawaan ah iyo hab-nololeedka deegaanka, sidaa awgeed waxa ay ka mid tahay dalalka (Somaliland) ee Afrika laga helo Nuucyada dhirta iyo xayawaanka ugu badan.

Noocyadan waxay inta badan la xiriiraan indo-Mediterranean, Asian iyo Flora iyo Xayawaanka Afrika waxayna ku yimaadeen in ka badan boqol kun oo sano siyaabo kala duwan oo loo kala firdhis. Marka la eego deegaanka badda, laga soo bilaabo xadka Jabuuti ilaa Raasurad waa goobaha kala duwanaanshaha noolahu ugu badan yihii maadaama ay jiraan nuucyo ka mid ah dhirta iyo xayawaanka kala duwan sida noocyada kala duwan ee kalluunka ee Gacanka Cadmeed iyo Badda Cas. Dhanka kale dhowr jasiiradood ayaa ku yaal aaggaas (Saed Din, Maydh iyo Khorshora) oo aad muhiim ugu ah buul-badeedka shimbiraha badda (sida buruta rabshayga). Dhanka kale, Kaymaha jiqda ah waa goobo muhiim ah u ah duwanaanshaha noolaha ee deegaanka dhulka.

Raadadka loo aaneeyo isbeddelka cimilada, sida xilliyada qalallan ee dabadheeraada, carraguurka iyo daadadka, oo lagu daray sida bilaa lexejeclada ah ee loo isticmaalo khayraadka dabiiciga ah ee dalka sida daajinta xad-ka-baxa ah, ugaadhsiga sharcidarrada ah, iyo dhuxulaysiga sababaya nabaadguurka, waxay khatar gelinayaan noolayaashii kala duwanaa (dhir iyo xayawaanba) iyo sabooiyinkoodiiba oo uu ku socdo cadaadis daran oo hoos u ridaya tiradoodii iyo tayadoodii ku baahsanayd jasiirad-u-yaasha Soomaalida. Kala-duwanaanshaha noolayaashu wuxuu kordhiyaa maxsuulka deegaanka dabiiciga ah, nooc kasta oo noole ahina, jimidhkiisa iyo tiradiisuba intay doonaan ha le'ekaadeen e, kaalin laxaad leh ayuu ka ciyaarayaa hawlqabadka deegaanka dabiiciga ah. Hallawga kala-duwanaanshaha noolayaasha waxa tusaalaheeda lagu arki karaa tayabeelka dalagyadii kala duwanaa, hoosudhicidda tirada cawsaskii iyo dhirtii dhuldaaqsimedka, ama duurjoogti beri beryaha ka mid ah bannaanada tubnaan jirtay iyadoo aad u tiro badan, ama noolayaashii badda ku noolaa.

4. 2 Raadadka Isbeddelka Cimiladu ku leeyihiin Qaybah kala duwan ee Somaliland

Isbeddellada cimiladu waxay raadad muuqda ku leeyihiin Somaliland oo labaatankii sannadood ee u danbeeyay ay abaro is xigxigaa ka jireen kuwaas oo tan iyo 2015 sii xoogaysanayay markii sannado is xigxiga la waayay roobabkii. Raadka isbeddelka cimiladu wuxuu isaga gudbaa dhinacyo badan oo dhan bulsheed, dhaqaale, iyo mid deegaanba leh. Raadadka ba'an ee isbeddelka cimiladuna waxay saameeyaan qaybah soo socda:



Shaxda 1: Raadadka Isbeddelka Cimilada ee Somaliland

Qaybta	Raadadka
Sugnaanshaha Cuntada iyo Nafaqada	<ul style="list-style-type: none"> Abaaraha soo noqnoqdaa waxay sababeen in la waayo biyihii lagu waraabin lahaa beeraha iyo xoolahaba, sidaa awgeedna waxa meesha ka baxay tacabsoosaarkii dalagga Heerkulka kor u kacayay wuxuu waxyeelay dalagyadii Heerka badda ee Badda Cas ee kor u kacayna wuxuu raadayn xun ku yeelan karaa kalluumaysiga Korukaca heerkulku wuxuu raadayn doonaa tayada iyo tirada maxsuulka dalagyada Isbeddelka cimiladu wuxuu horseeday korukac ku yimi sicirkii dalagyada muhiimka ah iyo cuntooyinkii asaasiga ahaa Heerka CO₂ ee kor u kacayna wuxuu yarayn karaa qiiimihii nafaqo ee dalagyada
Xoolaha, Kalluumaysiga, iyo Beeraha	<ul style="list-style-type: none"> Raadadkan waxa ka mid ah daaqii iyo dheeftii xoolaha lagu qabey oo hoos u dhacay, shaqadii taranka oo waxyeellawday, iyo kala-duwanaanshihi noolayaasha oo meesha ka baxay Abaaraha soo noqnoqdaa waxay si daran u saameeyaan waxsoosaarka xoolaha ee Somaliland Heerka asiidha ee badweynta iyo heerkulka oo kor u kacaana waxay doorinayaan deegaannadii dabiiiciga ahaa ee biyaha ka dhex jiray Heerkulka kor u kacayaa wuxuu raadaynaya silsiladdii isusocodka tacabka kallunka, taas oo hoos u dhigaysa dhaqankii kalluumaysiga Kallunku ka ma samatabaxayo abaarta maaddaama uu waayayo biyihii nadiifta ahaa Roob-la'aantuna waa caqabad muuqata oo haysata beerashada
Deegaanka, Biyaha, iyo Kaymaha	<ul style="list-style-type: none"> Isbeddelka cimiladu wuxuu raad muuqda oo daran ku yeeshay deegaanka dabiiiciga ah ee Somaliland Tayadii nolosha ee ku tiirsanayd deegaanka dabiiiciga ahina way wiqantay Yaraanshaha ku yimi biyuhu wuxuu si xun u saamaynaya jiritaanka dhirta iyo guud ahaan kala-duwanaanshaha noolayaasha Biyasidaayaashii lakabeed ee hayay biyaha dhulka hoostiisa ku jiray ayaa waxyeelloobay, taas oo yaraynaysa fursaddii lagu heli lahaa biyo dhulka hoostiisa ku jira

Tayabeelka Dhulka iyo Nabaadguurka	<ul style="list-style-type: none"> Deegaanka Somaliland waxa meesha ka saaraya isbeddelka cimilada iyo heerkulka kor u socda Raadka daran ee isbeddelka cimiladu wuxuu xawli ku dhaqaajiyay heerkii tayabeelka dhulka Dhirta u dhimanaysa hoorrimaad la'aanta iyo heerkulka kor u socda ayaa wax ku darsanaya in neefaha guriga cagaarani (greenhouse gasess) ay gibilka ku bataan. Daadadka iyo dabaylaha badani waxay sababayaan carraguur, daad rogmada, iyo dhulgo', kuwaas oo habnololeedka kharribaya Maaddaama hawlo badan oo dhaqan-dhaqaale oo Somaliland ahi ay ku tiirsan yihiin helitaanka biyaha roobka, waddanku wuxuu si joogto ah halis ugu jira qallafsanaanta cimilada haddii aan la abuurin nidaamyo Laqabsi oo meelmar ah
Caafimaadka	<ul style="list-style-type: none"> Raadadkan waxa ka mid ah soo-ifbaxa cudurrada cimilada ku xidhan sida kuwa cuntada ku gudba, kuwa biyaha ku gudba, iyo kuwa qaniinyada ku gudba. Cudurrada qaniinyada ku gudba waxa ka mid ah qandhada RVF iyo qandhada dengue. Korodhka heerka dhimashada ee dadka iyo duunyadaba, iyo yaraanta cuntada oo horseedda nafaqadarro gaar ahaan ku dhacda hooyooyinka, dhallaanka iyo da'yarta. Korodhka khalkhallada dhimireed/nafsadeed oo diiqaddu ugu wacan tahay Waxa badan xaaladaha xiiqda, oofta iyo xanuunnada kale ee neefsiga. Waxa sidoo kale la diiwaangeliyay xaalado ay ka mid yihiin hafeefasho, fuuqbax, wadna-xanuun guud iyo wadna-xanuun ay tumaatida qorraxdu keento, iyo kulaylka dartii oo la daalo. Abaaraha iyo gufaacooyinku waxay horseedi karaan burburka xarumaha caafimaadka, faafidda cudurrada, iyo in culays weyni sii fuulo xarumaha caafimaadka ee jira



Dhul Xeebeedka	<ul style="list-style-type: none"> • Korodhka neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasess) iyo isbeddelka cimilo ee ku xidhani waxay raadaynayaan habdhiskii kiimikaad iyo duleed ee biyaha xeebaha Somaliland, waayo waxa is beddelaya heerkii milixda, heerkulkii badweynata, maayadda, falgalka kiimikaad, iyo meertada guud ee hawooyinka kala gedged-disan • Korukaca heerkulka iyo heerkka badda, asiidhoobidda badweynata, iyo hoormimaadka oo jedwalkiisu khalkhalaa waxay halis muuqata ku yihiin qaabdhisimeedka, bedqabka iyo hawlqabadka deegaannada dabiiciga ah ee badda iyo biyaha badweynata, sida aagagga geed-xeebeedka takhayga (mangroves), dhulka biyafadhiisinka ah (wetlands), shacaabiga taxan (coral reefs), iyo afaafyada togagga (estuaries), oo si weyn ugu nugul isbeddelka cimilada. • Tayabeelka dhulka ee deegaanka xeebtu wuxuu horseedayaa hoo-sudhac ku yimaadda deegaantii, duurjoogtii oo le'eta, iyo dihnaantii carrada oo hoos u dhacda • Dalabaadka is hirdiyaya ee khayraadka xeebta ku aaddan ayaa horseeday in deegaankii baaba'o, takhaygiina waxyeelloobo
Horumarka Dhaqaale	<ul style="list-style-type: none"> • Badi dadka reer Somaliland waxay ku tiirsan yihiin xooladhaqashada iyo beerashada si ay noloshooda u maareeyaan. Laakiin tacabsoosaarkii beeraha waxa si weyn u saameeyay qallafsanaanta cimilada sida abaaraha, daadadka, iyo macaluusha • Xoolaha badani waxay culays weyn saaraan dhul-daaqsimeedka, waxayna keenaan in dhulka aad loo daaqla iyo beelaha oo isku qabsada lahaanshaha dhulka. • Cudurrada ku dhaca xooluhu kolka ay dillaacaan waxay Somaliland saaraan culays dhaqaale oo weyn maaddaama dhoofintooda la xayiro.



**SHURUUCDA IYO XEERARKA
HEER QARAN IYO KUWA
CAALAMIGA AH EE HORE U
JIRAY**

5.1 Shuruucda Heer Qaran iyo Siyaasadaha Guud ee Somaliland ee Arintan La Xidhiidha

5.1.1 Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Dastuurka Somaliland wuxuu leeyahay qodobbo ilaalinaya khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka. Waxa ka mid ah:

- Qdobka 12 wuxuu tilmaamayaa in dawladda dhexe masuul ka tahay khayraadka dabiiciga ah ee dalka, oo ay qaadi karto tallaabo kasta oo suuragal ah si loo baadho, loogana faa'idaysto khayraadka ku jira berriga iyo badda dalka. Ilaalinta khayraadkaas dabiiciga ah iyo sida ugu habboon ee looga faa'idsan karo xeer ayaa qeexaya.
- Qdobka 18 wuxuu tilmaamayaa in dawladdu mudnaan gaar ah siinayso ilaalinta iyo faya-qabka deegaanka oo asaas u ah caafimaadka bulshada, iyo dhawrista khayraadka dabiiciga ah. Sidaa darteed, habdhaqanka iyo waxyeellada loo geysto deegaanka xeer ayaa qeexaya. Dawladdu sidoo kale waxay qorshe ka yeelanaysaa aafooyinka dhaca sida abaaraha, duufaannada, cudurrada faafa, dhulgariirka iyo dagaallada.

5.1.2 Higsiga Somaliland ee 2030

Hiigsiga Somaliland ee 2030 wuxuu uu si toosa u qeexayaa in ilaalinta deegaanku ka mid tahay tiirkarka ugu muhiimsan. Waa qorshaha muddada fog ee horumarka ee Dawladda Somaliland leedahay oo ay bilawday 2011. Higsiga 2030 wuxuu qeexayaa khayraadka dabiiciga ah ee ugu mudan dalka, caqabadaha taagan iyo tallaabootinka la qaadayo.

Higsiga Somaliland ee 2030 wuxuu ku qotomaa tiirkarkan shanta ah:

- 1- Horumarka dhaqaale
- 2- Horumarka kaabayaasha
- 3- Maamul-wanaaggaa
- 4- Horumarka bulsheed
- 5- Ilaalinta deegaanka

Dawladda Somaliland waxay ilaalinta deegaanka u aqoonsan tahay mid ka mid ah ajandayaasha ugu mudan horumarka dalka. Waxay tani tilmaan wanaagsan ka bixinaysaa sida Somaliland uga go'an tahay xaqijinta in muwaaddiniinteedu ku noolaadaan xaalad caafimaadqab ah, kuna noolaadaan deegaan nadiif ah oo ilaashan.

Ilaalinta deegaanka waxa laga leeyahay higsi qaran oo tilmaansanaya deegaan caafimaad qaba oo si wanaagsan u maaraysan oo joogtaysan waxsoosaarna leh. Hantida ugu muhiimsan ee waddan kastaa, marka dadkiisa laga yimaaddo, waa habdhiska deegaankiisa dabiiciga ah. Deegaanka Somaliland iminka dhibaatooyin kala heerar ah baa ku dhaca oo ku xidhan hadba goobta, heerka iyo nooca ka-faa'idsiga. Qodobbada ugu mudan ee saameeya deegaanka dalka iyo khayraadkiisa dabiiciga ahi waa:

- Carraguurka
- Jaridda Dhirta
- Abaaraha soo noqnoqda iyo isbeddelka cimilada
- Daajinta xad-Dhaafka ah
- Kalluumaysiga xad-Dhaafka ah
- Magaalawga
- Korodhka tirada dadweynaha
- Dikhawga
- Beerashada dhulka aan carrasanka ahayn
- Dhir qalaad

Qodobbadani waxay deegaanka ka hor-istaagayaan in laga helo adeegyadii iyo alaabti daruuriga u ahaa dadweynaha sii kordhaya ee waddanka. Khayraadka dabiiciga ah ee ugu muhiimsan Somaliland waa:

- Biyaha
- Khayraadka dhulka iyo macdanta
- Khayraadka xeebaha iyo badda
- Kaymaha iyo ayda
- Duurjoogta iyo noolayaasha kala duwan

5.1.3 Xeerka Maaratma Deegaanka (X.L. 79/2018)

Xeerka Maaratma Deegaanka Somaliland (X.L. 79/2018) waa dokumentiga ugu muhiimsan ee xakameeya maaratma qaybta deegaanka. Dhammaan arrimaha deegaanka la xidhiidha ayuu xeerkani maareeyaa, waxaanu u dejiyey mabaadi'dan guud ee soo socda:



Mabaadi'da Guud ee Maaraynta Deegaanka:

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado deegaan nadiif ah oo caafimaadka u wanaagsan.
2. Maaraynta khayraadka dabiiciga ah iyadoo la qaadayo tallaabooyin lagaga hortagayo nabaadguurka, deegaanka burburayna dib loo soo celinayo.
3. Waa in laga hortagaa in ay iska horyimaaddaan awooddaha wasaaradaha maamula khayraadka dabiiciga ah.
4. Waa in la joogteeyaa wacyigelinta bulshada ee arrimaha deegaanka.
5. Waa in khayraadka la cusboonaysiin karo loo isticmaalo si joogtaysan si wax looga qabto dhibaatooyinka la xidhiidha tamarta ugana faa'idaystaan jiiilka hadda iyo kuwa mustaqbalkaba.
6. Waa in la dhiirrigeliyaa ka qaybgalka bulshada ee arrimaha la xidhiidha maaraynta khayraadka dabiiciga ah iyo ka faa'idsigisa.
7. Waa in la yareeyo iska hor imaadka ku salaysan deegaanka, lana hagaajiyo xallinta khilaafaadka iyo maaraynta khayraadka dabiiciga ah iyadoo wax laga qabanayo arrimaha siyaasadeed ama dhaqaale ee saameeyaa isticmaalka deegaanka kuwas oo uu ka mid yahay musuqmaasuqu.
8. Waa in kor loo qaado ka qaybgelinta qaybaha bulshada ee ay khusayso ama ay waxyeello ka soo gaadhay si xun u adeegsiga deegaanku.
9. Waa in si siman looga faa'idaysto khayraadka deegaanka iyadoo la tixgelinayo qaabka uu u shaqeeyo deegaanku si uu u waaro oo aanay dhibaato u soo gaadhin.
10. Waa in qiimayn lagu sameeyaa si loo hubiyo waxyelloyinka deegaanka soo gaadhi kara ama isticmaalka khayraadka dabiiciga ah.
11. Waa in la xoojiyo Horumarka Joogtaysan dhinac kasta oo ku saabsan deegaanka.
12. Waa in la dhawro dhaxalka dhaqan iyo dabiici ee Somaliland si ay uga faa'idaystaan jiiilka maanta iyo kuwa mustaqbalka.
13. Iyadoo la eegayo wakhtiga dhaw iyo wakhtiga fog, waa in la isticmaalo qaabka faa'iidada badan u leh bulshada ama waxyeellada ugu yar soo gaadhsiinaya deegaanka guud ahaan, si loo yareeyo qashinka iyo walxaha wasakheeya deegaanka.

14. Waa in manhajka waxbarashada ee heer kasta lagu daraa wacyigelinta deegaanka.
15. Waa in kor loo qaado sidii loo yarayn lahaa qashinka, dib u isticmaalka iyo dib u warshaydaynta qashinka.
16. Isbedelka cimiladu waxa uu saamayn karaa xeerarka Deegaanka, xeerarkas oo noqon kara qaar aan shaqaynayn ama la jaan qaadayn isbeddellada dhacay.
17. Qof kasta oo waxyeello soo gaadhsiiya deegaanka waxaa waajib ku ah in uu hagaajiyo (bixiyo) dhibaatada uu u gaystay deegaanka iyo caafimaad-darrada ka dhalatay wasakhaynta.
18. Meesha ay jiraan caddaymo ku filan in haliso darani ama aan dib loo sixi karini ku soo beegan yihiin deegaanka, la'aanta la la' yahay caddaymo cilmiyeed (saynis) uma noqon karaan cudurdaar in dib loo dhigo wax-ka-qabasho wax ku ool ah oo lagaga hor tegayo taya-dhaca deegaan.
19. Waa in laga hortago waxyeellaynta Deegaanka, lana yareeyo ama la xakameeyo ficiillada waxyeellada u geysta deegaanka.
20. Waa in la sameeyo heerarka ilaalinta deegaanka si loola socdo isbeddelka ku yimaadda tayada deegaanka.
21. Waa in ay Somaliland iskaashi la samaysaa dawladaha kale si loo horumariyo deegaankeena.
22. Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimiladu waxay fulinaysaa mabaadi'da kor ku taxan.

5.1.4 Shuruucda Kale ee Qaranka ee Siyaasaddan la Xidhiidha

1. Siyaasadda Qaran ee Deegaanka Somaliland 2015
2. Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duurjoogta Somaliland 2015
3. Siyaasadda Tamarta Somaliland 2010
4. Siyaasadda Shidaalka Qaranka Somaliland 2013
5. Xeerka Sahaminta iyo Soosaarista Shidaalka, Lr. 95/2021
6. Xeerka Tamarta Korantada Somaliland, Lr. 81/2018



7. Siyaasadda Gaadiidka Dawladda 2018
8. Xeerka Taraafikada 56/2013
9. Xeerka Caafimaadka Xoolaha Qaranka 2004
10. Xeerka Kalluumaysiga Qaranka Somaliland 2018
11. Siyaasadda Kalluumaysiga Qaranka 2020
12. Siyaasadda Biyaha Qaranka Somaliland 2004
13. Istaraatajiyadda Biyaha Qaranka Somaliland 2004
14. Xeerka Biyaha Qaranka Somaliland 49/2011
15. Siyaasadda Caafimaadka Qaranka Somaliland 2012
16. Siyaasadda Nadaafadda Qaranka Somaliland 2011
17. Istaraatajiyadda Cuntada iyo Biyaha Somaliland 2014
18. Xeerka Maaraynta Dhulka Magaalooyinka 2008
19. Xeerka Lahaanshaha Dhul-beereedka 1999
20. Siyaasadda Lamaanaha ee Qaranka Somaliland 2019

5.2 Shuruucda iyo Siyaasadaha Caalamiga ah iyo kuwa Gobolka

5.2.1 Seddexdii Heshiis ee Rio (The Three Rio Conventions):

Inta ugu badan dadka reer Somaliland, gaar ahaan reer miyiga, waxay noloshoodu si toos ah ugu tiirsan tahay, oo ay dakhligooda ka helaan, khayraadka dabiiciga ah. Hasayeeshee dhibaatooyinka deegaanka ee caalamiga ah ayaa wiiqaya ilaha wax soo saarka khayraadka. Lumitaanka kala-duwanaanshaha noolayaasha oo xawli ah ayaa Somaliland ka socda, kaas oo ay sabab u yihii sabaxumaanta, duurjoogta sida sharcidarrada ah looga ganacsado, iyo xaalufinta dhirta sida dhuxulaysiga iyo goynta xad dhaafka ah ee dhirta qoyan. Nabaadguurka iyo abaarahaa soo noqnoqdaana waa dhibaatooyin saamaynaya dhammaan gobollada dalka.

Siyaasaddan Isbeddelka Cimilada waxa loogu talagalay inay fuliso dhammaan waajibaadyadii ku jirey saddexdii heshiis ee QM ee lagu guddoonsaday magaalada Rio ee ku saabsanaa

Isbeddelka Cimilada, Kala-duwanaanshaha Noolayaasha, iyo Nabaadguurka deegaanka, kuwaas oo ujeeddadoo du ahayd in wax laga qabto waxyeellooyinka deegaanka ee caalamiga ah ee wiiji kara dedaallada wadareed ee lagu cidhibtirayo faqriga, korna loogu qaadayo horumarka joogtaysan ee guud ahaan dunida. Sidaas awgeed, Siyaasaddani waxay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ku waajibinaysaa inay fuliso seddexdan heshiis ee hoos ku xusan ee ay Qarammada Midoobay ku ansixiyeen magaalada Rio:

5.2.1.1 Heshiiska QM ee Isbeddelka Cimilada (the United Nations Framework Convention on Climate Change (UNFCCC)

Heshiiska QM ee Isbeddelka Cimilada, oo ay 197 xubnood saxeexeen, wuxuu u taagan yahay hadafka ah "In xaddigga neefaha guriga cagaaran(greenhouse gasess) ee kusii kordhaya gibilka hawada inagu gedaaman lagu ilaaliyo halka uu taagan yahay lana xadeeyo faragelinta bini'aadanka ee khatarta ku ah koradhka heer kulka cimilada. Heerkan waa in lagu gaadho wakhti cayiman oo ku habboon in habdhisyada deegaannadu ay si dabiici ah u qabatimaan Isbeddelka Cimilada, si loo xaqiijyo in waxsoosaarka cuntada aan halis la gelin, isla markaana uu horumarka dhaqaale awood ugu yeesho inuu u sii socdo si joogtaysan."

5.2.1.2 Heshiiska Kala-duwanaashaha Noolayaasha (the Convention on Biological Diversity (CBD)

Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaasha, oo 196 xubnood ay saxeexeen, ujeeddadiisu waa in la daryeelo, lana ilaaliyo kala-duwanaashaha nolosha noolayaasha, ilaalinta khayraadka noolayaasha iyo daryeelka dhulka, maaddaama ay qayb muhiim ah ka yihiin horumarka dhaqaale iyo bulsheed. Isagoo kala-duwanaashaha noolayaasha u arka hanti caalami ah, oo dan u ah jilka hadda, ka mustaqbalka, iyo dhammaan dadweynaha adduunkaba, ayaa uu Heshiiskani ku dedaalayaa in laga hortago dabargo'a noolayaasha, iyo in la joogteeyo ilaalinta deegaanka. Sidoo kale, Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaashu waxa uu dardargelinaya in si tudhaale leh looga faa'ideysto qaybaha kala-duwanaanshaha noolayaasha, waxaan ku dedaalayaa in la joogteeyo hababka deegaanka iyo kuwa joogtaysan ee ku aaddan helidda iyo wadaagista faa'idooyinka ka dhasha isticmaalka khayraadka dabiiciga ah.

Sidaas awgeed, Dowladda Somaliland waxay aqoonsan tahay seddexdan ujeeddo ee ka midka ah Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaasha:

1. Daryeelka kala-duwanaanshaha noolayaasha



2. In si habboon looga faa'ideysto qaybaha kala-duwanaashaha noolayaasha
3. In si siman, oo caddaalad ku salaysan, loo wadaago faa'idooyinka ka dhasha adeegsiga khayraadka dabiiiciga ah.

5.2.1.3 Heshiiska QM ee La-dagaallanka Nabaadguurka (the United Nations Convention to Combat Desertification (UNCCD))

Heshiiska QM ee La-dagaallanka Nabaadguurku waxa uu u shaqeeyaa sidii heshiis caalami ah oo isku xidhaya joogtaynta, maaraynta deegaanka iyo arrimaha deegaanka ee la xidhiidha nabaad guurka dhulka. Arrimaha tixgelinta mudan ee Heshiisku uu diiradda saarayo waxa ka mid ah soo celinta habdhisyada deegaannada dabiiiciga ah ee nabaadguuray ee ku yaalla dhulka qallalan. Sidaas darteed, Dawladda Somaliland waxay garawsan tahay ujeeddooyinka Heshiiska QM ee La-dagaallanka Nabaadguurka ee ku waajahan abuurista:

1. In mustaqbalka laga fogaado nabaad guur ku yimaada dhulka lana tacaala saamaynta abaarta heerarkeeda kala duwan.

Shaxda hoose waxa ay muujinaysaa gebagebada guud ee Saddexda Heshiis ee Rio:

Shaxda 3aad: Ujeeddooyinka Heshiisyadii Rio

Heshiiska	Ujeeddooyinka
Heshiiska QM ee Isbeddelka Cimilada	(...) sidii loo gaadhi lahaa, iyada oo la raacayo qodobba-da khuseeya ee Heshiiska, in xaddigga neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasses) ee gibilka ku jira lagu ilaaliyo heer ka hortegi kara faragelinta bini'aadanka ee khatarta ku ah nidaamka cimilada. Heerkan waa in lagu gaadho wakhti cayiman oo ku habboon in habdhisyada deegaannadu ay si dabiiici ah u qabatimaan Isbeddelka Cimilada, si loo xaqiijiyo in wax-soosaarka cuntada aan halis la gelin, isla markaana uu horumarka dhaqaale awood ugu yeesho inuu u sii socdo si joogtaysan

Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaasha (Biodiversity Convention)	[...] in lala dagaallamo nabaadguurka, waxna laga qabto saamaynta abaarta ee deegaannada ay abaaraha iyo nabaadguurka ba'ani ka jiraan, gaar ahaan Afrika, iyada oo loo marayo waxqabadyo waxtar leh oo heerar kala duwan leh, iyada oo ay taageerayaan abaabullada iskaashiyada iyo saaxiibbada caalamiga ah, oo qayb ka ah hannaan isku dhafan oo waafaqsan Ajandaha 21aad, oo looga dan leeyahay ka qaybqaadashada sidi waddamadan dhibaatooyinku ka jiraan ay u gaadhi la-haayeen horumar joogtaysan.
Heshiiska La-dagaallanka Nabaadguurka	[...] daryeelka kala-duwanaanshaha noolayaasha, adeegsiga tudhaalaha leh ee qaybihiisa kala duwan, iyo wadaagista caddaaladda ku dhisan ee isticmaalka khayraadka dabiiciga, oo ay ku jiraan in awood siman loo helo khayraadka dabiiciga ah iyo in si habboon loo adeegsado tignoolajiyadda la xidhiidha, iyada oo xisaabta lagu darsanayo dhammaan xuquuqaha ku saabsan khayraadkan iyo tignoolajiyaddan, iyo in si habboon loo maalgeliyo.

5. 2. 2 Heshiiska Baariis (Paris Agreement)

Heshiiska Baariis(paris) waxa uu qaboomay 2015, waxaana ansixiyey waddamo badan oo suurageliyey inuu muddo hal sano ka yar ku dhaqangalo–taas oo noqotay arrin ku cusub sharciga caalamiga ah. Heshiiskan taariikhiga ahi wuxuu dejiyey shuruuc xooggan oo aan duugoobayn, oo dhammaan Xubnaha ku waajibinaysa inay cimilada go'aan ka yeeshaan.

Sida uu Heshiiska Baariis(paris) dhigayo, waddamadu waxay isku raaceen:

- Yool caalami ah oo celceliska korodhka heerkulka lagu xakamaynayo heer 2°C ka hooseeya heerarkii wershadaha ka hor, laguna dedaalo in kululaanta lagu ilaaliyo heer ka hooseeya 1.5° C.
- In ay waddamada oo dhami sameeyaan ka qaybqaadasho aran oo qiiqa(carbon emmisions) lagula tacaalayo, sidoo kalana ay shantii sannadoodba mar dedaalladooda dib u eegaan, si ay muddadiiba yool u samaystaan.
- Xeerar ku salaysan daahfurnaan iyo isla-xisaabtan, kuwaas oo dhiirrigelin doona waxqabadyada dalalka, lana socon doona horumarkooda ku waajahan bartilmaameedka



- Muhiimadda Laqabsiga iyo u adkaysiga saamaynta isbedelka cimilada.
- In dalalka soo korayaay ay helaan taageero dhaqaale, mid tignoolajiyadeed iyo mid awood-kobcineed.

Iyada oo Dastuurka Qaranka ka duuleysa, ayay Dawladda Somaliland (DSL) aqoonsatay Heshiiska Baariis(paris). Sida uu Heshiiska Baariis dhigayo, DSL waxa ka go'an inay yarayso qiiqa hawada. Siyaasaddan Isbeddelka Cimiladu waxay beegsanaysaa sidii qiiqa loo yarayn lahaa, waxaanay fursado iyo hagitaan siinayaa dhammaan qaybaha waaweyn ee dhaqaalaha. Siyaasaddani waxay u hoggaansan tahay shuruucda faahfaasan ee lagu fulinayo Heshiiskii Baariis ee lagu ansixiyey Shirkii Cimilada ee QM ee sannadkii 2018 ka dhacay magaalada Katowice ee dalka Poland. Shuruucda waxa qayb ka ah sharci daahfuran oo u oggolaan doona dhammaan Xubnuhu inay sida ugu sarraysa uga warbixiyaan, taas oo keeni doonta is-aamminaad iyo kalsooni waxqabad wadareed lagu sameeyo. Shuruucda ku saabsan suuqyada caalamiga ah ee kaarboonka ayaa lagu daray Shirka Cimilada QM ee 26aad, oo sannadka 2021 ka dhacay dalka Ingiriiska.

5. 2. 3 Habmaamuuska Kyoto (The Kyoto Protocol)

Iyada oo Dastuurka Qaranka ka duuleysa, ayay Dawladda Somaliland aqoonsatay Habmaamuuska Kyoto ee Heshiiska QM ee Isbeddelka Cimilada, ee sannadkii 2007 la ansixiyey. Borotakoolka Kyoto waxa uu xubnaha dalalka horumaray ku qasbayaa bartirmaameedyo, si loo xakameeyo, loona dhimo qiiqa neefaha guriga cagaaran(green house gasess). Siyaasaddan Isbeddelka Cimiladu waxay u hoggaansan tahay Wax-ka-beddelkii Dooxa(Doha amendment), oo sheegaya 'muddada labaad ee xilgudashada' Habmaamuuska Kyoto, oo aanay weli dalal ku filani ansixinin si uu u dhaqangalo.

Sida uu Habmaamuuska Kyoto dhigayo, waddamada soo koraya, oo ay Somaliland ku jirto, waxa ku waajib ah arrimahan soo socda:

- Inay sameeyaan, hirgeliyaan, oo ay ka warbixiyaan, si joogto ahna u cusboonaysiyyaan qorshayaal heer qaran ah-meelaha ay suuragal tahayna heer gobol ah-oo ay ku jiraan tallaabooyinka lagula tacaalayo Isbeddelka Cimilada, iyada oo wax laga qabanayo qiiqa uu bini'aadanku sababo ee dhammaan neefaha guriga cagaaran ee hawada gelaya iyo qiiqa hawada ka baxaya ee aanu xakamaynin Habmaamuuskii Montreal, sidoo kalana qaadaya tallaabooyin fududaynaya in si munaasib ah loola qabsado Isbeddelka Cimilada.

5. 2. 4 Guddiga Dawladdaha ka Dhexeeya ee Isbeddelka Cimilada (Intergovernmental Panel on Climate Change)

Dawladda Somaliland waxay ixtiraamaysaa tixraacyada iyo warbixinaha uu soo saaro Guddiga dawladaha ka Dhexeeya ee Isbeddelka Cimiladu ee aan ka hor imanay jiritaanka qaranimada Somaliland. Dokumentiyada Guddiga IPCC waxay xog muhiim ah ku biirin doonaan Saamiqaybsiga Caalamiga ah ee Heshiiska Baariis (paris) oo marka ugu horreeya dhici doona 2023.

5. 2. 5 Xarunta Caalamiga ah ee Deegaanka (Global Environment Facility [GEF])

Dawladda Somaliland waxa ka go'an inay iskaashi xooggan la samayso Xarunta Caalamiga ah ee Deegaanka, isla markaasna ay fuliso dhammaan waajibaadkeeda ku aaddan in waddamada soo korayaay ay wax ka qabtaan arrimaha ay ka mid yihii isbeddelka cimilada, kala-duwanaashaha noolayaasha, xaalufka, wasakheeyayaasha dabiiciga ee hawada, iyo meerkuriga. Dawladda Somaliland waxay u baahan tahay in Xarunta Caalamiga ah ee Deegaanku ay ka taageerto fulinta heshiisyadan soo socda ee deegaanka ku saabsan:

- Heshiiska Kala-duwanaanshaha Noolayaasha
- Heshiiska Stockholm ee Dikhawga Dabiiciga ee Joogtada ah
- Heshiiska QM ee la Dagaallanka Nabaadguurka
- Heshiiska Minimata ee Meerkuriga
- Hab-maammuuska Montreal ee Walxaha Khatarta ku ah Gobilka

5. 2. 6 Istaraatijiyadda IGAD ee Isbeddelka Cimilada Gobolka (IGAD Regional Climate Change Strategy)

Geeska Afrika waxa lagu tilmaamay inuu yahay mid ka mid ah gobollada ugu nugul isbeddelka cimilada, gaar ahaan dhaqaalihiisa aadka ugu tiirsan khayraadka dabiiciga ah, waxaanu wajahayaa biya-yaraan daran, cunta-yaraan, khataro soo kordhaya oo hababka nolosha khuseeya, iyo u nuglaan ku aaddan aafwooyin iyo xanuunno badan oo uu isbeddelka cimiladu keeno.

Waxa xusid mudan in urur goboleedka IGAD uu sameeyay siyaasad iyo istaraatajiyad khusaysa



isbeddelka cimilada oo dardargelinaysa kaarboonka hooseeya, iyo horumar isbeddelka cimilada u adkaysta oo ka hirgala Geeska Afrika oo dhan, kaas oo noqon doona mabda'a haga IGAD ee hawlaho isbeddelka cimilada ee lagu taageerayo ajandaha horumarka cimilada joogtaysan, deegaankana u roon, ee gobolka.

Ujeeddooyinka gaarka ah waa:

- In la sameeyo istaraatajiyad goboleed ku aaddan Isbeddelka Cimilada
- In halbeeg loo sameeyo isbeddelka cimilada
- In laga talabixiyo qaabka ugu habboom ee loo qiimayn karo nuglaanshaha gobolka ee isbeddelka cimilada
- In kor loo qaado wacyigelinta khubarada go'aamisa arrimaha isbeddelka cimilada ee Gobolka
- In la fududeeyo qorshaynta mashaariicda iyo fekradaha gaarka ah ee wax lagaga qabanayo Laqabsiga isbeddelka cimilada iyo la tacaaliddiisa ee heer gobol; iyo
- In laga talabixiyo shuruucda haayadeed ee ugu habboon (mid sharci, siyaasadeed, iyo qaabaynta haayadeed iyo iskaashiga), si loo dardargeliyo tallaabooyinka Laqabsiga iyo yaraynta dhibta isbeddelka cimilada

5.3 Hagaha IGAD-ICPAC ee Qabanqaabada Ka-wadashaqaynta Adeegyada Cimilada

Dawladda Somaliland waxa ka go'an inay joogtayso iskaashiga ay la leedahay Xarunta Saadaasha iyo Dhaqangelinta Cimilada ee IGAD kaas oo ay aqoonsan tahay Haayadda Saadaasha Hawada ee waddamada IGAD siisa adeegyo Cimilada khuseeya.

5.4 Dedaallada kale ee Caalamiga ah

Sida hay'ada UNEP xustay, Jamhuuriyaddii Hore ee Soomaaliya, oo ay Somaliland qayb ka ahayd xilgaa, waxay saxeexday heshiisyo caalami ah oo khuseeya adeegsiga iyo maaraynta khayraadka dabiiiciga ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin (heshiisyadan oo, sida uu qodobka 10aad ee Dastuurka Somaliland dhigayo, Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dhawraysaa heshiisyadii ay dawladii hore loo odhan jiray soomaaliya

gashay ee aan ka hor imanay jiritaanka iyo maslaxadda Jamhuuriyadda Somaliland):

1. Heshiiska Ganacsiga Caalamiga ee Dhirta iyo Xayawaannada Gabaabsiga ah
2. Heshiiska Ilaalinta Noocyada guur guurta ee Xayawaannada Duurjoogta ah
3. Heshiiska Gobolka ee Ilaalinta Deegaanka Badda Cas iyo Gacanka Cadan
4. Heshiiska Iskaashiga Gobolka ee Kiisaska Degdegga ah ee Khuseeya La Dagaallanka Dikhawga ay Sababaan Saliidda iyo Walxaha kale ee Halista ah
5. Heshiiska QM ee Sharciga Badaha
6. Heshiiska Goobaha Ilaashan, Dhirta iyo Xayawaannada Duurjoogta ah ee Gobolka Bariga Afrika
7. Heshiiska Iskaashiga Kiisaska Degdegga ah ee ku Aaddan La Dagaallanka Dikhawga Badaha Bariga Afrika
8. Heshiiska Ilaalinta, Maaraynta iyo Horumarinta Deegaannada Badaha iyo Xeebaha ee Gobolka Bariga Afrika (Heshiiska Neyroobi)



6

XEELADAHA LAQABSIGA IYO
U-ADKAYSIGA AAFOOYINKA
CIMILADA

6.1 Qaybaha Mudnaanta leh

Somaliland waa waddan sabool ah oo aan horumarsanayn oo si weyn ugu tiirsan nidaam dhaqaale oo kooban, oo khayraad ku salaysan, kaas oo si gaar ah ugu nugul saamaynta taban ee Isbeddelka Cimilada. Sidaa awgeed, mudnaanta siyaasaddani waxay si weyn ugu salaysan tahay, oo loo diyaariyey inay tixgeliso:

- i. Khatarta Isbeddelka Cimilada ee ku wajahan qaybaha muhiimka ah (deegaanka, waxsoosaarka, iyo bulshada)—taas oo muujinaya saamaynta taban ee socota, siina kordhaysa—iyo sidii loo yaray lahaa nuglaanta qaybahan ee ku aaddan saamaynta khatarta ah ee isbeddelka cimilada.
- ii. Warbixinta qaran ee qiiqa neefaha guriga cagaaran(greehouse gases) ee hadda jirta oo ah mid kooban, marka la bardhigo waddamo kale oo badan, oo ay qaar Gobolka ku yaallaa ku jiraan.
- iii. Mudnaanta Siyaasadaha Qaran (Qorshaha III aad ee Horumarka Qaranka iyo Higsiga Qaranka ee 2030).
- iv. Natijjada nidaamka la-tashiga iyo falanqaynta saamileyda muhiimka ah ee ka socda haayadaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya qaybaha deegaanka, dhaqaalaha iyo bulshada; kuwaas oo u nugul khataraha Isbeddelka Cimilada.

Iyada oo arrimaha kor ku xusan maskaxda lagu hayo, waxa hoos ku xusan tallaabooyinka qaybaha ku salaysan ee muhiimka u ah Laqabsiga cimilada:

6.1.1 Qaybta Beeraha

Ujeeddada

In kor loo qaado horumarinta beeraha, iyada la xaqiijinayo waxsoosaarka joogtaysan ee dalagga, loona marayo farsamooyin waxsoosaar iyo kuwo maarayneed oo deegaanka ku habboon, lana raacayo nidaam sharci oo loogu talagalay maaraynta habboon ee deegaanka.

Iyada oo sababtu tahay isbedelka iyo xaddiga hooseeya ee roobka ee sababaya biyo-yaraanta iyo waxyeellada deegaanka, muddo tobannaan sano ah ayuu hoos-u-dhac ku socdey qaybta waxsoosaarka beeraha ee Somaliland. Isbeddellada cusub ee ay keenaan aafiooyinka la xidhiidha

Isbeddelka Cimiladu, waa kuwo la filayo inay uga sii daraan hoos-u-dhaca; haddaba, si kor loogu qaado adkaysiga qaybtan, waxa la soo jeediyey istaraatajiyadahan soo socda:

- Waa in qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaypta beeraha, si looga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- Waxa si degdeg ah loogu baahan yahay in la sameeyo qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan Iisticmaalka Dhulka, taas oo ujeeddadeedu tahay sidii loo samayn lahaa Maarayn Dhulka oo Joogtaysan (Karti Nidaamsan oo ku saabsan Adeegsiga Dhulka), oo waafaqsan xaaladda habdhiska deegaanka dabiiiciga ah iyo midda dhaqan-dhaqaale ee dalka, si loo taageero isticmaalayaasha dhulka, gaar ahaan beeraleyda, iyo qorsheeyeyaasha dhulka, si kor loogu qaado daryeelka iyo soo celinta dhulka waxyeelladu gaadhey.
- Waa in la aas aaso Nidaamka Kormeerka Saadaasha Hawada ee Qaranka (Nidaamka Digniinta Hore), kaas oo ujeeddadiisu tahay kor-u-qaadista awoodda qaranka (xirfadda, xogta iyo cilmibaadhista), iyo xoojinta farsamooyinka u-diyaargarowga iyo maaraynta isbeddelka cimilada iyo aafaooyinka.
- Waa in la aas aaso kaydka abuurka qaranka iyo waxsoosaarka cuntada, si loo kordhiyo sugnaanta cuntada, gaar ahaan haddii aafaooyin dhacaan, lana yareeyo khatarta macaluusha iyo nafaqadarrada, iyo cudurrada bulshada nugul.
- Waa in la kobciyo farsamooyinka qabashada biyaha roobka ee meelaha wax laga beero, si loo kordhiyo helitaanka biyo beeraha loo adeegsado.
- Waa in la wanaajijo xaaladda ciidda, lana dardargeliyo adeegsiga noocyada kala duwan ee midhaha (dalag gedi) ee hal goob xilliyada kala duwan.
- Waa in la sameeyo barmaamijyo tababbar oo lagu horumarinayo awoodda farsamo oo heer wasaaradeed/haayadeed ah iyo heer beeraley ah, kuwaas oo ku saabsan farsamooyinka beerashada joogtaysan iyo qaababka casriga ah ee waraabka beeraha.
- Waa in la adeegsado dalagyo abaarta u adkaysta. Gallayda ayaa tusaalaha ugu muhiimsan u ah dalagga noocan ah.
- In la sameeyo qorshayaal cudurrada lagu maaraynayo, si loo yareeyo cudurrada midhaha ku dhaca, iyada oo la adeegsanayo barmaamijyo tababbar, si loo kordhiyo xaddiga iyo tayada dalagga soo go'aya labadaba.

- In barmaamijyo wacyigelineed oo ku saabsan xidhiidhka ka dhexeeya adeegsiga dhulka iyo isbeddelka cimilada loo qabto bulshooyinka xoolo dhaqato-beeraleyda ah.
- In la sameeyo dhiirrigelin dhaqaale, si wax looga beddelo habdhaqannada la xidhiidha adeegsiga dhulka/bannaynta dhulka, loona yareeyo ceshiimooyinka daaqa sharcidarrada ah.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaypta beeraha iyo xayndaabyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.2 Qaypta Xoolaha Nool

Ujeeddada:

In la dardargeliyo waxsoosaarka xoolaha nool, iyada oo la horumarinayo waxqabadyo dhinacyo badan leh oo suurageliya in la xaqiijiyo dhaqaalaha qaranka ee ku aaddan waxsoosaarka xoolaha nool.

Masiiboooyinka la xidhiidha isbeddelka cimilada, sida abaaraha soo noqnoqda , daadadka , iyo waxyeellada deegaanka ee sii kordhaysaa (xaalufka iyo nabaadguurka) waxay sannadihii u dambeeyey Somaliland ka noqdeen dhacdooyin joogto ah, waxaanay sababeen in tiradii iyo waxsoosaarkii xooluhu ay hoos u dhacaan. Wuxaan la filaya in aafaooyinka Isbeddelka Cimilada la xidhiidhaa ay hoos u dhaca qaybtan uga sii dari doonaan; kolkaa si kor loogu qaado adkaysiga qaybtan, waxa ay siyaasadu soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaypta xoolaha nool, si loogaga qiyaasqaato isbeddelada mustaqbalka.
- In la dhiso awoodda farsamo—in la sameeyo barmaamij tababbar oo heer wasaaradeed/ haayadeed iyo heer bulsho ah oo ku saabsan xirfadaha joogtaysan ee waxsoosaarka xoolaha nool.
- In la sameeyo qorshayaal lagu maaraynayo cudurrada faafa, si loo yareeyo cudurrada xoolaha isaga gudba, iyada oo loo marayo mashaariic daaweyneed.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaypta iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.



6.1.3 Qaybta Biyaha

Ujeeddada:

In khayraadka biyaha loo maareeyo, loona adeegsado, si hufan oo wax-ku-ool ah, si kor loogu qaado daryeelkooda iyo helitaanka xaddi biyo ah oo ku filan, tayo ahaanna ku habboon cabista dadka iyo xoolahaba.

Somaliland gudaheeda, helitaanka biyo nadiif ahi si dabiici ah buu u xaddidan yahay. Ilaha ugu muhiimsan ee ay bulshadu biyaha ka heshaa waa barkadaha, ceelasha iyo balliyada. Si loo xoojiyo adkaysiga khayraadka biyaha haddii ay aafiooyin cimilada la xidhiidhaa dhacaan, waxa ay siyaasadu soo jeedisay istaraatajiyadahan soo socda:

- In qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaybtan, si loogaga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- In kor loo qaado maaraynta khayraadka biyaha–maaraynta biyo-shubka iyo mashaariicda qabashada biyaha roobka.
- In la sameeyo ceelal dhaadheer oo istaraataji ah, si loo kordhiyo helitaanka biyaha ee xilliyada roob-la'aanta/abaaraha.
- In la horumariyo nidaamyada kaabayaasha biyaha, nidaamyada biya-ballaadhinta, ee magaalo madaxyada iyo magaalooyinka kaleba.
- In la bilaabo hindisayaal lagu soo saarayo biyaha dhulka hoostiisa.
- Si kor loogu qaado tayada biyaha, waa in la adeegsado hababka nadiifinta biyaha, lana deyro ilaha biyaha ee furan.
- Si looga fogaado dikhowga biyaha, waa in kor loo qaado isticmaalka dararka iyo habka biyo shubka ee ilaha biyaha ee ay xoolahu ka cabbaan.
- In kor loo qaado dayactirka, lana dardargeliyo adeegsiga qalabka cimilada u adkaysta marka la dhisayo, nidaamyada biyo-ballaadhinta.
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer qaran ah, oo lagu kordhinayo aqoonta ku saabsan saamaynta isbeddelka cimilada.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha iyo habraacyada sharci ee qaybta biyaha, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.4 Qaybta Kalluumaysiga

Ujeeddada:

In la helo dhaqaale dhammaystiran oo ku salaysan khayraadka badda, iyada oo la isku dubbaridayo deegaannada badda.

Iyada oo sababtu ay tahay jiritaan la'aanta siyaasado sax ah oo khuseeya deegaannada badda iyo fulinta habraacyada sharci, khayraadka baddana waxa sidoo kale soo wajahay caqabado ka dhashay kalluumaysiga xad-dhaafka ah, daadinta qashinka, iyo xaalufinta geed-xeebeedka iyo dikhowga daadka roobka ee bada gelaya. Wawaana la filaya in saamaynta isbeddelka cimiladu ay uga sii dari doonto khatartan; sidaas darteed, si loo xoojiyo adkaysiga qaybta kalluumaysiga, waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaybtan, si loogaga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- In la sameeyo kaydad-xilliyeedyo ilaashan, si loo dhawro goobaha uu kalluunku ku tarmo, loona badiyo tarminta iyo kaydka kalluunka.
- In la sameeyo barmaamijyo tababbar oo kor loogu qaadayo, laguna dardargelinayo isticmaalka farsamooyinka casriga ah ee kalluumaysiga.
- In la adeegsado tignoolajiyadda habboon (shabagga kalluumaysiga), si loo yareeyo waxyeellada goobaha kalluunku ku dhalo.
- In la sameeyo Nidaamka Digniinta Duufaanka, si loo yareeyo khatarta masiibooyinka kalluumaysatada iyo bulshooyinka xeebaha deggen.
- In la horumariyo kaabayaasha badda iyo hababka fududeeya in laga samatabbaxo saamaynta musiibooyinka cimilada la xidhiidha.
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer wasaaradeed/haayadeed ah, oo lagu kordhinayo aqoonta ku saabsan saamaynta isbeddelka cimilada.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.



6.1.5 Deegaanka Dabiiciga ah (Dhirta iyo Xayawaanka)

Ujeeddada:

In la daryeelo, lana maareeyo dhirta iyo xayawaanka dalka iyo hab-nololeedkooda (wada oolkooda), si loo xaqijiyo ilaalintooda, ka-faa'ideysigooda joogtaysan, iyo yaraynta khilaafyada bulshada ee la xidhiidha isticmaalka khayraadka dabiiciga ah.

Ku-tagrifal aan xakame lahayn oo muddo tobannaan sano ah ku socdey deegaanka dabiiciga ah ayaa waxyeello badan gaadhisiyey khayraadka dabiiciga ah ee dalka, kaas oo kordhiyey nuglaanta qaybtan ee la xidhiidha khatarta isbeddelka cimilada. Si loo xoojiyo adkaysiga qaybta deegaanka dabiiciga ah, waxay siyaasaddani soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qaybtan lagu sameeyo qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan u-nuglaanta isbeddelka cimilada, si looga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- In si joogtaysan loo maareeyo khayraadka dhul-daaqsimeedka—in la sameeyo Seere daaqsimeedyo xilliyaysan, seero kaymeed iyo barmaamijyo carrada biyaha loogu joojinayo.
- In la sameeyo qorsheyaal Cagaaran—barmaamijyo dhulka xaalufay lagu dhiraynayo.
- In la dardargeliyo dhir beerista iyo beerista isku dhafan(agroforestry) , kuwaas oo loola dan leeyahay in lagula dagaallamo ka hortaga xaalufinta dhulka ay dadka xoolo dhaqato-beeraleyda ahi ku nool yihiin.
- In la kordhiyo qorsheyaasha qabashada biyaha roobka si kor loogu qaado helitaanka biyaha ee dhul-daaqsimeedyada iyo dhulalka bannaan.
- In la kordhiyo dedaallada daryeelka ciidda, si kor loogu qaado xaaladda dhirta, xaddiga daaqa xoolaha iyo tayadiisaba.
- In barmaamijyo wacyigelineed oo ku saabsan xidhiidhka ka dhexeeya adeegsiga dhulka iyo isbeddelka cimilada loo sameeyo bulshooyinka xooladhaqatada ah iyo kuwa beeraleyda ah.
- In la sameeyo dhiirrigelin dhaqaale, si wax looga beddelo habdhaqanka adeegsiga dhulka/bannaynta dhulka.
- In la sameeyo barmaamijyo awood-dhis ah oo heer wasaaradeed/haayadeed ah, kuwaas oo lagu kordhinayo aqoonta ku saabsan saamaynta isbeddelka cimilada.
- In la aas aaso/lana horumariyo aagag lagu ilaaliyo noolayaasha kala duwan (dhirta iyo xayawaanka), iyo seerayaal qaran iyo goobo biyood oo xayawaanka duurjoogta ah loogu talagalay.

- In kor loo qaado fulinta sharchiyada iyo baadhitaannada, si loo yareeyo laynta xayawaannada duurjoogta ah iyo jarista dhirta dabargo'a khatarta ugu jirta.
- In la sameeyo dhiirrigelin dhaqaale, si kor loogu qaado ilaalinta duurjoogta.
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer wasaaradeed/haayadeed ah, si loo kordhiyo aqoonta la xidhiidha saamaynta isbeddelka cimilada ee qaybtan iyo sidoo kale wacyigelin bulsheed oo ku waajahan daryeelka noolayaasha kala duwan iyo deegaanka.
- In la sameeyo goobo biyood istaraatajia, si loo kordhiyo helitaanka biyaha ee xayawaannada duurjoogtaahwakhtiyadaabaaraha.
- In qiimayn lagu sameeyo dhirta iyo xayawaanka khatarta ugu jira inay dabargo'aan, iyada oo ujeeddadu tahay sidii loo soo bandhigi lahaa xalal gaar ah oo wax lagaga qabanayo.
- In la sameeyo cilmi-baadhisyo iyo daraasado ku saabsan saamaynta isbeddelka cimilada.
- In la sameeyo goobo lagu ilaaliyo kala-duwanaashaha khayraadka dabiiciga ah ee deegaanka badda (sida goobaha takhayga, barkulanka shinbiraha hayaanka ah, shacaabiga taxan, iwm)
- In la sameeyo goobo lagu ilaaliyo kala-duwanaanshaha khayraadka dabiiciga ah ee berriga (sida buuraha iyo goobaha aasaarta qadiimiga ah).
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaypta iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1. 6 Qaybta Kaabayaasha Gaadiidka iyo Waddooyinka

Ujeeddada:

In la xoojiyo dayactirkka iyo dhismaha waddooyinka, si loo horumariyo xaaladaha dhaqan-dhaqaale ee dadka iyo dakhligooda, fursadna loogu siiyo shaqada, arrimaha bulshada, caafimaadka iyo waxbarashada.

kulnta ugu badan ganacsiga iyo isu-socodka bulshadu waxa uu ku tiirsan yahay, oo uu ku shaqeeyaa, gaadiidka iyo waddooyinka; taasi waxay muujinaysaa in kaabayaasha gaadiidka iyo waddooyinku uu fure u yahay socodsiinta horumarka waddanka. Intaas waxa dheer, qaypta gaadiidka iyo waddooyinku waxay ka mid tahay ilaha ugu waaweyn ee laga hayo xog qaran oo aad u kooban oo ku saabsan qiiqa neefaha guriga cagaaaran[greenhouse gasses]. Haddaba,



si loo xaqiijiyo in qaybta gaadiidka waddooyinku u adkaysan karto saamaynta isbeddelka ncimilada, loona yareeyo qiiqa hawada ee qaybtam, waxay siyaasaddani soo jeedineysaa istaraatajiyadahan daruuriga ah:

- In qimayn dhammaystiran oo ku saabsan u-nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaybtan, si looga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- In la dayactiro, lana horumariyo kaabayaasha shabakadaha waddooyinka ee hore u jirey, si kor loogu qaado adkaysiga qaybtan ee ku aaddan isbeddelka cimilada.
- In la horumariyo qorshaynta iyo qaabaynta waddooyinka cusub, si loo xoojiyo adkaysiga duleed ee shabakadaha waddooyinka.
- In la horumariyo heerka iyo shaqaynta nidaamka gaadiidka waddooyinka, si loo dhimo raadka kaarboonkooda.
- In la dhimo wasakhawga sii kordhaya (wasakhawga hawada iyo habaaska) iyo cidhiidhiga magaalooyinka, lana dhiirigaliyo adeegsiga gaadiidka aan mishiinada lahayn (baaskiiladaha), taas oo dhinaca kalana xoojinaysa caafimaadka iyo fayaqabka muwaaddiniinta.
- In la horumariyo tayada nidaamka gaadiidka (xaaladda baabuurta) iyo adkaysigooda, lana xoojiyo dhaqangelinta iyo nidaamka liisan bixinta ee darawallada baabuurta.
- In la horumariyo aqoonta guud ee waddooyinka iyo shuruucda waddo-marista ee dadweynaha adeegsada.
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer wasaaradeed/haayadeed ah, si loo kordhiyo aqoonta la xidhiidha saamaynta isbeddelka cimilada.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.7 Qaybta Tamarta iyo Macdanta

Ujeeddada:

In la daboolo baahiyaha tamarta ee qaranka, siloo kordhiyo hufnaantooda iyo joogteynta deegaanka.

Horumarinta qaybta tamarta iyo macdantu waxay qayb muhiim ah ka tahay Qorshaha

Horumarka Qaranka (NDP III) iyo Higsiga Qaranka ee 2030. Wershadaha tamarta iyo macdanta labaduba waxay ka hawlgalaan safka hore ee dunida dabiiciga ah, iyo badanaaba deegaannada cidhifyada, iyo kuwa go'doonsan; kuwaas oo ay u badan tahay inay waxyello ka soo gaadho saamaynta isbeddelka cimilada. Si loo xoojiyo adkaysiga qaybtan, waxay siyaasaddani soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaybtan, si looga qiyaasqaato isbeddellada mustaqbalka.
- In la horumariyo, lana dardargeliyo maalgelinta ilaha kale ee tamarta joogtaysan ama beddelka u ah dhuxusha, si loo yareeyo adeegsiga dhuxusha, loogana hortago xaalufka.
- In la horumariyo, lana dardargeliyo, maalgelinta ilaha kale ee tamarta (qorraxda iyo dabaysha), si loo yareeyo qiiqa ka dhasha ilaha tamarta ee shidaalka dabiiciga ah ku shaqeeya, gaar ahaan korantada.
- In la dardargeliyo, lana kordhiyo maalgelinta kaabayaasha ballaadhinta tamarta (nidaamka gudbinta korantada iyo goobaha lagu kaydiyo LPG-ga loo yaqaan).
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer wasaaradeed/haayadeed ah, si loo kordhiyo aqoonta la xidhiidha saamaynta isbeddelka cimilada
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.8 Qaypta Isgaadhsiinta Tignoolajiyadda

Ujeeddada

In la horumariyo badbaadada iyo tayada kaabayaasha isgaadhsiinta tignoolajiyadda, si loo yareeyo khatarta korantada haddii ay aafiooyin biyaha la xidhiidhaa dhacaan.

Qaypta isgaadhsiinta tignoolajiyaddu waxay si aad ah ugu tiirsan tahay kaabayaasha aas aasiga ah ee Aadka ugu nugul aafiooyinka la xidhiidha isbeddelka cimilada; sidaa daraaddeed, si loo xoojiyo adkaysiga qaybtan, siyaasaddani waxay soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada lagu sameeyo qaybtan, si loogu qiyaaso isbeddellada mustaqbalka.



- In kor loo qaado kaabayaasha isgaadhsiinta tignoolajiyadda, si ay ugu adkaystaan saamaynta aafooyinka isbeddelka cimilada la xidhiidha,
- In la sameeyo barmaamijyo awood-kobcineed oo heer wasaaaradeed/haayadeed ah, si loo kordhiyo aqoonta la xidhiidha saamaynta isbeddelka cimilada
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.9 Qaybta Magaaloooyinla/Deegaanka Dhisan

Ujeeddada:

In si nidaamsan loo hago horumarka joogtaysan ee magaalo madaxyada iyo magaaloooyinka kale , kaas oo ay qayb ka yihiin Laqabsiga isbeddelka cimilada iyo khataraha cimilada la xidhiidha.

Iyada oo ay sababtu tahay nashqadda gabowdey iyo nidaamka qorshaynta magaaloooyinka, oo uu magaalowga aadka u kordhayaana weheliyo, magaaloooyinka iyo magaalo madaxyada dalku waa kuwo aad ugu nugul aafooyinka la xidhiidha isbeddelka cimilada. Haddaba, si loo xoojiyo adkaysiga qaybtan, waxa loo baahan yahay in la hirgeliyo istaraatajiyadahan soo socda:

- In qaybtan lagu sameeyo qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada, si loogu qiyaaso isbeddellada mustaqbalka.
- In si nidaamsan loo hago horumarka joogtaysan ee magaalo madaxyada iyo magaaloooyinka kaleba, kaas oo ay qayb ka yihiin in Laqabsiga isbeddelka cimilada iyo khataraha la xidhiidha aafooyinka lagu daro qorshaynta magaalo madaxyada iyo magaaloooyinka, lana xoojiyo adkaysiga kaabayaasha magaalada; waxa si degdgeg ah loogu baahan yahay in la fuliyo "Xeerka Qorshayta Magaaloooyinka".
- In la horumariyo adeegsiga tamarta, la ilaaliyo, lana daryeelo deegaanka, sidoo kalana la dardargeliyo horumarka joogteytan ee heer degmo iyo heer bulsho; waxa loo baahan yahay in la sameeyo "Siyasadda" iyo "Xeerarka Dhismaha".
- In la horumariyo nidaamka maaraynta qashinka, si loo yareeyo tuulmidda qashinka adag iyo dikhogga hawada ee magaaloooyinka iyo magaalo madaxyada, loona dhimo xaddiga neefaha guriga cagaaran(greenhouse gases) ee hawada ku jira.

- In dib u habayn iyo barmaamijyo awood-kobcineed loo sameeyo masuuliyiinta maamulka degmooyinka, lana abuuro xeerar shaqo iyo xidhiidh ka dhexeeya magaaloojinka iyo "ka hawlgalayaasha debadeed" ee laga yaabo inay ku hawlan yihiin dedaallada Laqabsiga cimilada.
- In la sameeyo ololayaal wacyigelineed, si kor loogu qaado, loona xoojiyo aqoonta dadweynaha iyo shirkadaha dhismaha ee la xidhiidha saamaynta isbeddelka cimilada.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.10 Qaybta Waxbarashada

Ujeeddada

In kor loo qaado aqoonta la xidhiidha isbeddelka cimilada, iyada oo dib-u-eegis lagu samaynayo manhajka waxbarashada, laguna darayo aqoonta la xidhiidha isbeddelka cimilada.

Aqoontu waxay qayb laxaad leh ka tahay jawaabta caalamiga ah ee ku aaddan isbeddelka cimilada, waddamada badankooduna mar hore ayayba aqoonta isbeddelka cimilada la xidhiidha ku dareen manaahijtooda qaranka, si ay u horumariyaan aqoonta isbeddelka cimilada ee carruurtooda iyo dhallinyaradooda. Si taas loo sameeyo, waxa ay siyaasadani soo jeedinaysaa istaraatajiyadahan hoose:

- In qaybtan lagu sameeyo qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada, si loogu qiyaaso isbeddellada mustaqbalka.
- In dib loogu noqdo manhajka qaranka, aqoonta isbeddelka cimilada ee la xidhiidha horumarka joogtaysanna lagu daro manaahijta oo dhan–iskuullada hoose/dhexe iyo kuwa saraba.
- In dib loo eego, lana horumariyo barmaamijyada tababbarka macallimiinta, si aqoonta la xidhiidha isbeddelka cimilada ay qayb uga noqoto dhammaan mashaariicda tababbarka macallimiinta ee dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa saraba.
- In la horumariyo dhismayaasha iyo qaabaynta goobaha waxbarashada, si loola tacaalo saamaynta isbeddelka cimilada, loona joogteeyo deegaan waxbarasho oo deggenaan iyo xasillooni leh, iyada oo xoogga la saarayo tamarta, biyaha, caafimaadka, nadaafadda, fayaqabka carruurta iyo dhallinyarada.



- In la horumariyo maalgelinta qaybta waxbarashada, si kor loogu qaado isdiiwaangelinta iyo helitaanka waxbarashada ee heer qaran, heer gobol, iyo heer bulsho.
- In waddanka oo dhan laga sameeyo ololayaal iyo barmaamijyo wacyigelineed, sida kuwo dhir lagu beerayo iyo kuwo deegaanka lagu daryeelayo, oo goobaha waxbarashada lagu qabto.
- Waa in la kordhiyo barmaamijyada waxbarashada dadban ee loogu talagalay kooxaha nugul ee bulshada, kuwaas oo ay ku jiraan dumarka iyo dadka reer miyiga ahi.
- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada

6.1.11 Qaybta Caafimaadka

Ujeeddada

In la horumariyo xarumaha caafimaadka, loona qaabeeeyo inay u adkaystaan isbeddelka cimilada.

Xarumaha caafimaadka asaasiga ah ee Somaliland waa kuwo si liidata u qalabaysan oo aan u diyaarsanayn, kana jawaabi karin, aafooyinka daran ee isbeddelka cimilada la xidhiidha. Si loo horumariyo adkaysiga iyo hababka samatabaxa ee qaybtan, waxa ay siyaasadani soo jeediyeysaa istaraatajiyadahan soo socda:

- In qaybtan lagu sameeyo qiimayn dhammaystiran oo ku saabsan nuglaanta isbeddelka cimilada, si loogu qiyaaso isbeddelada mustaqbalka
- In la horumariyo dhismayaasha iyo nashqadaha goobaha caafimaadka, si loola tacaalo saamaynta isbeddelka cimilada, loona joogteeyo adeeg caafimaad oo xasillooni iyo awood leh, iyada oo xoogga la saarayo hufnaanta tamarta, isticmaalka biyaha, iyo nadaafadda iyo fayaqabka bukaanka.
- In la horumariyo qaybaha shaqada ee xarumaha caafimaadka, si loo yareeyo caqabadaha waxkaqabashada culayska xanuunnada gudba iyo kuwa aan gudbin labadaba, korna loogu qaado in kooxaha nuguli ay awood u helaan in la daweeyo.
- In la horumariyo tababbarka shaqaalaha caafimaadka, farsamooyinka caafimaadkana lagu daro khataraha cimilada la xidhiidha iyo u-adkaysigooda.
- In la sameeyo ololayaal wacyigelineed oo shacabka lagu barayo sida uu isbeddelka cimiladu

u sababi karo soo noqnoqoshada iyo faafitaanka sadhooyinka iyo cudurrada cimilada ku xidhan.

- In dib loo eego, lana horumariyo, siyaasadaha qaybtan iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.

6.1.12 Taabagalinta Arimaha Qoyska

Ujeeddada

In u-adkaysiga cimilada ee Bulshada (qoyska) u nugul lagu daro qorshayaasha, barmaamijyada iyo mashaariicda horumarinta qaranka.

Waxa si weyn loo ogyahay gaar ahaan haweenka iyo waayeeelka reer miyiga ah iyo qoysaska danyarta ahi, in ay si gaar ah ugu nugul yihiin saamaynta isbeddelka cimilada, maaddaama aanay lahayn awood dhaqaale. Si bulshadaasi loogu abuuro mustaqbal isbeddelka cimilada u adkaysta, siyaasadu waxa ay soo jeedinaysaa xeeladahan soo socda:

- In lagu sameeyo qiimayn ama daraasad dhammaystiran oo ku saabsan u nuglaanta isbeddelka cimilada, si loogaga qiyaasqaato isbeddellada iman Kara mustaqbalka.
- In Baahiyaha kala duwan ee Isbedelka Cimilada ee dhinaca bulshada qaybaheeda kala duwan qorshayaasha iyo mashaariicda horumarinta qaranka lagu daro.
- In la hagaajiyo helitaanka bulshada ee khayraadka muhiimka ah sida dhulka, dalagga iyo xoolaha nool-waa in la sameeyo hindisayaal bulsheed oo ku waajahan qoysaska reer miyiga ah iyo kuwa danyarta ah iyadoo loo raacayo shuruucda dalka.
- In kor loo qaado, Lana xoojiyo, aqoonta iyo awood-u-helidda nidaamka waxbarasha iyo daryeelka caafimaadka ee bulshada qaybaheeda kala duwan-waa in si sahlan loo gaadhsiiyo deegaannada miyiga.
- In kor loo qaado oo la horumariyo ka qayb galka bulshada ee go'aan-gaadhistaa dhammaan qaybaha kala duwan-heer qaran, heer gobol iyo heer degmaba.
- In la sameeyo ololayaal wacyigelineed oo shacabka lagu barayo muhiimadda u horumarinta arrimaha bulshada si loo yareeyo nuglaanta isbeddelka cimilada la xidhiidha ee bulshada qaybaheeda kala duwan.
- In dib-u-eegis lagu sameeyo lana horumariyo, siyaasadaha iyo habraacyada sharci, iyo fulintoodaba, si looga falceliyo saamaynta isbeddelka cimilada.





[**ISKU DUBBARIDKA
ARRIMAH A LAQABSIGA
ISBEDDELKA CIMILADA**]

7.1 Awood- kobcinta (Capacity Building)

Aqoontu waa suurageliyaha horumarka dhaqan-dhaqaale, iyo awood-kobcinta saboolka, dadka jilicsan, iyo kuwa aan hadlan Karin. Awoodaha iyo xirfadaha aan ku fillayn maaraynta isbeddelka cimiladu waxay caqabad ku noqon karaan fulinta wax-ku-oolka ah ee hawlaha Laqabsiga iyo la-tacaalidda isbeddelka cimilada. Caqabado cusub ayuu isbeddelka cimiladu ku keenayaa awoodihii hore u jiray ee Somaliland, waxaana loo baahan yahay in bulshada iyo haayaduhuba ay uga falceliyaan qaab cusub. Wuxaan muhiim ah in haweenku ay fursad la siman ta raga u helaan tababbarrada iyo barmaamijyada awood-kobcinta, si loo xaqiijiyo inay si buuxda uga qaybqaataan hawlaha ku aaddan isbeddelka cimilada.

7.2 Cilmibaadhista iyo Tignoolajiyadda

Somaliland waxay aqoonsan tahay, kuna baraarugsan tahay, baahida loo qabo horumarinta cilmibaadhista iyo tignoolajiyadda loogu talagalay laqabsiga isbeddelka cimilada. Cilmibaadhista waxay door muhiim ah ka ciyaari doontaa istaraatajiyada Somaliland ee la-tacaalidda, laqabsiga iyo yaraynta dhibta isbeddelka cimilada. Meelaha muniimka ah waxa ku jira horumarinta tignoolajiyadda, qabashada biyaha roobka, ilaalinta ciidda iyo daryeelka biyaha, hirgelinta beero casri ah oo Isbeddelka cimilada lajaan qaadi kara, horumarinta dalagga abaarta u adkaysta iyo tignoolajiyadda la xidhiidha daryeelka xoolaha nool, horumarinta tignoolajiyadda beekhaaminta tamarta, tignoolajiyadda tamarta la cusboonaysiin karo, iyo horumarinta guud ahaan qaybaha tignoolajiyadda.

7.3 Iskaashiga Goboleed iyo ka Caalamiga ah

Iyada oo ay sababtu tahay neefaha guriga cagaaran (greenhouse gases) ee ka jira gibilka inagu xeeran ee isla falgalaya dunida oo dhan, isbeddelka cimilada ee dad-sameega ahi waa dhibaato caalami ah. Isbeddelka cimiladu waxa uu meesha ka saaray dhammaan xuduudihii jirey, isaga oo aan masuuliyadda iyo adkaysiga waddamada midna u aabe yeelin, ayay waxyeelladiisa saamaysay, sidaa daraaddeed waxa muhiim ah, si isbeddelka cimilada wax looga qabto, in la sameeyo iskaashi gudaha ah, mid goboleed, iyo mid caalami ah intaba. Waxa loo baahan yahay in iskaashi xooggan lala sameeyo dawladaha jaarka ah, sida Jabbuuti, Itoobbiya, Kiiniya iyo Soomaaliya, iyo sidoo kale waddamada deeq bixiyayaasha ah.

7.4 Xogta iyo War-is-gaadhsiinta

Somaliland waxay wajahaysaa caqabado waaweyn oo la xidhiidha xogta iyo war-isgaadhsiinta ku saabsan isbeddelka cimilada, kuwaas oo ay ka mid yihiin tayada xogta, helidda, ururinta, wadaagista iyo turjumaadda xogahaas. Waxay Somaliland u baahan tahay maarayn ku aaddan xogta iyo aqoonta la xidhiidha isbeddelada cimilada, si kor loogu qaado ka-qaybqaadashada iyo wacyigelinta shacabka. Waa in la dejiyo istaraatajiyado wax-ku-ool ah oo lagu hago ururinta, kaydinta, lafagurka, adeegsiga iyo



faafinta xogaha isbeddelka cimilada la xidhiidha. Xogaha ku saabsan u-diyaargarowga isbeddelka iyo saamaynta cimilada ee qallafsan waa mid aad u yar, kuwaas oo ay ku jiraan daadadka iyo abaruuh.

7.5 Waxbarashada iyo Wacyigelinta Dadweynaha

Aqoonta iyo wacyigelinta dadweynaha ee arrimaha isbeddelka cimiladu waa istaraatajiyad muhiim u ah xaqijintu ka qaybqaadashada iyo wadashaqaynta. Waxbarashada dadweynaha iyo wacyigelintu waxay dhirrigelin doonaan ogaalka, waxayna abuuri doontaa madalo xogta la isku weydaarsado, laguna faafiyio.

7.6 Warbaahinta

Warbaahintu door muhiim ah ayay ka qaadataa abuurista wacyiga ku saabsan arrimaha isbeddelka cimilada ee daneeyayaasha dhexdooda, oo uu ku jiro heerka bulshadu. Gudbinta xogtu waa inay noqoto mid xaqjiqo ku dhisan, isla markaasna, marka arrimahan laga hadlayo, waxa loo baahan yahay in la helo warbaahin diiradda saarta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah. Farriimaha ay warbaahintu ku gudbiso wakhti habbooni waxay xoojin doonaan in bulshadu ay falcelin daruuri ah ka samayso laqabsiga isbeddelka cimilada iyo yaraynta khatarta aafooyinka.

8

TALLAABOOYINKA LAGULA
TACAALAYO ISBEDDELKA
CIMILADA

8.1 Tamarta

Somaliland gudaheeda, isha ugu weyn ee qiiqa neefaha guriga cagaarani waa gubashada shidaalka dabiiciga ah, isla markaasna Somaliland waxay ka mid tahay waddamada uu horumarkoodu aadka u liito ee ay kartidooda tamartu aadka u hoosayso. Sidaas awgeed, siyaasaddan waxa loogu talagalay inay kor u qaaddo kartida tamarta iyo adeegsiga ilaha tamarta ee ka qayb qaata yaraynta qiiqa neefaha guriga cagaaran (greenhouse gasses).

Bayaanada Siyaasadda:

1. In la horumariyo adeegsiga tooska ah ee tignoolajiyadda tamarta la cusboonaysiin karo ee dhammaan qaybaha dhaqan-dhaqaale ee Somaliland.
2. In la dardargeliyo adeegsiga nidaamka gaadiidka deegaanka u roon ee qiiqooda neefaha guriga cagaarani uu yar yahay.
3. In la sameeyo hab taabbagelineed oo arrimaha Lamaanaha khuseeya, oo ku saabsan adeegsiga joogtaysan ee tignoolajiyadda cagaaran.
4. In la xoojiyo helidda qalabka shidaalka dabiiciga ah ku shaqeeya ee nadiifta ah, ee aan saamaynta daran ku lahayn deegaanka.
5. In la sameeyo, lana joogteeyo, nidaam lagu la socdo neefaha guriga cagaaran (green house gasses) oo ku salaysan nidaamyada saxda ah ee qaybta tamarta.
6. In la sameeyo, si joogto ahna loo cusboonaysiyo, diiwaanka qaranka ee qiiqa dad-sameega ah ee ay sii daayaan ilaha neefaha guriga cagaaran.
7. In la sameeyo nidaam loogu talagalay la socoshada, ka-warbixinta, iyo sugidda diiwaanka neefaha guriga cagaaran oo la xidhiidha fulinta waajibaadka NDC (National Determinant Contribution) sannad ka hor warbixinta caalamiga ah.

8.2 Beeraha, Xoolaha Nool iyo Kalluumaysiga

Qaybaha Beeraha, Xoolaha Nool iyo Kalluumaysiga ee Somaliland waxay soo saaraan xaddi yar oo neefaha guriga cagaaran ah, kaas oo ah Methane (CH_4) ka dhalata digada xoolaha. Seddexdan qaybood waa qaybaha waxsoosaarka ee ugu muhiimsan, kuwaas oo udub-dhexaad u ah dhaqaalaha Somaliland.

Bayaanada Siyaasaddan:

1. In kor loo qaado maaraynta qashinka xoolaha.
2. In la xoojiyo nidaamyada quidinta xoolaha.

3. In la kordhiyo adeegsiga ilaha tamarta la cusboonaysiin karo ee waraabinta beeraha, soosaarista biyaha, iyo goobaha qabow ee kalluunka lagu kaydiyo.
4. In la xakameeyo saamaynta ay hawlahaa beerahu ku yeelan karaan kaymaha, dhuldaaqsimedyada, biydhacyada, iyo dhul-cawseedyada, si loo badbaadiyo dhirta, loona yareeyo heerka qiiqa.
5. In la yareeyo ka-qaybqaadasha beeraha ee qiiqa neefaha guriga cagaaran, isla markaasna kor loo qaado doorka ay beeruhu ku leeyihii dhimista kaarboonka.
6. In la dayactiro doonyaha kalluumaysiga, Lana adeegsado injiinno hagaagsan iyo shidaal nadiif ah.

8.3 Qaybta Kaymaha iyo Isticmaalka Dhulka

Qaybta kaymaha Somaliland aad bay muhiim ugu tahay yarataynta qiiqa neefaha guriga cagaaran, maaddaama ay kaymuu tiir weyn u yihiin deegaanka, sidaas awgeedna ay muhiimad weyn u leeyihii la tacaalidda isbeddelka cimilada.

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu way garawsan tahay in dhir-jaristu ay door weyn ku leedahay isbeddelka cimilada Somaliland iyo adduunkaba, maxaa yeelay waxa la qiyaasay in sannad walba in ka badan 1.5 bilyan oo tan oo CO₂ ah lagu sii daayo gibilka iyada oo uu xaalufka sabab u yahay, oo ay ugu horrayso jaridda iyo gubidda kaymuu. Isticmaalka qof ahaaneed ee dhulka ee sababaha kala duwan leh, kuwaas oo ay ku jiraan falashada beeraha, kaydsashada daaqa, magaalaynta, waddooyinka, iyo macdan-qodistu. Siyaasaddani waxay ku baaqaysaa in lala tacaalo jarista kaymaha, si loo yareeyo isbeddelka cimilada ee mustaqbalka.

Bayaannada Siyaasadda:

1. In la qaado tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagula tacaalayo ficillada xaalufinta deegaanka.
2. In la sameeyo ilaaliyayaal qaran oo u xilsaaran daryeelka kaymaha, si loo ilaaliyo, loona maareeyo kaymaha, dhul-daaqsimeedka iyo duurjoogta.
3. In la abuuro hannaan maamul oo heir qaran iyo heir deegaanba ah oo xakameeya shidista dhuxusha, si loo yareeyo qiiqa neefaha guriga cagaaran.
4. In waddanka oo dhan laga sameeyo ololayaal qaran oo taxane ah oo dhir beeris ah.
5. In la xoojiyo awoodda iyo fulinta istaraatiyadda REDD+ (yarataynta qiiqa ka dhasha xaalufka iyo waxyeellada kaymaha ee waddamada soo koraya), iyo doorka daryeelka, maaraynta joogtaysan ee kaymaha, iyo xoojinta xaddiga kaarboonka kaymahu qabanayaan ee



Somaliland.

6. In la sameeyo diiwaanka iyo nidaamka qiyaasta kaarboonka qaranka, lana caddeeyo waajibaadka ka dhalanaya xaddiga kaarboonka la sii daynayo, lahaanshaha, iyo muddada.
7. In gudaha dalka oo dhan laga dardargeliyo hawlaha kor u qaadida cufnaanta kaarboonka, sida dib u dhiraynta, dhir beerista, iyo beero-falashada isku dhafan, kuwaas oo sidoo kalana faa'ido u leh yaraynta culayska iyo cadaadiska ku dhacaya kaymaha dabiiiciga ah iyo deegaankaba.
8. In la xaqijiyo adeegsiga tudhaalaha leh ee khayraadka kaymaha iyo duurjoogta, si looga qaybqaato bulshooyinka reer miyiga ahi inay laqabsadaan isbeddelka cimilada, si ay uga qaybqaataan la tacaalisteeda.

8.4 Wershadaha

Somaliland iminka ma aha waddan warshaduhu ku badan yihii, laakiin waxa la filaya in wershadaha waxsoosaarku ay si degdeg ah u koraan, dabadeedna uu mustaqbalka qiiqu kordho. Siyaasaddani waxay soo jeedinaysaa tallaabooyin loogu diyargaroobayo yaraynta qiiqa neefaha guriga cagaaran ee wershaduhu dhaliyaan.

Bayaannada Siyaasadda:

1. In la dardargeliyo yaraynta qiiqa neefaha guriga cagaaran ee ay dhaliyaan dhammaan noocyada kala duwan ee wershadahu.
2. In la hubiyo in dhammaan wershadaha Somaliland loo horumariyo qaabab deegaanka aan waxyelayn, si loo yareeyo qiiqa.
3. In la dardargeliyo adeegsiga tamarta la cusboonaysiin karo.
4. In la hubiyo in wershaduhu aanay deegaanka iyo bulshadaba saamayn taban ku yeelan doonin.
5. In wershadaha lagu hago inaanay deegaanka waxyello u geysan.
6. In la asaaso nidaam kor loogu qaadayo maalgashiga gaarka ah ee wershadaha cagaaran

8.5 Qashinka

Korodhka neefaha guriga cagaarani isbeddello ayuu ku keenaya deegaankeenna, qaar ka mid ah isbeddelladanina waxay ku daba leeyihii qashinka adag. Maaraynta habboon ee habaynta qashinku waxay yaraysaa qiiqa neefaha guriga cagaaran, maaddaama gubista qashinka ee tamarta laga dhaliyo,

neefaha qashin-qubyada, iyo methane-ta qashinka ka dhalataa ay qiiqa kordhiyaan. Wuxuu la qiyasay in 1.6 bilyan oo tan oo ah qiiqa neefaha u dhigma CO₂ ay sannadkii 2016 dhalisay qaybta qashinku, taas oo qiyastii 5% ka ah qiiqa dunida (Kaza et al., 2018).

Qiiqa ay qaybta qashinku dhalisaa waa: methane, CO₂, iyo nitrous ogsaydh oo ka dhasha qudhunka iyo hababka nadiifinta. Inta ugu badan qiiqa methane-ta waxa sababay maaraynta qashinka adag, nadiifinta iyo sii-daynta bullaacadaha. Qiiqa nitrous-ogsaydhkana (N₂O) waxa keenay hawlo la xidhiidha nadiifinta iyo sii-daynta bullaacadaha 2015. CO₂ 1% wax ka yar ayuu ka ahaa qiiqa ka dhashay qaybta qashinka, kaas oo ay gubista qashinku keentay.

Bayaannada Siyaasadda:

1. In la dardargeliyo maaraynta habboon ee qaybta qashinka, iyada oo la adeegsanayo tignoolajiyadda casriga ah ee maaraynta qashinka.
2. In la horumariyo tignoolajiyadda dib-u-adeegsiga iyo dib-u-cusboonaysiinta qashinka.
3. In la horumariyo shidaalka ama tamarta qashinka laga dhaliyo.
4. In la xoojiyo socodka togan ee ururinta, rrista, iyo farsamaynta qashinka: nidaamyada maaraynta qashinka ee hadda jira intooda badani waxay ururiyaan, raraan, oo ay farsameeyaan mug faro badan oo qashin ah, taas oo sababta qiiqa CO₂, iyo nitrous oxide ee ka dhasha ilaha dabiiiciga ah.
5. In la abuuro socodsii togan oo la xidhiidha nadiifinta iyo daadinta qashinka, si loo yareeyo qashinka maalin walba soo baxa, kaas oo badanaa ku dambeeyaa qashinqubyada iyo godadka tignoolajiyaddoodu hoosayso.
6. In la horumariyo tignoolajiyadda casriga ah ee goobaha qashinka ee magaaloooyinka waaweyn, si kor loogu qaado maaraynta goobaha qashinka lagu daadiyo ee hadda jira, loona xakameeyo qiiqa neefaha guriga cagaaran.
7. In la horumariyo nidaamyada la socoshada ee ku salaysan farsamooyinka saxda ah, si loo qiyaso qiiqa neefaha guriga cagaaran ee qaybta qashinka.
8. In la horumariyo awoodda qaybta maaraynta qashinka
9. In la taageero in qaybta qashinka loo maareeyo qaab deegaanka aan waxyeelayn.

8.6 Caafimaadka

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu way garowsan tahay in isbeddelka cimiladu uu saamayn ku leeyahay arrimaha deegaanka ee caafimaadka jaangooya, sida hawo nadiif ah, biyo nadiif ah oo la cabbi karo, cunto dadka ku filan iyo hoy ammaan ah. Tusaale ahaan, tayada hawada ee sii xumaanaysa



yo nadaafadda deegaanka ee liidataa waxay sababaan fiditaanka cudurrada faafa sida daacuunka, cudurrada hawada ku gudba; iyo daadadka ilaha biyaha wasakheeya.

Heerkulka sii kordhayaana wuxuu sababi karaa, ama uu uga sii dari karaa, dhibaatooyin caafimaad oo kala duwan. Kulaylka ba'an ee muddada dheer qofka hayaa wuxuu keeni karaa jidhka oo kululaada, murqo xanuun, iyo xanuunnadii hore u jirey oo ka sii dara, sida xanuunnada neefmareenka iyo kuwa wadnaha.

Qaybta caafimaadku way ku baraarugsan tahay siday ugu nugushahay Isbeddelka Cimilada Somaliland.

Bayaannada Siyaasadda:

1. In si dhow loola socdo cudurrada loo aaneeyo saamaynta isbeddelka cimilada Somaliland.
2. In la asaaso nidaamyo bulshada iyo qaybaha nugul goor hore uga sii diga isbeddelada jewiga ee la xidhiidha heerkulka, roobabka, abaarahaa, daadadka iyo faafitaanka cudurrada.
3. In la xoojiyo awoodda farsamo ee ku aaddan maaraynta khataraha caafimaad ee la xidhiidha isbeddelka cimilada.
4. In la horumariyo wadaagga maclumaadka iyo nidaamyada maaraynta xogaha caafimaadka, oo ay ku jiraan cururrada cimilada la xidhiidhaa, ee dhammaan heerarka kala duwan ee nidaamka adeeg-bixinta caafimaadka.
5. In khariirad lagu muujiyo soo noqnoqshada cudurrada iyo kooxaha u nugul xanuunnada cimilada la xidhiidha.
6. In la xoojiyo unugyada ka dhex jira ee nidaamka adeeg-bixinta caafimaadka, si loo maareeyo sadhooyinka cimilada la xidhiidha
7. In go'aan-ka-gaadhistaa khataraha caafimaad ee cimilada la xidhiidha lagu daro siyaasadda caafimaadka ee heer qaran.
8. In aqoonta dhaqanka ee cimilada la xidhiidha la baadho, la qoro, laguna daro midaamyada iyo hababka adeeg-bixinta caafimaadka.
9. In la sameeyo qaabdhismed si wax-ku-ool ah loogu maareeyo, looguna baahiyo, xogaha ku saabsan khataraha caafimaad ee isbeddelka cimilada.

9

**QAABABKA MAALGELINTA
SIYAASADDA QARAN EE
ISBEDDELKA CIMILADA**

Maaddaama dhaqaale la'aantu ay weli tahay mid ka mid ah caqabadaaha ugu waaweyn ee inta badan qaybaha ku shaqada leh ka hor taagan fulinta sharciyada iyo xeerarka deegaanka ee hadda jira, waxa lagamamaarmaan ah in hindisaha Siyaasadda Laqabsiga Isbeddelka Cimilada iyo dhammaan hawlaho kala duwan ee la xidhiidhaa ay helaan maalgelin ku filan iyo rabitaan siyaasadeed, si ay awood ugu yeeshaan meelmarinta Qorshe Hawleedka Istaraatajiga ah. Jidatka inoo furan waxa ka mid ah in la abuuro maalgelin daadegsan; maalgelinta tooska ah ee qaranka marka laga tago, waa in dawladdu dhaqaale ka hesho meelo kale, sida:

- Ka qaybgalka qorshayaasha iyo nidaamyada hoos taga heshiisyada dhinacyada badan leh ee sare loogu qaadayo socodsiinta khayraadka loogu talagalay horumarka joogtaysan.
- Heshiisyada iyo iskaashiyada waddamada kala duwan iyo kuwa caalamiga ah; mashaariicda heer gobol iyo kuwa laba-geesoodka ah ee ku saabsan iskaashiga isbeddelka cimilada.

Saamaynta Isbeddelka Cimiladu waa arrin caalami ah, sidaa daraaddeed tallaabooinka laqabsiga ee lagaga jawaabayo waxyeelladiisu waxay u baahan yihiin in la sameeyo dedaallo wadajir ah oo heer deegaan ilaa heer qaran ah iyo kuwo heer waddamo kala duwan ah, iyo in la isku dubbarido dhaqaalaho dawladda, dhaqaalaho laga soo ururiyo ganacsatada gaarka ah, heshiisyada laba-geesoodka ah iyo dhaqaalaho dhinacyada badan, kuwaas oo ay ku jiraan ilaha kale ee doonaya inay taageeraan hawlaho la tacaalidda iyo laqabsiga ee lagu xoojinayo awoodda bulshada-si ay u laqabsato saamaynta isbeddelka cimilada-isla markaasna socodsiinta khayraadka ka dhigaya mid la jaanqaadi kara yaraynta qiiqa neefaha guriga cagaaran iyo u-adkaysiga cimilada. Sidaa awgeed, waxa lama-huraan ah in Dawladda Somaliland waxaa ka go'an in ay qiimayso shuruudaha khayraadka (farsamo ahaan iyo maaliyad ahaanba) loo baahan yahay si loo maalgeeliyo laqabsiga isbeddelka cimilada iyo sida ugu habboon ee khayraadkaa loo meelayn karo.

Si kastaba ha ahaatee, waxa jirta in waxsoosaarka guud ee dalku uu sannadii ugu dambeeyey si weyn u kordhay, haddana waxa jira farqi weyn oo ka muuqda kharashaadka qaranka, marka la barbardiyo kharashaadka shantii sannadood ee kasta loo qorsheeyo maalgelinta waxqabadyada horumarineed ee hadda jira ee qaybaha kala duwan. Farqigaas awgii, suuragal ma aha in Somaliland ay keligeed ku fillaato khayraadka (maaliyad ahaan iyo farsamo ahaanba) loo baahan yahay si loo maareeyo kharashka ku baxaya laqabsiga iyo la tacaalidda isbeddelka cimilada ee waddanka. Haddaba, aad bay muhiim u tahay in la sameeyo abaabul dhaqaale oo hal-abuur iyo awood leh, si loo maalgeeliyo laqabsiga isbeddelka cimilada. Waxa hoos ku xusan ilo dhaqaale oo kala duwan oo khuseeya maalgelinta barmaamijyada iyo mashaariicda isbeddelka cimilada la xidhiidha, oo hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee Somaliland ka jiraaba ay awood u heli karaan.

9.1 Qaybta Dawladda

Ugu dambayn, maalgelinta tallaabooyinka Laqabsiga ee lagaga jawaabayo saamaynta isbeddelka cimilada ee waddanku waxa masuul ka ah Dawladda Somaliland; nuxur ahaan, si looga fogaado dedaallada is barbar yaacaya, maalgelinta mashaariicda Siyaasadda waa in la waafajiyo ama ay qayb ka noqdaan miisaaniyadda qorshayaasha horumarinta qaranka iyo hawlaha ugu muhiimsan, waana in si dhow loogu xidho istaraatajayadaha maaraynta khatarta aafooyinka.

9.2 Qaybaha aan Dawliga ahayn

Iyada oo la adeegsanayo mabaadi'da ay ka midka yihiiin "**biriye ayaa bixiya**" (Polluter pays principle), iyo in la yareeyo "dhibaatada keli-faa'ideysiga" iyo "dhibaatada dadka caadiga ah", waxa jira fursado lagu abuuri karo "cashuur deegaan ama cashuur cagaaran"—oo ah cashuur lagu soo rogi karo hawlaha qaybaha qaarkood, gaar ahaan, kuwa soo saara iyo kuwa soo dejija biyaha wershadaysan iyo bacaha, iyo kuwa soo dejija shidaalka khaasatan, baadroolka iyo naaftada, kuwaas oo loo arko inay khatar ku yihiiin deegaanka, gaar ahaan magaalooyinka.

9.3 Hal-abuurka Qaadhaan-ururineed oo Gudaha ah

Adeegsiga "samafalka", oo ah caado ku qotonta diinta/dhaqanka bulshada Soomaalida, oo inta badanna loo isticmaalo ururinta dhaqaalaha xilliyada ay aafooyinku jiraan, waa in laga faa'ideysto, lana waafajiyo hawlaha rasmiga ah ee lagaga jawaabayo aafooyinka la xidhiidha isbeddelka cimilada.

9.4 Fursadaha Maalgelinta Cimilada ee Caalamiga, kuwa Dhinacyada Badan, iyo kuwa Laba-Geesoodka ah

Iyada oo la raacayo Heshiiska Guud ee QM ee Isbeddelka Cimilada (UNFCCC), habab maalgelineed oo kala duwan oo cimilada la xidhiidha ayaa laga heli karaa Bangiga Adduunka, Sanduuqa Caalamiga ah ee Deegaanka, Sanduuqa Cimilada Cagaaran, Bangiga Horumarinta Afrika (ADB), Midowga Yurub (EU) iyo Waddamada Xubnaha ka ah, Maraykanka, Golaha Iskaashiga Gacanka Carabta (GCC), Haayadda Iskaashiga Caalamiga ah ee Jabbaan (JICA), iyo Iskaashiga U-adkaysiga Cimilada Adduunka (GCRP).



9.5 Maalgelinta Cimilada ee aan Dawliga ahayn (Haayadaha Khayriga ah)

Hay'ada Bloomberg, Haayadda Samafalka Hawlaha Cimilada, Haayadda Samafalka Cimilada ee Yurub (ECF), Haayadda Samafalka ee Foodh (Ford), Haayadda Samafalka ee Hewlett, Haayadda Samafalka ee KR, Haayadda Samafalka ee MacArthur, Haayadda Samafalka ee Mercator, Haayadda Samafalka ee Minor, Haayadda Samafalka ee Oak, Haayadda Samafalka ee Packard, iyo Haayadda Samafalka ee Rockefeller ayaa ka mid ah haayadaha ugu caansan ee taageera hindisayaasha lagula tacaalayo saamaynta isbeddelka cimilada, laguna horumarinayo u-adkaysiga waddamada iyo bulshooyinka saboolka ah.

9.6 Qorshayaasha Iskaa-wax-u-qabsada ah ee Isu-dheellitirka Kaarboonka

Isu-dheellitirka kaarboonku waa hindisayaal-waa dhaqan si isa soo taraysa dunida oo dhan caan uga noqday, dad aad u badan oo taageera isu-dheellitirka kaarboonka ayaana hindisayaashan ku soo biiraya. Deeq-bixiyayaasha oo inta badan ah shirkado gaar loo leeyahay waxay si weyn u maalgeliyaan tignoolajiyadda tamarta nadiifta ah, dhir beerista, ama magdhowga qiiqa kaarboonka ee ka dhasha hawlaha ganacsiga. Waxa jira hindisayaal door ah oo noocan oo kale ah oo gobolka ka socda, waana inay Somaliland ka faa'ideysato awood-u-helidda hindisayaasha noocan ah.

10

**FULINTA SIYAASADDA
ISBEDDELKA CIMILADA**

Dhaqangelinta waxtarka leh ee Siyaasadda Isbeddelka Cimilada Qaranku waxay u baahan tahay go'aan-ka-gaadhistaa xafiiska ugu sarreeya ee qaranka, oo uu weheliyo hoggaan adag oo heer wasaaradeed ah iyo sidoo kale khayraad ku filan (dhaqaale, dad iyo farsamo) oo suurageliya qorshayaasha haayadaha, qaab-dhismeedyada shuruucda iyo ka-qaybgalka macnaha leh ee daneeyayaasha.

10.1 Haayadaha Dawladda

Isbeddelka guud ee aafiooyinka dabiiiciga ah ee cimilada la xidhiidhaa wuxuu keenayaa caqabado waaweyn oo sii kordhaya, taas oo muujinaysa in guuldarraysiga tallaaboooyinka wadareed ee loogu diyaargaroobayo, lagagana jawaabayoo saamaynta isbeddelka cimilada ee qaybaha oo dhami uu noqon doono mid dhaawac weyn geysta, markay noqoto xagga bulshada, dhaqaalaha, deegaannada dabiiiciga ah, iyo guud ahaan deegaanka. Sidaa daraaddeed, waxa loo baahan yahay in lagu dhaqaalo qorshayaal haayadeed oo isku xidhan, kuwaas oo aad muhiim ugu ah fulinta Siyaasaddan Qaran ee Isbeddelka Cimilada ee waddanku doonayo inuu hirgeliyo.

Haayadahan dowladeed ee soo socda ayaa loo aqoonsaday inay yihiin kuwa ay sida ugu weyn u khusayso fulinta Siyaasadda Qaranka ee Isbeddelka Cimiladu, waxayna door aad u muhiim ah ka qaadan doonaan geeddiga Laqabsiga cimilada iyo la tacaaliddeeda, iyaga oo Siyaasaddan ku daraya, kuna dhafaya, horumarinta iyo fulinta socota ee siyaasadaha iyo qorshayaasha qaybahan.

10.1.1 Doorka Wasaaradaha ee fullinta Siyaasadda Isbeddelka Cimilada.

Wasaaradda	Doorka fullinta Siyaasadda
Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka cimilada	Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddelka cimilada waxay qaranka uga masuul tahay ilaalinta iyo daryeelka deegaanka si waafaqsan horumar-ka joogtaysan oo ujeedadiisuna tahay yaraynta faqriga, kor u qaadista heerka nolosha bulshada si loo hubiyo ilaalinta iyo daryeelka maaraynta Deegaanka. Wasaaraddu waxay leedahay doorka hogaminta ee istaraatijiyeed iyo isku dubaridka guud ahaan shaqooyinka la xidhiidha arimaha Deegaanka iyo Siyaasada Qaran ee isbeddelka cimilada.
Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidodka	Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidodka ayaa mas'uul ka ah in ay hubiso kaabeyaasha u adkeysta Isbeddelka cimilada sida dhamaan dhismaha wadooyinka iyo dayactirkooda, buun-doooyinka, gaadiidka cirka iyo badda.

Wasaaradda Horumarinta Beeraha	<p>Wasaarada Horumarinta Beeruhu waxay masuul ka tahay inay si wax ku ool ah u maamusho khataraha la xidhiidha Isbedelka cimilada ee saamaynta ku leh wax soosaarka beeraha.</p> <p>Dadaalada la qabsiga iyo la tacaalida Isbedelka cimilada ee wax ka taraya habka cuntada kuwaas oo ay ka mid yihiin nidaamyada kala duwan ee cunto soosaarka iyo nidaamka beerashada casriga ah la jaan qaadaya Isbedelka cimiladda.</p>
Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	<p>Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka ayaa ka masuula in ay hubiso oo ay qorshayso, samaysana qiimaynta Nuglaanta Cimilada ee dhammaan qaybaha caafimaadka si loo dhiso adkeysiga cimilada iyo ilaalinta caafimaadka bulshada had-dii ay dhacdo musiiblo loona baahan yahay in la ilaaliyo adeeg caafimaad oo ku filan ka hor inta lagu jiro, iyo ka dib masiibooyinka dabiiiciga ah.</p> <p>Wasaaradu waxa ay fulin doontaa barnaamijyada la qorsheeyey ee ka soo baxa qiimeynta iyo daraasada nuglaanta isbedelka cimilada ee qeypta caafimaadka.</p>
Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga	<p>Wasaarada xanaanadda xoolaha iyo horumarinta Reer Miyiga ayaa waajibaadkeedu yahay inay wax ka qabto khataraha la xidhiidha isbedelka cimilada ee saamaynta ku leh waxsoosaarka xoolaha iyo ka warqabka baahiyaha kala duwan ee bulshada reer miyiga.</p>
Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta	<p>Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa mas'uul ka ah inay samayso qiimayn dhamaystiran oo ku aadan u nuglaanshaha isbedelka cimilada ee qaybta tamarta iyo soo saaristaba, si looga miro dhaliyo isbedelada mustaqbalka, wanaajinta iyo kor u qaadida maalgashiga tamarta la cusboonaysiin karo oo nadiifa.</p>



Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha	<p>Wasaarada Horuminata khayraadka Biyuhu waa in siyaasadaheedu la jaan qaadaan khataraha la xidhiidha isbedelka cimilada ee biyo yaraanta, kordhisana ilo biyoodka dalka si loola qabsado saamaynta Isbedelka cimilada.</p> <p>Wasaaradu waxa ay fulin doontaa barnamijada biyo soosaarka iyada oo raaceysa tabo iyo xeelado la jaan-qaadaya isbedelka cimilada, kuwaas oo abuuraya in ay bulshadeenu adkeysi u yeelato saameyntha isbedelka cimilada ee dhinaca biyaha.</p>
Wasaaradda Is-gaadhsiinta iyo Tiknologijiada	<p>Wasaarada isgaadhsiinta iyo ticknoolojijada waa inay horumarisaa kaabayaasha isgaadhsiinta oo la jaan qaadaya masiibooyinka isbedelka cimilada, hagaajisana bedqabka iyo tayada kaabayaasha isgaadhsiinta si loo yareeyo khataraha ka iman kara qalabka isgaadhsiinta xiliyada aafooinka cilimiladu dhacayaan.</p>
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska	<p>Wasaaradda Waxbarashada iyo Saynisku waxay hogaamin doontaa samaynta istaraatijiyado iyo dib u eegis lagu saymaynayo manhajka waxbarashada qaranka si loo waafajijo la qabsiga Isbedelka cimilada ee horumarka waara, loona horumariyo barnamijiyada tababarada macalimiinta iyo wacyigelinta la xidhiidha laqabsiga Isbedelka cimilada ee goobaha Waxbarashada</p>
Wasaaradda Arimaha Gudaha/Dowladaha Hoose	<p>Wasaaradda Arimaha Guduuhu waxay ka masuul tahay ilaalinta guud ahaan aminga qaranka, hagida iyo la socodka gobolada iyo degmooyinka.</p> <p>Sidaa daraadeed, Wasaaradu waxay taageeridoontaa guud ahaan barnamijiyada iyo hal abuurada Wasaarada Deegaanka iyo Isbedelka cimilada iyadoo la tixgalinayo samaynta siyaasadaha iyo hagayaasha la xidhiidha maamul daadajinta Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada.</p>

Wasaaradda Horumarinta Maaliyada	Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay hogaamin doontaa samaynta sanduuqa maaliyadda cimilada ee heer qaran, sidoo kale waxa ay hubin doontaa in miisaaniyadaha heer qaran ay qayb ka noqdaan qorsheyaasha sanadlaha ah ee haayadaha kala duwan ee dawlada si isbeddelka cimilada wax looga qabto.
Wasaaradda Shaqada, Qoyska iyo Arimaha Bulshada	Wasaaradda shaqada, qoyska iyo arimaha bulshada waxay masuul katahay kooxaha nugul sida haweenka, carruurta, naafada iyo kuwa qoxootiga ah, magangelyodoonka iyo baraka-cayaasha, sugida helitaanka xuquuqdooda iyo maclumaadka la xidhiidha khataraha lsbedelka cimilada.
Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyaynta	Wasaaradda howlaha guud, dhulka iyo guriyaynta waxay masuul katahay oo ay fulin doontaa guud ahaan qorshaynta iyo nashqadaynta dhulka oo ay kamid yihiin dajinta siyaasada dhulka. Waxa kale oo wasaaraddu magaaloooyinka ku hagaysaa horumarka joogtaysan ee la xidhiidha laqabsiga iyo khataraha ka iman kara magaaloooyinka, si loo kordhiyo u adkaysiga kaabayaasha magaaloooyinka ee cimilada.
Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha	Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha waxa loo igmaday inay dejiso siyaasadaha maalgashiga, horumarinta iyo kor u qaadida ganacsiga gaarka loo leeyahay iyada oo abuuraysa jawi ku habboon iyo maalgashi warshadeed oo ku habboon deegaanka lana sameeyo qiimaynta saamaynta Deegaanka aaga warshadaha, iyadoo la waafajinayo la qabsiga isbeddelka cimilada.



Wasaaradda Kaluumeyisiga iyo Horumarinta Xee-baha	Wasaaradda Kaluumeyisiga iyo Horumarinta Xee-buhu iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Deegaanka waxa ay daraasad ku sameyn doontaa saameynta isbedelka Cimilada ee Kaluumeyisiga iyo Xeebaha Dalka , waxaanay Siyaasadaheeda ku saleyn doontaa kuwo la jaanqaadaya La qabsiga Isbedelka Cimilada.
--	---

10.2 Unugga Heer Qaran ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada (Coordination Unit)

Si loo xalliyo caqabadda kala-daadsanaanta qorshayaasha siyaasadda, waxa aad muhiim u ah in si fiican la isugu dubbarido, xilna la iska saaro fulinta Siyaasaddan, maaddaama Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu ay hoggaamin doonto fulinta guud ee Siyaasadda Isbeddelka Cimilada Qaranka, wasaaraddu waa in ay abuurto unugga Qaranka ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada.

Unugga Iskuxidhka Isbeddelka Cimiladu waxa uu noqon doonaa unug xaruntiisu tahay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, kaas oo ay qayb ka noqon doonaan xubno ka socda dhammaan daneeyayaasha kala duwan oo ay qayb ka yihii shirkadaha ganacsiga gaarka loo leeyahay.

Unugu si uu u guto waajibaadkiisa shaqo waa inuu xoogga saaro hawlaha soo socda:

- i. Inuu hoggaamiyo fulinta guud ee Siyaasadda Isbeddelka Cimilada Qaranka oo uu sameeyo hagitaanka iyo jihaynta arrimaha la xidhiidha isbeddelka cimilada.
- ii. Inuu xaqijiyo in arrimaha la xidhiidha isbeddelka cimilada lagu daro siyaasadaha horumarinta qaranka iyo qorshayaasha dhammaan qaybaha kala duwan.
- iii. Inuu sameeyo qaabdhismedd isku xidhan oo ku saabsan iskudubbaridka maalinlaha ah ee hawlaha mashaariicda isbeddelka cimilada, kuwaas oo shidaaliya, kana dabqaata siyaasadaha qaybaha ee wasaaradaha iyo haayadaha ay wadashaqayntu ka dhaxayso, oo ah qaybaha ay u badan tahay in isbeddelka cimiladu saamaynayo.
- iv. Inuu aqoonsado, abuurana ilo xogeed iyo aqooneed, isaga oo tixraacaya baahiyaha iyo fursadaha khayraadka maalgelinta laqabsiga isbeddelka cimilada Somaliland.
- v. Inuu sameeyo halbeegyo, nidaam, iyo habraacyo lagu maamulo diiwaangelinta iyo warbixinta hawlaha mashaariicda isbeddelka cimilada ee ay sameeyaan haayadaha kala duwan ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayni, si loo xaqijiyo helitaanka xog cusub oo asaasi ah oo heer qaran ah, loogana faa'ideysto casharrada laga bartay caqabadaha suuragalka ah

ee laqabsiga, waxna loogu biiryo horumarinta qorshayaasha iyo siyaasadaha mustaqbalka.

- vi. Inuu sameeyo nidaamka diiwaangelinta, ka warbixinta, iyo qiyaasta qiiqa neefaha guriga cagaaran (greenhouse gases) ee dhammaan qaybaha kala duwan, si loola socdo isbeddelka qiiqa iyo xaddigiisa, taas oo wax ka tari doonta jidadka inoo furan ee hawlaha horumarka.
- vii. Inuu ku dardargeliyo, una qabanqaabiyo, dadweynaha iyo daneeyayaashaba falanqaynta isbeddelka cimilada, si kor loogu qaado fahankooda ku aaddan isbeddelka cimilada, oo ay ku jiraan natijjooyinka, saamaynaha iyo jawaabaha mustaqbalku, iyada oo si wax-ku-ool ah loo baahinayo xogta la xidhiidha isbeddelka cimilada.

10.3 Qaab-dhismeedyada Shuruucda (Legal Frameworks)

Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland waxa ku jira qodobbo ilaalinta deegaanka khuseeya. Hasayeeshee, saamaynaha taban ee isbeddelka cimiladu waa kuwo dhinacyo badan oo qaybaha oo dhan khuseeya, kuwaas oo keenaya caqabado waaweyn oo sii kordhaya, oo taabanaya dhammaan dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada. Sidaa daraaddeed, fulinta waxtarka leh ee Siyaasaddan Isbeddelka Cimiladu waxay u baahan tahay xayndaabyo sharci oo isku xidhan, si loo xoojiyo ajandayaasha sharci ee hadda jira ee ku saabsan ilaalinta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah, loona horseedo helitaanka horumar joogtaysan oo isu dheellitiran. Haddaba, Dawladda Somaliland waa in ay ku dedaasho samaynta sharci gaar ah oo loogu talagalay isbeddelka cimilada, kaas oo u xilsaaraya haayadaha dawladda, saaxiibbada horumarka ee caalamiga ah, ganacsatada, iyo guud ahaan bulshada inay ka wada shaqeeyaan sidi loo xoojin lahaa awooddha laqabsiga isbeddelka cimilada iyo kartida dalka iyo dadkiisaba, iyada oo lagu salaynayo xayndaabka horumar cimilada u adkaysan kara.

10.4 Ku-darida Isbeddelka Cimilada Qorshaha Qaranka

Waxa muhiim ah in laga baaraandego sidi Siyaasaddan Isbeddelka Cimilada loogu dari lahaa mashaariicda horumarineed iyo siyaasadaha qaybaha kala duwan ee hadda jira ama socda, halkii laga abuuri lahaa siyaasado gooni gooni ah, si loo horumariyo in qaybaha dhqaalah, bulshada iyo deegaanku ay si wax-ku-ool ah uga jawaabaan caqabadaha kakan ee isbeddelka cimilada. Arrintani waxay u baahan tahay in hawlaha isbeddelka cimilada laga dhigo udub-dhexaadka Qorshayaasha Horumarka Qaranka, iyo mudnaantooda. Tan macnaheedu waxa weeye in la isku dubbarido arrimaha ugu mudan ee Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo siyaasadaha qaybaha, oo sidaas lagu maalgeliyo hawlaha isbeddelka cimilada, si loogu daro qarashaadka qaranka. Unugga Heer Qaran ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada oo lagu asaasayo awood haayadeed ayaa xaqiijin doona in arrimaha isbeddelka cimilada si joogto ah



loogu xisaabtamo, looga falceliyo, looguna daro geeddisocodka ballaadhan ee go'aan qaadashada, istaraatajiyadaha iyo waxqabadka horumarka, iyada oo muhiimaddu tahay in arrinkani uu noqdo mid si weyn loo wada aqbalo, loona arko dhibaato halis ah oo saamaynaya dhammaan dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada.

10.5 Heshiisyada Isxilqaanka ah

Waddamo badan ayaa heshiisyada isxilqaanka ah u isticmaala inay ku dhiirrigeliyaan hawlah rasmiga ah ee ka dhanka ah saamaynta isbeddelka cimilada, iyo wax-ka-qabashada dhibaatooyinka deegaanka. Iyada oo ay sababtu tahay fulinta shuruucda ilaalinta deegaanka Somaliland oo awood yar, dawladda Somaliland waa in ay:

- Ku dedaasho inay ka qaybgasho heshiisyada isxilqaanka ah ee ku saabsan wershadaha, gaar ahaan, kuwa soo saara alaabaha balaastigga ah iyo kuwa soo dejija gaasaska shidaalka dabiiiciga ah sida naaftada iyo baadroolka–kuwaas oo khatar ku ah deegaanka, gaar ahaan magaalooyinka.

10.6 Cilmibaadhista, Tignoolajiyadda iyo Horumarka

Qiimaynta cimilada isbeddelaysaa waxay u baahan tahay in la fahmo doorka falcelinta, heerka, iyo saamaynteeda ku aaddan bulshada, iyo guud ahaan deegaannada dabiiiciga ah. Sidaa awgeed, si hab waxtar leh loogaga jawaabo saamaynta isbeddelka cimilada, waddanku waxa uu u baahan yahay in kor loo qaado, lana kordhiyo, cilmibaadhista sayniska iyo in la adeegsado qalab iyo tignoolajiyad munaasib ah.

10.7 Taabbagelinta Arrimaha Lamaanaha

Siyaasaddani waxay dhiirrigelinaysaa in arimaha lamaanaha in lagu daro mashaariicda wax-ka-qabashada isbeddelka cimilada iyo siyaasadaha horumarinta (heer qaran iyo heer qaybeedba) iyo barmaamijiyada iyo mashaariicda waxqabadka, iyada oo si gaar ah loo tixgelinayo kooxaha nugul, gaar ahaan haweenka iyo carruurta. Unugga Heer Qaran ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada oo lagu aasaasi doono awood haayadeed ayaa sidoo kale xaqijjin doona, oo kor u qaadi doona, in arrimaha lamaanaha in lagu daro dhammaan qorshayaasha istaraatajiga ah ee qaybaha, wasaaradaha iyo haayadaha la shaqeeya.

10.8 Fursadaha Isbeddelka Cimilada

In kasta oo uu wato xoog caqabad ah oo aan hore loo arag, haddana waxa uu isbeddelka cimiladu abuurayaa fursado ay haayadaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn labaduba ku wada shaqayn karaan iyaga oo taageeraya istaraatajiyadaha horumarka "korriinka cagaaran" ee ilaalinta deegaanka, si uu u sii wadi karo inuu ina siiyo khayraadka iyo adeegyada deegaanka ee uu nolosha -wanaaggeedu ku tiirsan yahay. In kasta oo caqabadaha uu isbeddelka cimiladu keenayaa ay yihiin kuwo daran, haddana ganacsato badan ayaa dhibaatooyinkan fursado u beddelaya. Tusaale ahaan, iyada oo ay sababtu tahay isbeddelka heerkulka iyo heerarka uumi-baxa, qaybaha beeraha ee waddamada dhaqaalahooda koray way isbeddelayaan, waxaanay adeegsanayaan dalagga iyo farsamooyinka beeraha ee ku habboon isbeddelka cimilada. Si taas la mid ah, qaybaha waxsoosaarka, tamarta iyo gaadiidka ayaa iyaguna safka hore kaga jira qaybaha dhimaya kaarboonka ay soo saaraan, iyaga oo ka faa'ideysanaya ilaha tamarta la cusboonaysiin karo ee nadiifta ah.

Somaliland waxa ay hodan ku tahay ilo aan tiro badan oo tamartooda la cusboonaysiin karo (oo ay qorraxda iyo dabayshu ugu horeeyaan). Si loo xaqijiyo adeegsiga joogtaysan ee khayraadka dabiciiga ah iyo ilaalinta deegaanka, waddanku waa inuu yeesho awood uu ku dabooli karo baahidiisa korantada ee heer qaran, isaga oo u maraya horumarinta hababka yaryar iyo kuwa dhexe ee ay maalgeliyan dawladda iyo ganacsatada gaarka ahi. Sidaa darteed, shirkadaha korantada bixiya ee gaarka loo leeyahay door hoggaamineed bay ka qaadan karaan ka jawaabista fursadaha saamaynta isbeddelka cimilada ee waddanka, iyaga oo maalgelinaya tignoolajiyadda tamarta nadiifta ah. Waxa sidoo kale jira fursado ay dawladda Somaliland ka heli karto maalgelinta dunida, iyada oo u maraysa QM iyo heshiisyada laba-geesoodka ah ee lagu maalgeliyo mashaariicda horumarka cimilada u adkaysanaya, kuwaas oo kor u qaadaya fursadaha dhaqaalaha cagaaran, isla markaasna deegaanka ilaalinaya.





**CAQABADHA SIYAASADDA
QARANKA EE ISBEDDELKA
CIMILADA**

In kasta oo dawladda Somaliland ay ku talagashan tahay inay wax ka qabato arrimaha saamaynta isbeddelka cimilada ee dalka, haddana waxa jira caqabado dabiici ah oo caabbiyi doona fulinta wax-ku-oolka ah ee siyaasaddan, kuwaas oo ay qodobbada soo socdaa ka mid yihiin:

11.1 Caqabadaha Wadashaqaynta

Waxa jira wasaarado door ah, saaxiibbo caalami ah iyo haaya'do badan oo aan dawli ahayn oo ka shaqeeya qaybaha u nugul khatarta isbeddelka cimilada. Badanaa, haayadahani waxay leeyihiiin wadashaqayn aan dhammaystirnayn, marka ay noqoto siyaasadaha qaybaha iyo waxqabadka ama mashaariicda horumarinta. Arrintani waxay abuuri kartaa inuu tafaraaruq ku yimaado fulinta siyaasadaha iyo mashaariicda horumarinta, taas oo horseedi karta hawlo horumarineed oo aan isku xidhnayn.

11.2 Caqabadaha Farsamada, Shaqaalah, iyo Awoodda Dhaqaalah

Waddanku malaha awood farsamo oo si sax ah loogaga warbixiyo ama loogu saadaaliyo arrimaha cimilada la xidhiidha, taas oo sidoo kale taageeri lahayd in dawladda iyo daneeyayaasha kalaba ay abuuraan xog faahfaahsan oo khatarta cimilada ku saabsan, isla markaasna ay diyaariyaan istaraatajiyadaha ku habboon ee lagaga jawaabayo. Xaddidnaanta cudud shaqaale oo tababbaran, oo uu weheliyo farqi weyn oo dhanka kharashaadka qaranka ah, ayaa carqalad ku noqon kara awoodda dawladdu ay ku daboolayso khayraadka loo baahan yahay in si fiican loogaga jawaabo aafcooyinka la xidhiidha isbeddelka cimilada ee dalka.

11.3 Awood-yaraanta Fulinta ee Hababka Xakamaynta

Habacsanaanta ka dhex jirta haayadaha dawladda iyo dhaqangelinta gaabiska ah ee shuruucda ilaalinta deegaanka ayaa sidoo kale carqaladayn kara awoodda dalka ee lagaga jawaabayo khataraha la xidhiidha isbeddelka cimilada.

11.4 Helitaanka Kaalmada Caalamiga ah

Somaliland ma haysato aqoonsi caalami ah oo buuxa, sidaa daraaddeedna xubin ka ma aha QM iyo haayadaha kale ee horumarinta, sida Bangiga Horumarinta Afrika. Tani waxay waddanka ka hor istaagi kartaa inuu si toos ah u helo maalgelino gaar ah, tusaale ahaan, deymaha laba-geesoodka ah, sanduuqa kaalmada caalamiga ah ee Isbeddelka cimilada iyo kuwa dhinacyada badan ee laga helo haayadaha.



12

DABA-GALKA IYO
QIIMAYNTA SIYAASADDA

sbeddelka cimiladu waa xaalad taagan oo weli socota, sidaa daraaddeed baaxadda saamaynta isbeddelka cimilada la xidhiidha iyo fahankeenna saamayntan ku aaddaniba sidoo kale wuu koraya. tan macnaheedu waxa weeye, istaraatajiyadaha hadda jira ee laqabsiga iyo la tacaalidda isbeddelka cimilada labaduba waxay u baahan doonaan in wax laga beddelo. Sidaa awgeed, dawladda Somaliland way aqoonsan tahay muhiimadda uu leeyahay daba-galka fulinta siyaasaddan isbeddelka cimilada iyo qiimaynta natijjooyinka la xidhiidha.

Shaqadan muhiimka ahi waxay tibaaxi kartaa habacsanaan dhanka diyaarinta ah, waxay caddayn kartaa caqabado xagga fulinta ah, waxayna fududayn kartaa qaabaynta siyaasadda.

Iyada oo arrimaha sare lagu salaynayo, waxa lagamamaarmaan ah in muhiimadda la saaro xoojinta iyo socodsiinta Daba-galka iyo Qiimaynta siyaasaddan. Unugga Heer Qaran ee Iskuxidhka Isbeddelka Cimilada, oo lagu asaasayo sharci haayadeed ayaa si xilliyaysan dib ugu eegi doona siyaasaddan, taas oo ah ugu yaraan saddexdii sanaba mar, si uu uga falceliyo caqabadaha suuragalka ah ee arrimaha saacidi kara ama carqaladayn kara fulinta siyaasadda.



TIXRAAC

- Abdulkadir, [2017]. Assessment of Drought Recurrence in Somaliland: Causes, Impacts and Mitigations. Journal of Climatology Weather Forecasting; Available https://www.researchgate.net/publication/317687688_Assessment_of_Drought_Recurrence_in_Somaliland_Causes_Impacts_and_Mitigations.
- Brown, S. [2018]. African countries aren't doing enough to prepare for rising sea levels. Published by University of Southampton. Southampton University; Available <https://www.southampton.ac.uk/news/2019/09/sea-levels-coastal-communities.page>.
- Chen, V. O. [2017]. Temporal and spatial variability of temperature and precipitation over East Africa from 1951 to 2010, Meteorology and Atmospheric Physics, 2017, Volume 129, Number 2, Page 131. Victor Ongoma, Haishan Chen. Meteorology and Atmospheric Physics.
- Goldsmith, B. [2019]. Flight to the future: One land's quest to defuse a climate 'timebomb'. Router; Available from <https://www.reuters.com/article/us-somaliland-climate-migration-exclusive/exclusive-flight-to-the-future-one-lands-quest-to-defuse-a-climate-timebomb-idUSKCN1VV1AD>.
- H. Pörntner, [2019]. I PCC, Summary for Policymakers. Special Report on the Ocean and Cryosphere in a Changing Climate (2019) [H.- O.Pörtner, et al.]. IPCC; Available from https://report.ipcc.ch/srocc/pdf/SROCC_FinalDraft_FullReport.pdf.
- Heidelberg, S.-V. (2016). Climate change impacts in Sub-Saharan Africa: from physical changes to their social repercussions; Springer-Verlag Berlin Heidelberg 2016, Research Gate, 2016. Research Gate; Available from https://www.researchgate.net/publication/290194107_Climate_change_impacts_in_Sub-Saharan_Africa_from_physical_changes_to_their_social_repercussions.
- IFRC, [2016]. World Disasters Report Resilience: saving lives today, investing for tomorrow. IFRC; Available from <https://www.ifrc.org/en/news-and-media/press-releases/general/world-disasters-report-2016---resilience-saving-lives-today-investing-for-tomorrow/>.
- IPCC, [2007]. Fourth Assessment Report - AR4 Climate Change 2007: Synthesis Report. IPCC; Available from <https://www.ipcc.ch/assessment-report/ar4/>.

- IPCC, [2014]. AR5 Synthesis Report. Climate Change; The physical Science Base. IPCC.
- IPCC, [2014]. IPCC, 2014: Annex II: Glossary [Mach, K.J., S. Planton and C. von Stechow (Eds.)]. In: Climate Change 2014: Synthesis Report. Contribution of Working Groups I, II and III to the. IPCC.
- Lindsey, R. [2019]. Climate Change: Global Sea Level; Rebecca Lindsey. [Https://www.climate.gov/news-features/understanding-climate/climate-change-global-sea-level](https://www.climate.gov/news-features/understanding-climate/climate-change-global-sea-level).
- Lockwood, M. [2009]. "Solar Change and Climate: an update in the light of the current exceptional solar minimum," Proceedings of the Royal Society, December 2009. Proceeding of the Royal Society.
- NASA. [2018]. the Effects of Climate Change. NASA; Available <https://climate.nasa.gov/effects/>. Oxfam. [2017]. Climate in Crises; How climate change is making drought and humanitarian. Media
- Briefing. Oxfam; Available from <https://www-cdn.oxfam.org/s3fs-public/mb-climate-crisis-east-africa-drought-270417-en.pdf>.
- Pasquini, A. S. [2019]. Informing climate services in Africa through climate change risk perceptions.
- Climate Services; Volume 15.
- S Brown, e. [2011]. Sea-Level Rise and Impacts in Africa, 2000 to 2100. University of Southampton; Available from https://www.researchgate.net/publication/227008251_Sea-level_rise_impacts_on_Africa_and_the_effects_of_mitigation_and_adaptation_An_application_of_DIVA.
- Sommerlatte, M. and Umar, A. [2000]. an Ecological Assessment of the Coastal Plains of North Western Somalia (Somaliland). UCN; Available from <https://portals.iucn.org/library/node/7783>.
- Ullah, [2016]. National Biodiversity Strategy and Action Plan (NBSAP) of Somalia. FAO; Available from <https://www.cbd.int/doc/world/so/so-nbsap-01-en.pdf>.
- UNDP, [2013]. Annual Report. UNDP; Available <https://www.undp.org/content/undp/en/home/librarypage/corporate/annual-report-2013.html>.
- UNDP, [2018]. Somali Drought Impact and Need Assessment. UNDP; Available from <https://www.undp.org/content/undp/en/home/librarypage/climate-and-disaster-resilience->



- </somalia-drought-impact-and-needs-assessment.html>.
- UNDP, [2018]. Somali Drought Impact Need Assessment. UNDP; Available from <https://www.undp.org/content/undp/en/home/librarypage/climate-and-disaster-resilience->
- </somalia-drought-impact-and-needs-assessment.html>.
- UNFCCC, [2012]. Slow onset events Technical paper. UNFCCC; Available from <https://unfccc.int/resource/docs/2012/tp/07.pdf>.
- UNFCCC (1992). UNITED NATIONS FRAMEWORK CONVENTION ARTICLE 1. UNFCCC; Available from https://unfccc.int/files/essential_background/background_publications_htmlpdf/application/pdf/conveng.pdf.
- Wilson, T. (2018). Drought in Somaliland; Special Report. Financial Times; Available from <https://www.ft.com/content/c8b475b2-ebf2-11e8-89c8-d36339d835c0>.





Wasaaradda Deegaanka iyo
Isbedelka Cimilada
Jamhuuriyada Somaliland